JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA

# WARBIXINTA ODDOROSKA DHAQAALAHA SOOMAALIYA

## DIB-U-DHISKA DHAQAALAHA SOOMAALIYA: KAGUULAYSIGA CAQABADAHA & KAFAA'IIDAYSIGA FURSADAHA LAGU XAQIIJINAYO KOBOC DHAQAALE OO WAARA



2-AAD

JAMAHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIA

WASAARADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA
IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA

# WARBIXINTA ODDOROSKA DHAQAALAHA SOOMAALIYA SOOSAARISTII 2-AAD

## DIB-U-DHISKA DHAQAALAHA SOOMAALIYA: KAGUULAYSIGA CAQABADAHA & KAFAA'IIDAYSIGA FURSADAHA LAGU XAQIIJINAYO KOBOC DHAQAALE OO WAARA

MAY 2025

# EREYGA WASIIRKA



Waxaa farxad weyn ii ah inaan idiin soo bandhigo Warbixinta Oddoroska Dhaqaalaha Soomaaliya daabacaaddii labaad, taas oo ah qiimayn ballaaran oo lagu eegayo heerka dhaqaale ee dalkeenna. Warbixintani waxa ay si qotadheer u falanqaynaysaa horumarka dhaqaale ee Soomaaliya ku tallaabsatay labaatankii sano ee la soo dhaafay, iyada oo iftiimin doonta fursadaha iyo caqabadaha qaabeeyey koboca dhaqaale ee dalka.

Warbixintani waxa ay aragti guud ka bixinaysaa dhaqaalaha Soomaaliya, shaqaalaha, jawiga maalgashiga, siyaasadaha maaliyadda iyo lacagaha, sugnaanshaha cuntada, ganacsiga dibadda, iyo deymaha dalka lagu leeyahay; waxaana lagu laray talooyin siyaasadeed iyo istaraatiijiyado lagu hagayo geeddisocodkeenna aan ku higsanayno koboc dhaqaale oo waara.

Dhaqaalaha Soomaaliya waxa uu muujiyay adkaysi marka loo eego dhibaatooyinkii caalamiga ahaa ee soo waajahay, sida cudurkii masiibada ahaa (COVID-19) iyo saamaynta sii kordheysa ee isbeddelka cimilada.

Iyada oo caqabadahaasi ay jiraan, haddana dhaqaalaha dalka waxa uu joogteeyay koboc-dhaqaale oo dhexdhexaad ah, tiiyoo waxsoosaarka guud ee dalku uu celcelis ahaan gaarayay 5.1% intii u dhexeysay 2004 – 2023. Si kastaba ha ahaatee, kobaca dhaqaale ee dalka si siman looma qaybin, taas oo hoosta ka xariiqaysa baahida degdegga ah ee loo qabo hirgelinta siyaasado xoojinaya horumar dhaqaale oo loo dhan yahay loona siman yahay (caddaalad ah).

Natiijooyinka warbixintani waxa ay caddaynayaan sida ay dawladda Soomaaliya uga go'an tahay in ay la timaaddo istiraatiijiyado kor u qaadaya waxsoosaarka beeraha, kala noocyaynta dhaqaalaha, xoojinta sidii ganacsiga gaarka loo leeyahay qayb uga noqon lahaa kobcinta dhaqaalaha, iyo dhisidda raasamaal dadeed oo xooggan.
Suuqa shaqada oo xoogaysta loona dhan yahay ayaa udub-dhexaad u ah isbeddelka dhaqaale ee Soomaaliya. Dawladda waxaa si buuxda uga go'an inay furto fursadaha dalka ka jira oo dadka oo dhammi u siman yahay, gaar ahaan haweenka iyo dhallinyarada.

Sida warbixintani iftiimisay, in la kordhiyo awoodda shaqaaluhu waa mid lamahuraan ah, annaguna—dowlad ahaan—waxa aannu qaadaynaa tallaabooyin wax-ku-ool ah, si xoogga shaqaalaha loo siiyo tababarrada iyo fursadaha loo baahan yahay. Arrintan ayaa loo mari doonaa wadiiqooyin kor loogu qaadaayo tababarrada xirfadaha, hindisayaasha shaqa-abuurka, iyo iswaafajinta xaddiga shaqaalaha iyo baahida suuqa ka jirta. Waxaan xoojinaynaa suuq firfircoon oo loo wada dhan yahay—kaas oo qof kasta oo Soomaali ah awood u siinaya in uu ka qaybqaato kobaca dhaqaalaha qarankeenna.

Maalgashiga ayaa ah mashiinka ugu muhiimsan ee koboca dhaqaalaha dhaqaajinaya, dowladdana waxaa ka go'an in ay diyaariso jawwi soo jiidanaayo maalgashiga.
Haddaba, annaga oo la kaashan doonna, hagaajinta dowladnimada, dhameystirka iyo xoojinta shuruucda lagama maarmaanka ah, casriyaynta kaabayaasha dhaqaalaha; waxaan ka shaqayn doonnaa sidii Soomaaliya looga dhigi lahaa dal maalgashagiisa lagu tartamo.

Intaa waxa dheer, waxaa la habaynayaa siyaasaddeenna maaliyadda iyo lacagta, si loo xoojiyo hay'adaha maaliyadda, lacagta qaranka loo fariisiyo, seeska maaliyaddana loo fidiyo (dalka oo dhan). Dadaalladan ayaa lamahuraan u ah sidii loo damaanadqaadi lahaa xasilloonida dhaqaale dhammaystiran, loona furi lahaa dhinacyo cusub oo daarran koboc dhaqaale oo waara.

Sugnaanta cuntada ayaa iyaduna weli ah mid walaaceeda wadata, waxaana ugu wacan jaahawareerka cimilada, hoos-u-dhaca waxsoosaarka beeraha, iyo ku tiirsanaanta xad-dhaafka ah ee wax-soodejinta. Hoos-u-dhaca heerka iskufilnaanta cuntada oo ka soo degtay 66% sannadkii 2004, soona gaartay 32% sannadkii 2023 ayaa tilmaamaysa baahida daran ee loo qabo in tallaabo degdeg ah la qaado.

Dowladdu waxa ay ka shaqaynaysaa fulinta talaabooyin wax tar leh, si loo xoojiyo adkaysiga beeraha, kordhinta waxsoosaarka, iyo samaynta nidaam-cunto oo waara, awoodna u leh in uu iska caabbiyo khal-khalka isbadalka cimilada la xiriira. Dhinaca kale, Soomaaliya waxa ay qaadaysaa tallaabooyin muhiim ah oo ay ku xoojinayso kaalinteeda ganacsi iyada oo kaashanaysa noocyaynta wax-dhoofinta, hagaajinta hannaanka ganacsiga, iyo xoojinta dhexgalka suuqyada caalamiga ah. Guulaha ugu muhiimsan ee aan xaqiijinnaya waxaa ka mid ah halgankii guusha ku soo dhammaaday ee ahaa barnaamijkii deyncafinta ee loogu talagalay dowladaha ay deymuhu la degeen, soona idlaaday bishii 12aad, 2023. Tani waxa ay keentay in ay si weyn hoos ugu dhacday deymihii dibadda ee dalkeenna lagu lahaa.

Aragtiyaha iyo talooyinka siyaasadeed ee ku jira warbixintan waxay si dheer ugu baaqayaan dhammaan daneeyayaasha u heellan isbeddelka dhaqaale ee Soomaaliya in ay si wadajir ah hawshaas uga shaqeeyaan.

Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha iyada oo gudaneysa waajibaadka saaran waxaa ka go'an horumarinta siyaasadaha dhaqaale ee wax tarka u leh dowladda Soomaaliyeed.

Waxaan si weyn ugu mahadnaqayaa dhinacyada ay khusayso oo dhan, ayna ku jiraan wasaaradaha iyo hay'adaha dowladda, saaxiibbada nagala shaqeeya horumarinta, gaar ahaan, Bankiga Adduunka oo nagala shaqeeyay soo saarista warbixinta.

Sida oo kale, waxaan bogaadinayaa Agaasimaha guud Mudane Maxamed Shire oo hawshan hagayey, waxaanan sidoo kale u mahadcelinayaa Agaasimaha Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Cabdi-naasir Cumar Kaatib iyo kooxdii la shaqaynaysa oo u dhabar adeegtay sidii warbixintan loo soo saari lahaa.

**Mudane Maxamuud C Sheekh Faarax (Beenebeene)**

Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

# HORDHAC



Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan soo bandhigno daabacaadda labaad ee Warbixinta Oddoroska Dhaqaalaha Soomaaliya, oo ah falanqayn muhiim ah oo sannadkiiba mar dhaqaalaha qarankeenna lagu sameeyo jeedaalin guud.

Hindisahan (diyaarinta warbixinta) oo hoos-imanaya Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxa uu soo bandhigayaa ama uu aragti guud iyo xogo muhiim ah ka bixinayaa dhaqaalaha Soomaaliya, shaqaalaha, maalgashiga, siyaasadaha maaliyadda iyo lacagaha, sugnaanshaha cuntada, ganacsiga, iyo deymaha dalka lagu leeyahay; waxa uuna bixinayaa talooyin siyaasadeed iyo istaraatiijiyado ku dhisan xog ay hay'adaha dowladda soo uruuriyeen, loogana golleeyahay in xalliyo caqabadaha dhaqaale ee markaasdowladda hortabinta u leh.

Warbixinta sannadkan ayaa noqonaysa mid aad muhiim u ah; maadaama ay la jaanqaadayso Qorshaha Isbedelka Qaran ee dhowaan la daahfuray. Xogaha lagu sheegay warbixintan ee ku saabsan soo jiidashada maalgashiga, iyo dib-u-habaynta dhinacyada kala duwan ee dhaqaalaha ayaa si toos ah u xoojinaysa ujeeddooyinka laga leeyahay Qorshaha Isbedalka Qaran.

Inkasta oo ay jiraan caqabado badan, haddana dhaqaalaha Soomaaliya waxa uu muujiyay adkaysi. Si kastaba ha ahaatee, xaqiijinta koboc waara waxaynooga baahan tahay kago'naanjoogto ah oo lagu xoojinayohay'adaha dowladda, maamulwanaagga iyo hagaajinta jawiga maalgashiga.

Waxaa sidoo kale u baahan inaan hoosta ka xarriiqnocaqabadaha ay tahay inaan ka guuleysanno si loo helo bulsho xor ka ah saboolnimada. sugidda cuntada, abuurista fursado shaqo, iyo xaqiijinta adeeg maaliyadeed oo habboon ayaa ah arrin aad muhiim u ah, si nolosha dadka loo hagaajiyo.

Waxaan aad u bogaadinayaa Agaasime Cabdinaasir Cumar Katiib iyo hoggaamintiisa wanaagsan. Waxa kale oo aan u mahad-naqayaa qoraayaasha kala ah: Prof. Dr. Muctasim Axmed Cabdiweli iyo Maxamed Yuusuf Cabdiqani, oo muujiyay khibrad farsamo oo dhaxalgal ah.

Waxa kale oo aan u mahadcelinayaa Bangiga Adduunka iyo saaxiibada kale ee naga caawiyay diyaarinta warbixintan ama xogo nagu taageeray. Ugu dambayntii, waxaan bogaadinayaa taageerada hay'adaha kala duwan ee dawladda.

Wasaaradda waxaa ka go'an diyaarinta warbixinno caddaymo sugan ku dhisan. Waxaan aad ugu dhiirigelinayaa dhammaan daneeyayaashu inay ka faa'iidaystaan warbixintan si loo dhaqaajiyo isbeddelka dhaqaale ee Soomaaliya, loona xaqiijiyo himilada laga leeyahay Qorshaha Isbadalka Qaranka (QIQ).



**Maxamed Shire**
Agaasimaha Guud.
Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

# BOGAADIN



Daabacaadda labaad ee ‘Warbixinta Oddoroska Dhaqaalaha Soomaaliya’ waxa ay ka dhigan tahay dadaal wadajir ah, waxaannuna si mug iyo miisaan leh ugu mahad-celinaynaa cid kasta oo diyaarinteeda gacan ka geysatay. Waxaa mahad gaar ah mudan qoraayaasha kala ah: Prof. Dr. Muctasim Axmed Cabdelmawla oo ah bare sare oo ka tirsan kulliyadda dhaqaalaha ee Jaamacadda Gezira iyo Maxamed Yuusuf Cabdiqani oo ka tirsan Waaxda Horumarinta Dhaqaalaha ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha oo muujiyay khibrad farsamo oo taabbagal ah, ayna ka go’nayd soosaarista falanqayn tayadeedu aad u sarrayso.

Waxaa kale oo bogaadin mudan kooxdii la shaqaynaysay oo iyaguna muujiyay hawlkarnimo dhinaca shaqada ah, guud ahaan, intii ay socotay diyaarinta warbixinta.

Waxaa sidoo kale xusid mudan taageerada baaxada leh ee Bangiga Aduunka iyo saaxiibada kale ee Soomaaliya ay ka geysteen soo saarista warbixintan, Sida oo kale,waxaan u mahad-celinaynaa wasaaradaha, wakaaladaha, iyo hay’adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya oo gacan weyn ka geystay mudadii ay socdeen shirarka xog-uruurinta iyo wadatashiga ah.

Wasaaradda, iyada oo haatan soo saartay warbixintii labaad, waxaa ka go'an diyaarinta warbixinno falanqeynaya xaaladda dhaqaale ee dalka taas oo ku dhisan xogo sugan oo ay soo uruuriyeen hay’adaha dowladda.

Dadaalladeena joogtada ahi waxa ay ka tarjumayaan sida ay nooga go'an tahay xogsiinta doodaha lagu gorfaynayo guud ahaan galalka waaweyn ee dalka, hagidda go'aannada siyaasadeed, iyo taageeridda yoolalkaiyo himilada lagu doonayo in looga miradhaliyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (QIQ).

Ugu dambeyntii, waxaan u mahacelinaayaa wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Mudane Maxamuud Cabdiraxmaan Sheekh Faarax “BeeneBeene” hogaaminta iyo taageerada wax ku oolka ah ee uu muujiyayinta ay socotay diyaarinta warbixintan.

**Cabdinaasir Cumar Kaatib**
Agaasimaha Horumarinta Dhaqaalaha
Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

# TABLE OF CONTENTS


I EREYGA WASIIRKA

IV HORDHAC

VI BOGAADIN

VII SOOGAABISYO

VIII JALEECIDDA QEYBAHA KALA DUWAN EE DHAQAN-DHAQAALAHA SOOMAALIYA

X GUUDMAR KOOBAN

1 CUTUBKA KOOWAAD
Geedisocodka Dhaqaalaha: Muuqaallada Waxsoosaarka Gudaha & Kororka Dhaqaalaha

13 CUTUBKA LABAAD
Dadka Shaqeeya & Kuwa aan Shaqeyn

21 CUTUBKA SADDEXAAD
Maalgashiga Gudaha iyo Dibadda

30 CUTUBKA AFRAAD
Qiimeynta Siyaasadda Lacagta iyo Maaliyadda

41 CUTUBKA SHANAAD
Sugnaanta Cuntada: Falanqeynta Xaaladda iyo Kajawabidda Isbeddelka Cimilada

55 CUTUBKA LIXAAD
Ganacsiga Dibadda & Sarrifka Lacagaha

66 CUTUBKA TODDOBAAD
Deymaha Dibadda & Dulsaarka

78 RAADRAACYO (REFERENCES)

# SOOGAABISYO

| | |
|---|---|
| AfCFTA | Aagga Ganacsiga Afrika ee Xorta ah |
| AfDB | Bankiga Horumarinta Afrika |
| AML | Ladagaallanka Lacag-dhiqista |
| ARMA | Celceliska Dhexe ee Dhaqdhaqaaqa Hoobadka |
| BLT | Dhisidda Heshiis Kirayn iyo Tarasbootayshan |
| CBS | Bankiga Dhexe ee Soomaaliya |
| COMESA | Suuqa Bariga iyo Koonfurta Afrika ee La Wadaago |
| COVID-19 | Cudurkii safmarka ahaa ee Karoonaha 2019-kii |
| EAC | Bulshada Bariga Afrika |
| FDI | Maalgashiga Shisheeye ee Tooska ah |
| FGS | Dowladda Federaalka ee Soomaaliya |
| FIL | Xeerka Maalgashiga Shisheeye |
| GDP | Waxsoosaarka Guud ee Gudaha |
| HIPCs | Dowladaha Deymuhu La Degeen |
| ICT | Tikniloojiyada Xogaha & Isgaarsiinta |
| IDA | Ururka Horumarinta ee Caalamiga ah |
| IGAD | Urur-goboleedka Igad |
| IMF | Hay'adda Lacagta Dunida |
| MDRI | Qoraalku si fiican uma muuqanayo |
| MoF | Wasaaradda Maaliyadda |
| MoLSA | Wasaaradda Shaqaalaha & Arrimaha Bulshada |
| MoPIED | Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga & Horumarinta Dhaqaalaha |
| MT | Mitirtan |
| NBS | Xafiiska Qaranka ee Tirakoobka |
| NIPS | Istaraatiijiyadda Qaranka ee Dhiirrigelinta Maalgashiga |
| ODA | Ururka Horumarinta Rasmiga ah |
| OIC | Ururka Iskaashiga Islaamka |
| OLS | Afar-geesyada Caadiga ah ee Ugu Yar |
| OECD | Ururka Dhaqaalaha, Iskaashiga & Horumarinta |
| PPP | Iskaashiga Hay'adaha Dowladda iyo Kuwa Gaarka ah |
| SDGs | Yoolasha Lagu Gaarayo Horumar Joogto ah |
| SOMINVEST | Xafiiska Dhiirrigelinta Maalgashiga Soomaaliyeed |
| SOS | Shilin Soomaali |
| SRA | Hay'adda Dakhliga Soomaaliya |
| UNCTAD | Hay'adda Qaramada Midoobay u Qaabilsan Ganacsiga iyo Horumarinta |
| UNEP | Barnaamijka Deegaanka ee Qaramada Midoobay |
| UNDP | Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay |
| USDA | Waaxda Beeraha ee Maraykanka |
| US$ | Lacagta Maraykanka (Doollar) |
| WB | Bankiga Adduunka |
| WTO | Ururka Ganacsiga Adduunka |

# JALEECIDDA QEYBAHA KALA DUWAN EE DHAQAN-DHAQAALAHA SOOMAALIYA



- Dakhliga Guud ee Calaa Qof (USD), 2023 $ 695
- Heerka Koboc ee Dakhliga Guud ee Gudaha (% Sannadkii) 4.2% 2023
- Heerka Sicirbararka %, 5.57% Sannadkii 2024
- Qiimaha Sarrifka (Shilin Soomaali iyo USD), 2024 1$=28118 Shillin
- Maalgelinta Shisheeye ee Tooska ah (USD), 2023 676.5 Malyan
- Heerka shaqa-la'aanta (% Shaqaalaha), 2019 21.4%
- Heerka Kobaca Dadweynaha (% Sannadle), sanadka 2023 3.1%
- Celceliska Cimriga Bulshada ee La Filayo (% sano), 2023 59 sano sannadka 2023
- Heerka Akhriska iyo Qoraalka(% dadka waaweyn) 2022, 41%
- Heerka Saboolnimada (% ku nool meel ka hooseysa diillinta faqriga) 54.4% sannadka 2023
- Helitaanka Biyo Nadiif ah(Dad gaaraya %), 77.7%, sanadka 2022
- Tusaha Horumarinta Dadka (HDI) (Dhibcaha iyo Darajada) Dhicaha 0.380, Darajada 193aad Sannadkii 2022
- Lacaga La Soo Xawilay (USD), 2024 $6.23 Bilyan

*Central Bank of Somalia (CBS)* | *Somalia National Bureau Of Statistics* | *World Bank* | *UNDP*

# GUUDMAR KOOBAN

Dhaqaalaha Soomaaliya waxaa uu ku suntanyahay xaalado murugsan oo isugujira dhib iyo dheef isbarkan, fursado iyo caqabado is huwan. Warbixintan oo toddoba cutub ka koobaniwaxay falanqaynaysaa dhaqdhaqaaqa dhaqaalaha dalka, cududda shaqaalaha (labour force), muuqaalka maalgashiga, siyaasadda lacagaha iyo maaliyadda, sugnaanta cuntada (food security), ganacsiga dibadda iyo deymahadalka lagu leeyahay.Warbixintu waxay qaadaadhigaysaa xaaladaha murugsan ee ku xeeran dhaqaalaha Soomaaliya, waxayna diiradda saaraysaadhinacyada saamaynta ku leh, caqabadaha ku gudban iyo talabixinnada siyaasadeed.

Warbixintan waxaa bilaya iyada oo adeegsatay xogo badan oo soo taxnaamuddadii u dhaxaysay 2004-tii ilaa 2023-kii, xogahaas oo lagu sheegaycutubyada badankood. Intaa waxaa raaca,iyada oo la adeegsaday habab cilmibaadhiseed oo kala duwan; si loo helo ama loola soo boxo natiijo sugan oo wax-ku-ool ah. Intii u dhexeysey sannadihii 2004-kii ilaa 2023-kii,dhaqaalaha Soomaaliya waxaa soo foodsaaray caqabado waaweyn oo ay ugu wacanayd dhacdooyin badan oo dunida ka dhacay. Dhacdooyinka ugu muhiimsan ee dhaqaalaha Soomaaliya saameeyay waxaa kamid ah:

- Dhibaatada tamarta oo dunida oo dhan ka dhacday intii u dhexeysey (2004 – 2008), kana dhalatay sara-u-kac ku yimid qiimaha shidaalka, si ba'anna u saamaysay dhaqaalaha Soomaaliya oo gebi ahaanba ku tiirsan, shidaalka dibadda laga keeno.
- Dhibaatadii dhaqaale ee dunida ka dhacday sannadkii (2008), xilligaas oo hoos-u-dhac ba'ani ku yimid dhaqaalihii dunida oo dhan.Tani waxay keentayhoos-u-dhac weyn oo ku yimid maalgashigii dalka iyo duruufo adag oo soo gaaray dhaqaalaha Soomaaliya.
- Dagaalkii Yaman ka dhacay (2015) oo qalalaasaha gobolka sii kordhiyay, si ba'anna u saameeyay ganacsigii iyo maalgashigii Soomaaliya ka jiray.
- Cudurkii COVID-19ee dhacay (2019– 2022) oo keenay in dhamman shaqooyinkii dunidu istaagaan, ayaa isaguna sababay hoos-u-dhac weyn oo ku yimid dhaqaalaha Soomaaliya, isla markaana horseeday kororka saboolnimda iyo shaqala'aan dunida guud saameeshay.
- Dagaalkii Ruushka iyo Yukreyn ee qarxay (2022) kaas oo dhaqaalihii dunida dhulka la galay, gaar ahaan, suuqyadii shidaalka iyo cuntada. Kor-u-kicii ku yimid qiimaha shidaalka, gaaska iyo qamandiga ayaa culays badan ku keenay dhaqaalihii dunida oo dhan—kana mid yahay; dhaqaalaha Soomaaliya.

Cutub kastawaxaa lagu caddeeyay natiijooyinka ugu muhiimsan ee ka soo baxay, si waafaqsan qaabka ay cutubyadu isugu xigaan ee hore loo soo sharaxay.

Dhaqaalaha Soomaaliya waxaa uu ku suntan yahayama ku tiirsan yahay beeraha,warshado yaryar oo raad-dhaqaajis ah iyo adeegyada ay bixiyaan shirkadaha xawaaladaha iyo isgaarsiintu. In kasta oo ay jiraan caqabadoka dhalanaya dhibaatooyinka cimilida, xasilloonidarrada siyaasadeed iyo kaabayaasha dhaqaalaha oo aad u yar; haddana waxsoosaarka gudaha dalku (GDP) waxaa uu sameeyay koboc lagu qiyaasikaror 5.1% sannadkii, laga bilaabo 2004-tiiilaa 2023-kii.

Si kastaba ha ahaatee, kobaca dhaqaalaha dalku waxaa uu ahaa mid kacaakufaya. Sida oo kale, dalka oo ku tiirsan badeecadaha dibadda laga keeno,una nugul khatarahadeegaanka ayaa caqabad ku ah in la helo koboc dhaqaale oo waara. Koboca dhaqaale ee Soomaaliya waxaa uu muujiyay, in uu faa'iido kooban ama xaddidan u soo hooyay dadka saboolka ah; iyada oo heerka halista saboolnimaduna uu hoos u dhacay qaddar yar oo aan ka badnayn boqolkiiba 0.20%, mar kasta oo koboca dhaqaaluhu uu kordho qaddar gaaray 1%.

Haddaba, si kor loogu qaado kobaca dhaqaalaha dalka, waa in diiradda la saaro hormarinta wax- soosaarka beeraha, kaladuwanaanta ilaha dhaqaalaha, hormarinta ganacsiyada gaarka ah, maalgashiga kaabayaasha asaasiga ah, awoodsiinta iyo horumarinta karaanka bulshada (building human capital), kafaa'iidaysiga tiknoolajiyada iyo hal-abuurka, iyo xoojinta maamulka iyo hay'adaha dawladnimada. Dadka Soomaaliyeed ee shaqeeya ayaa si aad ah u kordhay labaatankii sano eela soo dhaafay, iyaga oo kor uga soo kacay (5.5) milyan sannadkii 2004-kii, soona gaaray (8.9) milyan sanadkii 2023-kii. Si kastaba ha ahaatee, xaddiga haweenka shaqeeya ayaa ah mid aad u hoosaysa iyada oo celcelisahaan boqolkiiba 49% shaqaaluhu rag yihiin,halka ay dumarkuyihiin boqolkiiba 22%. Heerka shaqala'aanta ayaa iyaduna si welwel badan u sarraysa, iyada oo dadka shaqala'aanta ahi ee gaaray da'da shaqada ay yihiin 20%, Sidoo kale waa mid aan isu dhigmin ama isu dheellitirrayn marka laga fiiriyo farqiga jinisiga ah oo haweenka ayey saamayn taban ku sii leedahay.

Haddaba, si caqabadahaas wax looga qabto, waa in diiradda la saaro sidii dadka loo siin lahaa xirfado dhinacyada la soo sheegay la xiriirta, loona taageeri lahaa ganacsiga hormuudka ah, dhiirrigelinta shaqaalaysiinta haweenka iyo in la dammaanadqaado shaqaalaysiinta muwaaddiniinta dalka u dhashay marka la eego mashaariicda dibadda laga maalgeliyo. Intaas waxa dheer, dejinta qorshexilli fog ah oo maaraynta shaqaalaha khuseeya, xoojintaisudheellitirka hormarinta gobollada dalka,dhiirrigelinta warshadaynta wax-soosaarka beeraha, xoojinta go'aan-qaadasho lagu dhisay xogo sugan; ayaa ah arrimo aad muhiim u ah oo xoojinaya wadaagga fursadaha shaqada (rag iyo dumar) iyo yaraynta shaqa-la'aanta Soomaaliya ka jirta.

Soomaaliya waxay leedahay fursado maalgashi oo dhinacyo kala duwan leh, sida: beeraha, warshadaha, dalxiiska, tiknoloojiyadda iyo isgaarsiinta, ganacsiga, waxbarashada iyo kobcinta awoodsiinta dadka (capacity building). In kasta oo fursadahaasi ay jiraan, haddana maalgashiga Soomaaliya waxaa uu wajahayaacaqabado badan, sida:xasillooni-darro, kaabayaasha dhaqaalaha oo liita, maalgelin ciriiri ah (intii loo baahnaa ka yar), xiddidnaanta goobaha shaqo, caqabado dhinaca deegaanka ah, hoos-u-dhaca qiimaha lacagta dalka, kharashaadka hawlgelinta oo badan, iyo cashuurta oo aad u sarraysa. Si kor loogu qaado maalgashiga dalka, xukuumaddu waxay hirgelisay siyaasado ay ka mid yihiin: Istaraatiijiyadda Dhiirigelinta Maalgashiga Qaranka(NIPS) iyo Sharciga Maalgashiga Shisheeye (FIL).

Natiijooyinku waxay muujinayaan in maalgashiga shisheeye ee tooska ah (FDI) uu ahaa hormuudka koowaad ee kobaca dhaqaalaha Soomaaliya uu labaatankii sano ee la soo dhaafay ku tiirsanaa. Si kastaba ha ahaatee, maalgashigaasi muwaaddiniinta Soomaaliyeed uma abuurin fursado shaqo oo la taaban karo. Haddaba,si loo xoojiyo deegaanka maalgashiga, soojeedinta iyo talada siyaasadaha xukuumadda waxaa kamid ah: xaqiijinta xasilloonida iyo nabad waarta oo dalka ka hirgasha, maamulwanaag taabbaggal ah, diyaarinta jawi lagu shaqayn karo, hormarinta kaabayaasha dhaqaalaha ee asaasiga ah, xoojinta fursado maalgashi oo loo siman yahay, xoojinta iskaashiga hay'adaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay, diyaarinta waxyaabo maalgashiga dhiirri gelinaya, kordhinta fursadaha maalgelin lagu heli karo, iyo barashada qaabka ugu wanaagsan ee dunida loola macaamilo.

Siyaasadda maaraynta lacagaha iyo maaliyadda Soomaaliya waxa ay wajahaysaa caqabado waaweyn oo ay kamid yihiin:dhaqaalaha doollarka ku tiirsan, dakhligagudaha oo yar, iyo gaabis weyn oo dhinaca miisaaniyadda ah. Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, waxa uu higsanayaa xasilinta sicirka suuqa, habayntanidaamka sarifka, iyo ilaalinta xasilloonida maaliyadda. Sidaa oo ay tahay, haddana meelmarinta siyaasadda lacagta waxaa caqabad ku ah dalka oo aan gebi ahaanba lahayn lacag rasmi ah, iyo lacago badan oo been-abuur ah suuqyada ka buuxa. Siyaasadda maaliyaddu waxa ay xoogga saaraysaameelmarinta kobcinta iyo xasilinta dhaqaalaha; balse xukuumadda oo ku tiirsan kaalmada dibadda iyo kharashaadka lagu bixinayo hormarinta oo aad u badan ayaa saamayntii loo baahnaa yaraynaya.

Si kor loogu qaado siyaasadda lacagaha iyo maaliyadda, Xukuumadda Soomaaliya waa in ay mudnaanta siiso dib-u-soo celinta lacagtii qaranka, xoojinta awoodda Bangiga Dhexe, iyo hagaajinta maamulka maaliyadda. Soomaaliya waxa ay wajahaysaa caqabadodhinaca cuntada ah, iyada oo uu jiro hoos-u-dhac ku yimid heerka iskufilnaanta dalagyada oo hoos uga dhacay boqolkiiba 66% 2004-tii ilaa boqolkiiba 11% 2023-kii. Dalku waxa uu si weyn ugu tiirsan yahay waxyaabaha dibadda laga keeno, iyada oo isticmaalka bariiska iyo qamandigu uu sii kordhayo marba marka ka sii dambeeya. Isbeddelka cimilada ayaa cuntayaraantii sii kordhiyay iyada oo abaarihii isdaba joogay ay sababeen hoos-u-dhac gaaray a boqolkiiba 23.4% oo ku yimid waxsoosaarkii cuntada, halka dhulkii la beerayayna uu boqolkiiba 33% hoos u dhacay, waxsoosaarkii dalagguna waxa uu hoos u dhacay celcelis ahaan boqolkiiba 2.7% labaatankii sano ee la soo dhaafay. Waxaa hoos u dhacay cuntadii uu qofku la soo baxayay, halka cuntadii uu isticmaalayayna ay sii korodhay. Xoolaha nool ayaa lafdhabar u ah dhaqaalaha Soomaaliya, iyada oo dibadda loo dhoofiyo, dalka gudihiisana lagu cuno, fursado shaqana laga helo.

Si kastabaha ahaatee, abaarihii ayaa sababay hoos-u-dhac weyn oo ku yimid xoolihii. Si loo hagaajiyo badqabkaoonta—cunnada iyo cabbitaanka (food security), Soomaaliya waa in ay dejiso qorshayaal qaran oo lagu horumarinayo beeraha, waana in laga baaraandego xeelado lagula qabsanayo isbeddeka cimilada, lagu hagaajinayo awoodda waxbeeriseed ee reer miyiga, iyo in la meelmariyo siyaasad si caddaalad ah

loogu jaangoynayo sicirka waxsoosaarka beeraha, lagu ilaalinayo xuquuqdabeeralayda, laguna xoojinayo qaababka looga jawaabayo xaaladaha degdegga ah. Ganacsiga dibadda ee Soomaaliya ayaa ah mid aad u liita, waxaana ugu wacan dalka oo ku tiirsan waxyaabaha dibadda ka yimaadda, halka waxyaabaha dibadda loo dhoofiyaa ay aad u yar yihiin.

Furfurnaanta ganacsiga ee dalka ka jirta ayaa siyaaday, balse saamaynta arrinkani koboca dhaqaalaha ku leeyahay waa mid aad u yar, waxaanaugu wacan isticmaalka badan ee la caadaystay in waxyaabaha dibadda laga keeno aad loo isticmaalo.


Qiimaha Shilinka Soomaaliga ayaa si joogto ah hoos ugu dhacay marka loo eego sarifka Doollarka Mareykanka, iyada oo sanadadii la soo dhaafay uu sare-ukac weyn ku yimid sarifka lacagaha. Haddaba, si loo hagaajiyoganacsiga Soomaaliya, dadka siyaasadaha dejiya waxaa loogabaahan yahay in ay xoogga saaraan sidii sicirka sarifka lacagaha loo fadhiisin lahaa, loona fududayn lahaa habraacyada kastamyada, loona diyaarin lahaa mashaariic lagu samayn karo maalgelin fudud. Sida oo kale, waa in laga shaqeeyo sidii loo xoojin lahaa ganacsiga caalamiga ah, tikniloojiyada looga faa'iidaysan lahaa, loona yeelan lahaa istaraajiyad lagu xoojinayo waxyaabaha dalku dibadda u dhoofiyo oo lagu soo beddelo badeecadaha dalka la keenayo.

Deymaha Dalka Soomaaliya lagu leeyahay ayaa ahaa caqabad aad u weyn, deymahaas oo biirayay laga soo bilaabo toddobaataneeyadii iyo siddeetameeyadii qarnigii tegey. Soomaaliya markii ay awoodi weydey in ay deymaha lagu leeyahay iska bixiso waxa ay ku dhacday dabin halis ah, wuxuunanoqday mid caqabadku ah dhaqaalihii dalka. Waxyaabaha ugu waaweyn ee ay Soomaaliya ku deymowday waxaa kamid ah: dagaalladii sokeeye ee dalku galay, kutiirsanaanta kaalmada dibadda, musuqa iyo amaaho culus oo dalalka dibadda laga qaatay. Dhibaatada qaanbaxa Soomaaliya waxaa sii kordhiyay sababo dhawr ah oo ay kamid yihiin:deynta dalka lagu leeyahay oo aad u badan, xasilloonidarro siyaasadeed iyo musuqmaasuq xarkaha goostay. Saamiga deyntu kaga jirtay waxsoosaarka dakhliga gudaha (GDP) waa ay is bebbeddalaysay iyada oo heerkoodu celcelis ahaan gaaray boqolkiiba 60%. Falanqaynta ballaaran ee dhaqaaluhuna waxa ay muujinaysaa in uu jiro xiriir xooggan oo ka dhexeeyakor-u-kaca heerka deyntukaga jirto dakhliga gudaha iyo hoos-u-dhaca koboca dhaqaalaha qaranka (mar kasta oo deyntu kor u kacdo, dhaqaalaha ayaa hoos u dhacaya).

Bishii 12-aad,2023, Soomaaliya waxa ay ku guulaysatay in ay fulisoshuruudihii looga baahnaa habraacyada gaarka u ah dawladaha saboolka ah ee deymuhu la degeen, iyada oo laga yareeyay boqolkiiba 64% deymihii lagu lana la gaarsiiyay wax ka yar boqolkiiba 6% dabayaaqadii sannadkii 2023. Haddaba, si loo yareeyo deymahaisbiirsaday ee dalka lagu leeyahay, Soomaaliya waa in ay meelmariso nidaam maaliyadeed oo daah-furan, waa in ay hagaajiso dakhligagudaha dalka ka soo xaroonaya, waana in ay xoojiso hay'adaha dawladda.

# CUTUBKA KOOWAAD

## GEEDDISOCODKA DHAQAALAHA: MUUQAALLADA WAXSOOSAARKA GUDAHA & KORORKA DHAQAALAHA



# CUTUBKA KOOWAAD

## GEEDDISOCODKA DHAQAALAHA: MUUQAALLADA WAXSOOSAARKA GUDAHA & KORORKA DHAQAALAHA

### 1.1 Qaab-dhismeedka Dhaqaalaha Soomaaliya & Caqabadaha Ku Xeeran

Marka la eego abla-ablaynta uu Bankiga Adduunku(2023) sameeyay, Soomaaliya waa dawlad uu dakhliga soo galaa aad u hooseeyo, waana dawladda ugu koboc yar dhaqaale ahaan marka la barbardhigo dawladahaGeeska Afrika. Shaqooyinkala duwan ayaa ka qayb qaata dakhligadalka, kuwaas oo ay kamid yihiin dhaqdhaqaaqyo ganacsioo soojireen ah (traditional) iyo kuwo casri ah (modern), sida hoos ku xusan:

**Beeraha,Kaymaha (Dhuxusha iyo Xaabada) & kalluumaysiga:** Waxbeerista Soomaaliya waa ay noocyo badan tahay, waxaana ka mid ah beerista dalagyada kala duwan, xooladhaqashada iyo kalluumaysiga. Beeralaydu waxa ay beeraan khudradda, miraha waaweyn iyaga oo adeegsanaya farsamooyinkii hore ee roobabka la sugi jiray iyo qaar kale oo webiyada lagu waraabiyo. Sida oo kale, xooladhaqatada ayaa kaalin weyn ka qaata dakhliga dalka, kuwaas oo xoogga saara dhaqashada xoolaha. Intaa waxaa raaca, xeebaha dhaadheer ee Soomaaliya ayaa iyaguna fursado dihan oo dhinaca kalluumaysiga ah xambaarsan, sida xeebaha ku teedsan Gacanka Cadmeed iyoXeebaha Badweynta Hindiya.

**Warshadaha:** Ilaa hadda warshadaha Soomaaliya waa kuwo aan hormarsanayn, balse waxaa jira warshado raad- dhaqaajis ah. Dalka waxaa ka jira warshado yaryaroo cuntada sameeya, sida warshadaha sokorta farsameeya, kuwa raashinka shiida iyo kuwa kalluunka moorgareeya. Intaas waxaa dheer, Soomaaliya waxaa ka jira farsamooyin yaryar oo dhinaca sancada ah, sida samaynta dharka dhaqanka oo si aan rasmi ahayn loo sameeyo iyo alaabooyin kale oo laga sameeyo hargaha ama maqaarka, dhammaantoodna ah kuwo gacmahalagu sameeyo. Si kastaba ha ahaatee, warshadahan waxaa ku xeeran caqabado waaweyn oo ka imanaya awooddooda oo xaddidan iyo iyaga oo adeegsanaya farsamohore oo aan casri ahayn ama laga gudbay. Sidaa si lamid ah, dhaqdhaqaaqa dhismaha iyo hantida maguurtada ah ayaa qayb ka ah dakhliga dalka,weliba xilliyadan dambe oo ay dadku magaalooyinka isugu yimaaddeen, taas oo keentay in yagleelidda dhismayaashu kordhaan, gaar ahaan, magaalooyinka waaweyn sida Muqdisho.

**Shirkadaha Adeegyada Bixiya & Maalgashiga Qurbajoogta:** Maalgashiga qurbajoota Soomaaliyeed ayaa kaalin weyn kaga jira kobcinta shirkadaha adeegyada bixiya, siiba shirkadaha isgaadhsiinta, xawaaladaha iyo bankiyada, iyo guud ahaan ganacsiga dalka ka jira. Intaa waxaa raaca, biilasha ay soo diraan Soomaalida qurbajoogta ah oo noqday il dhaqaale oo muhiim ah qoysas badanina ku tiirsan yihiin, kuwaas oo biilashaa isticmaala ama ganacsiyo yaryar ku maalgashada. Si guud, kaalinta ay qurbajoogta Soomaaliyeed ku leeyihiin dhaqaalaha qaranku waa mid aad u weyn oo waxtarkiisa la taaban karo, haddii sidiisa loogu dhabbagalo loogana dhabeeyo.

Sida laga soo xigtay Bangiga Hormarinta Afrika (African Development Bank, AfDB, 2018) iyo Hay'adda (UNDP, 2017),dhaqaalaha Soomaaliya ayaa weli ah mid jilicsanoo inta badanku tiirsan beeraha iyo xoolaha, xawaaladaha, iyo isgaarsiinta, mana jiraan warshado awood leh oo si cad u shaqeeyaa. Waxaa gebi ahaanba meesha ka baxay warshadihii qaddiimka ahaa ee dagaallada sokeeye kahor shaqayn jiray, kuwaas oo inta la furfurtay macdan ahaan loo xaraashay, ilaa haddana ma jiraan wax qiime ah oo ay u leeyihiin waxsoosaarka xoolaha iyo beeraha ee dibadda loo dhoofiyo. Ku tiirsanaanta alaabooyinka aasaasiga ah sida ilaha ugu muhiimsan ee dhoofinta dakhligu waa caqabad dhismeed oo muujinaysa, aasaaska dhaqaale ee xaddidan ee dalka iyo nuglaantiisa ku aaddan isbeddellada suuqa, isbeddellada qiimaha iyo caarranida deegaanka. Sida laga soo xigtayBangiga Hormarinta Afrika,in ka badan boqolkiiba 80% oo ah dakhliga dhoofinta Soomaaliya wuxuuka yimaaddaa, waxsoosaarka beeraha ee aan la farsamayn, xoolaha nool ee loo dhoofiyo dalalka Khaliijka iyo Sacuudiga, abuurka saliidda iyo mooska, taasoo muujinaysa habacsanaanta suuqa iyo isbeddellada alaabooyinka. Sidoo kale, Hay'adda Tirakoobka Qaranka ee Soomaaliya waxay sheegtay, in dhoofinta xoolaha ee Bariga Dhexe gaar ahaan Sacuudiga, ay ka kooban tahay in ka badan boqolkiiba 70% dhoofinta guud ee dalka, taasoo muujinaysa ku tiirsanaanta Soomaaliya ee suuqa xoolaha marka la eego gobolka.

Ganacsiyada aan rasmiga ahayn (waratada) ayaa ah kuwan ugu badan ee ah dhaqdhaqaaqa dhaqaale ee Soomaaliya ka jira, inta badan heerka nolosha bulshaduna waa maqadaa-madherag (maalin taban iyo maalin togan),waxayna noloshooda ka maareeyaan ganacsiyo aad u yaryar. Ganacsiyada gaarka loo leeyahay ayaa iyagu muujiyay adkaysi la taaban karo, sida isgaarsiinta, xawaaladaha, bangiyada, dhismaha ama hantida maguurtada ah, xoolaha, iyo kalluumaysiga.

Qurbajoogta Soomaaliyeed ayaa si weyn dalka u maalgashada, iyaga oo raasamaalka shirkadaha yaryar iyo kuwa dhexe boqolkiiba 80% iyagu hela. Kuwa qurbaha ka soo laabtayna waxa ay bilaabeen ganacsiyo keli-keli ama koox-koox loo wadaago iyaga oo dhaqaale isku darsada. Mararka qaarkood waxaa ay sii furaan ganacsiyo ay iyagu leeyihiin oo ay dalka dibiddiisa ka maamulaan.

Soomaaliya waxaa ka go'an in ay meelmariso horumarwaara, balse in horumar waara la xaqiijiyo waa mid aan fududayn, waxaana ugu wacan xasilloonidarrada siyaasadeed ee dalka ka jirta, welwel dhinaca amniga laga qabo, gaabiska waxdheefka hay'adaha, awooddsiinta aadanaha, khayraadka maaliyadeed iyo arrimo kale oo kuwan dhiggooda ah, sida uu sheegay Bangiga Hormarinta Afrika, 2018-kii (African Development Bank, AfDB, 2018).

### 1.1.1 Caqabadaha Ku Xeeran Geeddisocodka Dhaqaalaha Soomaaliya

Sida laga soo xigtay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya (CBS, 2024) iyo Bangiga Hormarinta Afrika (AfDB 2024), Soomaaliya waxay wajahaysaa caqabado silloon oo laf dhuun gashay ku ah dhaqaalaha dalka. Caqabadahani waxay ka imaanayaan arrimo la xiriira degaanka, bulshada, siyaasadda iyo arrimo dhaqaale oo is biirsaday, soona taxnaa sannadihii la soo dhaafay. Hoos waxaa ku xusan faah-faahin caqabadahaas ku saabsan:

**Dhibaatada Cimilada & Nuglaanta Deegaanka:**
Dalka Soomaaliya wuxuu u nugul yahay xaaladaha cimilada ka dhasha sida; abaaraha iyo fatahaadaha, kuwaas oo saameyn taban ku yeesha beeraha, xoolaha iyo guud ahaanba dalagyada ay dadku quutaan. Dalka waxaa ka dhacday abaaro maxarshoon ah oo sababay in la waayo dalagyadii la beeri jiray, xoolo aad u tira badanna ay ku bexeen, iyada oo beeraha iyo xooluhu ay yihiin waxyaabaha asaaska ah ee uu dhaqaalaaha dalku ku dhisan yahay. Tusaale ahaan, abaartii dhacday 2022-kii waxa ay sababtay in ay boqolkiiba 54% bulshada Soomaaliyeed ka hoosmartay liidka saboolnimada (poverty line), taasina waxay ka dhalatay hoos-u-dhac weyn oo ku yimid dalagyadii iyo kor-u-kac ku yimid sicirkii cuntada.

**Deggenaansha La'aanta Siyaasadeed & Walaaca Amniga:**
Xasilloonidarrada siyaasadeed iyo cabsida dhinacaamniga ah ee ilaa haddajirta ayaa caqabad weyn ku ah koboca dhaqaalaha dalka. Kooxaha xagjirka ah, iskudhacyada hubaysan ee dalka gudihiisa ka jira iyo hay'adaha dawladda oo aan awood buuxda u yeelan xakamaynta xaaladahan ayaa abuuray hubabnti la'aan aanay shirkadaha ganacsigu si hufan uga shaqayn karin. Sidoo kale degganaansho la'aantaasi waxay cuuryaamisay maalgashigii gudaha iyo kii dibaddaba, maadaama oo ay maalgashadayaashu arkayaan hubanti la'aan badan oo ku gedaaman ganacsi ama maalgashi laga sameeyo deegaan noocan ah.

**Heerka U Dhannaanta Shaqadaoo Hooseeya (Low Labour ForceParticipation Rates):**
Heerka sinnaanta shaqada (rag iyo dumar) ayaa ah mid aad u hoosaysa, gaar ahaan, dumarka shaqeeya. Dheelliga shaqawadaagga labada jinsi(rag iyo dumar)ayaa sidoo kale dabraya awooddii shaqaale ee la naawili karayay, isla jeerkaasna yaraysay waxsoosaarkii dalka. Intaa waxaa dheer, shaqaale badan ayaa ka shaqeeya shaqooyin dakhligoodu aad u hooseeyo, kuwaas oo qaata mushahar aan baahiyahooda guud dabooli karin.

**Ku tiirsanaanta Gargaarka Bani-aadamnimo:**
Dhaqaalaha Soomaaliya waxuu si weyn ugu tiirsan yahay deeqaha iyo kaalmada binin-aadannimo, taas oo ay ugu wacan tahay awoodyarida joogtada ah ee ka dhalatay qalalaasaha aan kalajoogsiga lahayn iyo aafooyinka dabiiciga ah. in kasta oo loo baahan yahay gargaarrada degdegga ah; haddana arrintaasi waxay caqabad ku tahay xaqiijinta hormarinta dhaqaalaha si loo baritaaro xoojinta koboc dhaqaale oo waara. In laga guuro kutiirsanaanta kaalmada bini-aadannimo oo loo digarogto hirgelinta dhaqaale awoodi kara in dalku baahiyihiisa ku filaa do, waa caqabad aloosan oo ay ilaa hadda adagtahay in la laga gudbo.

**Kaabayaasha Dhaqaale oo Yar:**
Baahida loo qabo kaabayaasha dhaqaalaha ee asaasiga, sida: waddooyinka, korontada, dekadaha iyo nidaamka isgaarsiinta ayaa caqabad ku ah fursadihii dalka gudihiisa lagu maalgashan lahaa. Kaabayaasha dhaqaalaha ee liitaa waxay kordhiyaan kharashaadka ku baxaya iibgeynta badeecooyinka, waxayna dabartaa awoodda shirkadaha wax soo saara iyo galaangalka kuwa iibsanayanaa ay ku gaarilahaayeen suuqyadii u abbaarnaa ee ay u baahnaayeen. Haddaba in la qorsheeyo maalgashi lagu sameeyo dekadaha iyo korontada, waa mid aad iyo aad muhiim u ah, balse waxay u baahan tahay degaan xasillooni ka jirto oo laga fulin karo.

**Gedegeddoonka Dhaqaalaha:**
Dhaqaalaha Soomaaliya, sannadihii ugu dambeeyay, waxaa uu muujiyay hanaqaad aan badnayn oo is bedbeddlaya. Tusaale ahaan, celceliska dakhliga dalku waxaa uu sameeyaykor-u-kac gaaraya boqolkiiba 2.1% sannadkiiba, laga bilaa bo 2019-kii ilaa 2023-kii. Gaabiskaas waxaa loo aanayn karaa arrimo dibaddaka yimid, sida;kor-ukaca qiimaha badeecada asaasiga ah iyo arrimo gudaha dalka ka jira, sida amnidarrada oo waxsoosaarkii dalka ragaadisay.

**Heerarka Saboolnimada oo Sarreeya:**
Ilaa hadda saboolnimadu waa dhibaato dalka Soomaaliya ku maran, iyadaoo dad aad u badaniay ku nool yihiin heer ka hooseeya khadka saboolnimada, taas oo sannadkii 2022-kii gaaray say 54.4%. Dhibaatadan waxaa keenay aafooyin soo noqnoqday oo galaaftay hantidii qoysaska, awooddii ay wax ku iibsan lahaayeenna wiiqday sida laga soo xigtay (Somalia NationalBureau of Statistics; NBS, 2023). Xog-ururin lagu sameeyay miisaaniyadda qoysaska waxaa lagu ogaaday in saboolnimadu uu aad u sarreeyo reerguuraaga, isla jeerkaasna ay ka jirto magaalooyinka laftooda, waxaana sababayamagaalooyinka oo si degdeg ah u fidayaiyada oo aanay jirin fursado shaqo oo abuurmay.


Isku soo duuboo, dhaqaalaha Soomaaliya waxa uu wajahayaa caqabado ay kamid yihiin: dhibaatada cimilada, xasillooniadarrada siyaasayadda, sinnaanla'aanta shaqada (lab iyo dhaddig), kutiirsanaanta gargaarka bini-aadannimo, kaabayaasha dhaqaalaha oo aad u yar, isbedbeddalka dhaqaalaha (aan fadhiyin), iyo heerka saboolnimada oo aad u sarreeya. Arrimahan ayaa ah kuwo koboca dhaqaalaha saamayn ku leh una baahan istaraatiijiyad ballaadhan oo lagu wanaajinayo.

## 1.2 Abbaarta (Trends) Dhaqaale ee Soomaaliya: Isbeddellada & Aragtiyaha

Waxsoosaarka dakhliga gudaha Soomaaliya (GDP) ayaa si dhaaddan (tartiib tartiib) ah kor ugu soo hinqanayay marka la eego sicirka haddasocda, isaga oo ka soo kacay ($3.86)bilyan sannadkii 2004, soona gaaray ($5.84) bilyan sannadkii 2013-kii. Haddana waxaa uu gaaray ($11.68) sannadka 2023. Celcelis ahaan dakhliga gudaha Soomaaliya waxaa lagu qiyaasaa ilaa ($6.57) bilyan laga bilaabo 2004-tii ilaa 2023. Kalataksanaanta (coefficient of variation) waxsoosaarka guudee gudaha dalka ayaa gaadhayboqolkiiba 41% labaatankii sano ee la soo dhaafay, taas oo ku tusinaysa darajo isudhowaansho iyo iskumid ah marka la eego koboca waxsoosaarka guud ee dakhliga muddo kaddib. sannadkii 2020 cudurkii COVID19 ayaa Soomaaliya gaadhsiiyay khasaare gaaraya ($216.3) milyan oo kamid ah waxsoosaarka guud ee dakhliga dalka, marka la barbardhigo 2019-kii.

Waxsoosaarka beeraha ayaa lafdhabar u ah dhaqaalaha Soomaaliya, waxa ayna beeruhu soo saaraan shan meelood saddex ka mid ah qiimihii lagu daray dakhligadalka intii u dhexeysay 2004- kii ilaa 2023; halka warshadaha iyo adeegyada kale ay dakhliga dalka kaga qaybqaateen xaddi lagu qiyaasay (0.1.3). Xooluhu waxa ay ka qaybqaataan qiyaastii boqolkiiba 60% ka mid ah waxsoosaarka dalka, taas oo ka sarreysa dakhliga ka soo xerooda dalagyada la beero oo gaaraya boqolkiiba 40%. Hoos-u-dhaca ka muuqda waxsoosaarka warshaduhu waxa uu muujinayaa caqabadaha waaweyn ee ku xeeran dhinaca warshadaha. Jaantuska hoose waxuu inna tusayaa kaalmaha kala duwan ee ay dhinacyadani ku leeyihiin waxsoosaarka dakhliga gudaha dalka (GDP).


**Jaantuska 1.1. Celceliska Saamiga Waaxyuhu Ay Ka Yihiin Waxsoosaarka Guud ee Gudaha (qiimaha hadda jira) Muddada (2004-2023)**




***Isha:*** *Xog-uruurin. Ururka Iskaashiga Islaamka (OIC, 2024)*

Mid ka mid ah qaababka lagu qiyaaso hormarkabulshadu heerka uu joogo ayaa ah in la eego inta celcelis ahaan qofkii ku soo aadaysa marka la eego dakhliga guud ee qaranka. Dawlad kasta oo saamiga halkiiqof ku soo aadayaa sarreeyo,waa astaan muujinaysa in dawladdaasi tahaydawlad hodon ah. Waxaa muhiim ah in maanka lagu hayo in aqoolka ku soo aadaya qof kasta oo dabcan ku tiirsandakhliga guud iyo tirada dadweynaha, ay tahay mudnaantoolmoon iyo xaqiijinta koboca dhaqaalaha. Marka la eego saamiga ee ku soo aadaya calaa-qof, wuxuu kor uga kacay dakhliga guud $381 sannadkii 2004-tii, sannadkii 2023-diina waxa uu gaaray $644, waana kor-u-kac u dhigma boqolkiiba 68.7% muddo labaatan sano ah. Celceliska saamiga ku soo aadaya qofkiiba waxaa lagu qiyaasayaa ($459), intii u dhexaysay 2004-tii iyo 2023-dii. Farqiga u dhexeeya koboca dakhliga calaa qof waxa uu gaaray 27%. Jaantuska hoose waxa uu muujinayaa horumarkii ku dhacayay dakhligii calaa-qof ku soo aadayay marka la eego, dakhliga dalka ee labaatankii sanee la soo dhaafay. Waxaa suuragal ah, in sababaha keenay hoos-u-dhaca dakhliga calaa-qof ku soo beegmayaa, siiba afar sano oo ka mid ah muddada kor lagu xusay, ay ka mid ahaayeen: dhibaatadii dhaqaalaha dunida ku habsatay (2008 iyo 2009), abaartii dhacday (2018) iyo cudurkii (2020) ee loo yaqaannay Covid 19-tiin.

**Jaantuska 1.2. Saamiga Waxsoosaarka Guud ee Gudaha Calaa Qof Ku Soo Aadaya (doollar ahaan) Muddada (2004 –2023)**




***Isha:** Xog-uruurin uu sameeyayBangiga Adduunku (2024)*

## 1.3 Celceliska Kobaca Dakhliga Guud ee Gudaha & Saamiga Calaa-qof Muddadaas

Falanqaynta lagu sameeyay kobaca dhaqaale muddo labaatan sano ah (2004-2023), iyada oo la adeegsanayo afargeesoodyada yaryar ee caadiga ah (Ordinary Least Squares (OLS),waxa ay muujinaysaa in uu jieo isbeddello abbaareed(reveals significant trends)oo muhiim ah. afargeesoodyada yaryar ee caadigaah (Ordinary Least Squares (OLS) ee heerkaabbaarta waxsoosaarka guud ee dalka iyo waxsoosaarka guud ee qofka waxa ay muujinayaan in celceliska dhexe ee koboca waxsoosaarka dhabta ah uu gaaray 5.1% muddadaas oo dhan, uuna weheliyo 6.2% laga bilaabo 2004 ilaa 2013; iyo 3.8% sannadkii 2014 ilaa sannadkii 2023.

Si kastaba ha ahaatee, tobankii sano ee la soo dhaafay ayaa la arkay hoos-udhac gaaraya39% oo ku yimid kobaca dhaqaalaha sababo la xiriiracaqabado dhinaca cimiladaah iyo masiibadii COVID-19. Saamiga ku soo aadayacalaa qof ayaa sameeyay koboc celcelis ahaan gaaraya 2.1 muddadaas oo dhan, isaga oo ahaa 3.6 intii u dhexeysay 2004 iyo 2013, halka uu gaaray ay 0.6% intii u dhexeysay2013 iyo 2014. Tani waxa ay ka dhigan tahay in uu jiray koboc bulsho oo lagu qiyaasayo 3% sannadkiiba marka la eego labaatankii sano ee la soo dhaafay. Natiijooyinkani waxa ay muujinayaan aragtiyo cuddoon oo ku saabsan koboca dhaqaale iyo hurumarka ay Soomaaliya ku tallaabsatay intii u dhexeysay 2014 iyo 2023.


## 1.4 Isbarbardhigga Kobaca Dhaqaalaha Gobolka: Soomaaliya iyo Dalalka Deriska

Diraasad falanqayneed oo isbarbardhig ah laguna sameeyay koboca dhaqaale ee dawladaha xubnaha ka ah ururgoboleedka 'IGAD' ay sameeyeen tobankii sano ee la soo dhaafay, iyada oo lagu saleeyay xogihii uu Bankiga Adduunku soo saaray; ayaa muujinaya in koboca dhaqaale ee Soomaaliya loo diiwaangeliyay in uu:

- La mid yahaykoboca dhexdhexaadka ah ee dhaqaalaha Kenya.
- Ka sarreeyo Suudaan oo ay tobankii sano ee ugu dambeeyay xasilloonidarro ka jirtay.
- Kana dib-dhacsan yahay dawlado kale oo IGAD ku jira

Gorfaynta daraasaddan isbarbardhigga ahi waxa ay muujinaysaa, muuqaal cuddoon oo ku saabsan koboca dhaqaalaha Soomasaliya marka la barbardhigo dawladaha dhiggeeda ah ee gobolka.

**Jaantuska 1.3: Kobaca Dhaqaalaha Qaaar ka mid ah dalalka IGAD, celeliska muddadii u dhaxaysay (2014-2023)**




***Isha:*** *Bangiga Adduunka*

## 1.5 Saamaynta Abbaarta Dhaqaalaha Dunida (Economic Trends) iyo Khataraha Deegaanku ku leeyihiin Kobaca Dhaqaalaha

Si loo baaro saamaynta dhinacyada dhaqaalaha dunida iyo khataraha deegaanku ku lahaayeen koboca dhaqaalaha Soomaaliya intii u dhexeysay (2004 iyo 2023), waxaa la adeegsaday sicirbararka dunida iyo doorsoome hummaagoo u taagan isbeddelka cimiladaiyo isbeddelka xogta ooloo isticmaalay sidii hannaan falqanayneed. Celceliska koboca dhaqaaleee Soomaaliya, intii lagu jiray saamayntii ka dhalatay dhacdooyinka caalamka iyo xaaladihii deegaanka, waxa uu gaaray, boqolkiiba 5.6% iyo caddaymotirakoob oo la iski hallaynkaro gaarayana boqolkiiba 1%.


Natiijadu waxa ay muujisayin sicirbararka adduunkaiyo khatarta degaankuay cuuryaaminayaan kobaca dhaqaalaha Soomaaliya. Si gaar ah haddiiloo eego, kor-u-kaca sicirbararka adduunku ilaa heergaaraya boqolkiiba 1% waxa uu keenayaa hoos-u-dhac ku yimaadda koboca dhaqaalaha ilaa qiyaas gaaraysa boqolkiiba 0.03%. heehaabka la qiyaasay waa mid muhiim ah oo muujinaya tirakoob gaaraya boaolkiiba10%. Waxaa xusid mudan, in heerka sicirbararka dunida lagu qiyaasay in uu gaaray boqolkiiba 3.72% guud ahaan labaatankii sano ee la soo dhaafay, halka uu ahaa boqolkiiba 4.30% iyo 3.14% intii u dhexeysay sannadihii (2004 -201a3); iyo (2014 – 2023). Dhinaca kale, dhibaatooyinkii ka dhashay isbeddelka cimilada ee dhacay sannadihii 2013, 2020, 2023, ayaa horseeday hoos-u-dhac weyn oo ku yimid koboca dhaqaalaha Soomaaliya ilaa heer lagu qiyaasayo (0.10).

## 1.6 Heerka Kobaca Dhaqaaluhu Dan u Yahay Danyarta

Kobaca dhaqaale ee xooggani waa raasamaalka biira ama kordha,manfac iyo maggaabana u keena danyarta saboolkaah ee dalka ku nool (danta danyarta). Si dooddan loo hubiyo, qaybtaniwaxa ay bilkeedaysaa—tijaabinaysaa, saamaynta koboca dhaqaale ee Soomaaliya uu ku leeyahay nuglaanta, iyada oo laga duulayo xog-ururin ay samaysay Jaamacadda (Radboud University (2024). Xogta la heli karo waa intii u dhexeysay (2004-2020), baaxadda falanqaytuna waxa ay ku fidsan tahay ilaa 2023, iyada oo lagu dabbaqayo isle'egta abbaarta (trend equation). Waxaa la adeegsaday dariiqada afargeesyada yaryar ee caadiga ah (OLS).

Natiijooyinku waxa ay daaha ka qaadeenin koboca dhaqaaleee Soomaaliya aanu ka qaybqaadan yaraynta taagdarrada dhaqaaleee dalka ka jirta, si gaar ah haddii loo eego, koror gaaraya 1% oo ku yimaadda koboca dhaqaalaha waxa uu dhimaatusaha taagdarrada ilaa heer gaaraya0.20%. debecsanaanta (elasticity) la qiyaasay ayaa ah mid muhiim ah oo gaaraysa 1%. Waxaa xusid mudan in tusaha taagdarrada Soomaaliya uu hoos u dhacay, isaga oo ka soo degey 100% sannadkii 2004 una soo dhacay 92% sannadkii 2013, siina dhacay ilaa 85% sannadkii 2023. Falanqayntani waxa ay muujinaysaa in ay jirto iskuxiraan yar oo ka dhexeysa koboca dhaqaalaha iyo tusaha nuglaanta, taas oo lagu qiyaasay (0.977).

**Jaantuska 1.4: Tusaha Nuglaanta (tamardarrada dhaqaalaha) Soomaaliya (2004 - 2023)**





***Isha:*** *xog-uruurin ay samaysay Jaamaccada Radboud University (2024).*

## 1.7 Saadaasha Kobaca Dhaqaalaha Soomaaliya: 2024 -2028

Iyada oo lagu salaynayo muunadda xog-uruurinta fudud ee loo yaqaan (ARIMA) iyo xogo hore oo laga sameeyaydakhliga gudaha dalka laga soo bilaabo 2004-tiiilaa iyo 2023-dii, waxaa la soo bandhigay saadaalin iyo oddoroslagu sameeyay kobocadhaqaale ee Soomaaliya muddo ku siman ilaa 2028-ka, sida uu bidhaaminayo jaantuska hoose.

**Jaantuska 1.2. Heerka Kobaca Dhaqaale ee La Filayo(2024 – 2028)**




***Isha:*** *Bangiga Addduunka (2024)*

## 1.8 Siyaasadaha La Raaci Karo Si Loo Xoojiyo Koboca Dhaqaale ee Soomaaliya

Si koboca dhaqaaleee Soomaaliya kor loogu qaadowaa in la raaco hababwejiyo badan leh oo diiradda saaraya dhinacyo kala duwan, caqabadaha waaweynna xallinaya. Hoos waxaa lagu sheegay dhawr xulasho—doorasho oo ka mid ah siyaasadaha ugu muhiimsan ee la raaci karo:

**Kobcinta Waxsoosaarka Beeraha:**
Maadaama ay beeruhuweli yihiin udub-dhexaadka dhaqaalaha Soomaaliya ku taagan yahay, siyaasadaha lagu kordhinayo wax-soosaarka beeraha waxaa ka mid ah:

- La falgalidda cimilada ee maanagalka.
- In beeralayda si joogto ah loogu tababaro farsamooyinka iyo tignoolajiyada beeraha ee raandhiiska leh.
- Hagaajinta nidaamka waraabkabeeraha iyada oo la dhisayokaabayaasha dhaqaalaha.
- Qaybinta abuurshinneed—iniino (seeds)tayo leh.
- Fududaynta shuruudaha maalgelinta beeralayda iyo in laga shaqeeyosidii hay'adaha caalamku beeralayda u taageeri lahaayeen.

**Noocyaynta Dhaqaalaha:**
Si meesha looga saaro ku tiirsanaanta il dhaqaale oo keli ah, loona abuurodhaqaale isceshan kara ooisu dheellitaran, Soomaaliya waa in ay ileheeda dhaqaaleka dhigto kuwo kala duwan,iyada oo ku fidinaysa aagag cusub, sida warshadaha, dalxiiska iyo tamarta dib loo cusboonaysiin karo (renewable energy). Istaraatiijiyaddani waxa ay gacan ka geysan doontaa dhimista khatarta, abuurista fursado

**Hormarinta Ganacsiga Gaarka ah:**
Ganacsiga gaarka loo leeyahay wuxuu muhiimad weyn u leeyahay abuurista fursado shaqo iyo dhaqaale kala geddisan. Siyaasadaha geestan lagu hagi karo waxaa kamid ah:

- Taageeridda shirkadaha raad-qaadka ah, kuwa yar-yariyo kuwa dhexdhexaadka ah.
- Fududaynta sidii ay ganacsatadu ku heli lahaayeen maalgelinta ay u baahan yihiin.
- Diyaarinta tababbarro iyo xoojinta hababkalagu heli karo xogahasuuqa.
- Dhiirrigelinta maalgashida ee aagagga mudnaantaleh.

**Maalgelinta Kaabayaasha Dhaqaalaha:**
Hormarinta kaabayaasha dhaqaalaha ayaa muhiim u ah iskuxirka dadka iyo suuqyada, waxa ayna fududeeyaan ganacsiga gudaha iyo dibaddaba. Meelaha muhiimka ah ee diiradda la saarayo waa in ay ku jiraan:

- Hagaajinta waddooyinka, dekedahaiyo madaarrada, si adeegyada iibka loo tayeeyo (logistics services).
- Xoojinta tamarta, gaar ahaan, midda laga dhaliyo ilaha la cusboonaysiin karo.
- Diyaarinta koronto la isku hallayn karo, gaar ahaan dhinacyada warshadaha iyo beeraha.

**Dhisidda Karaanka Bulshada (Human Capital):**
Dadka oo la maalgashado xirfadahoodana la kobciyo waa mid asaas u ah kobcinta dhaqaalaha mustaqbalka fog. Sidaas ageed, iyada oo taa laga duulayo, talooyinka soo socdaa waa kuwo ahmiyad weyn leh dhisidda cudud hufan oo shaqaysa, sida:

- Hirgelinta waxbarasho tayo wanaagsan; si loo soo saaro shaqaalexirfad leh.
- Fududaynta barnaamijyo lagu samaynayo tababarro xirfadeed; si baahida suuqa ka jirta loo daboolo.
- Fududaynta tiknoloojiyad lagu gaari karo in dunida casrigaah lala jaan qaado.
- Dhiirrigelinta barashada farsamada gacanta oo casriyaysan.
- Dhisidda iyo taageeridda goobo aqoonta lagu barto.

**Dheefisga Tikniloojiyadda & Hal-abuurka:**
Isticmaalka farsamada danabaysan—dhijitaalka ahi waxay ka qayb-qaadan kartaa kobcinta kartida qaybaha kala duwan sida:

- Xoojinta maalgelinta danabaysan—dhijitaalka ah iyada oo la ballaarinayo adeegyada maaliyadeed ee moobilka lagu isticmaalo (sida EVC, SAHAL, E-dahab) iyo kuwa la midka ah.
- Dhiirrigelinta hal-abuurka iyada oo la taageerayo shirkadaha yaryar ee tiknoloojiyadda ka shaqeeya.
- In adeegyada danabaysan—dhijitaalka ah la gaarsiiyo beeralayda iyo dadka saanaciinta (warshadaha).

**Xoojinta Maamulka & Hay'adaha Dawladda:**
Hay'adaha dawladda ayaa asaas u ah dhaqaalehormarsan oo deggan(stable). Haddaba, si taas loo gaaro, Dawladda Soomaaliya waxaa looga baahan yahay in ay mudnaan siiso xoojinta hay'adaheeda iyo dawladnimadeeda, iyadoo xoogga la saarayo:

- Kobcinta tayada shaqaalaha dawladda, iyadoo la siinayo tababarro aqoontooda kor loogu qaadayo.
- hufnaan daah-furan iyo islaxisaabtanka marka la eego maaraynta xafiisyada maaliyadda.
- La dagaallanka musuqmaasuqa iyo wadarba samaynta dhaqaaleleexsan.

Dejinta xeerar iyo shuruuc cad-cad oo dhawraya xuquuqda lahaanshaha (copyright) iyo fududaynta hawlaha ganacsiga khuseeya.

# CUTUBKA LABAAD

# DADKA SHAQEEYA & KUWA AAN SHAQAYN



# CUTUBKA LABAAD


## DADKA SHAQEEYA & KUWA AAN SHAQAYN

### 2.1 Baaxadda Shaqaalaha Soomaaliya, u-dhannaanta (lab iyo dhaddig), iyo Saamaynteeda Bulsho

Soomaaliya waxaa ka jiray koboc ku yimid dadka shaqeeya labaatankii sano ee la soo dhaafay, iyada oo tirada dadka shaqeeyaa ay ka soo dallacday (5.5) milyan sannadkii 2004-tii soona gaaratay(7.9) milyan sannadkii 2013-kii, iyo (8.9) milyan sannadkii 2023-kii. Iyada oo lagu saleeyay celceliska heerka koboca iskudhafan ee dhexe ee la xisaabayo si waafaqsan qiyaastaabbaarta shaqada guud (general trendfunction), celceliska dhexe ee koboca dadka shaqeeyaa waxaa uu gaarayaa boqolkiiba 2.6% labaatankii sano ee la soo dhaafay. Intii u dhexeysay (2014 – 2023) waxa uu gaaray boqolkiiba 1.4%. si guud markaynu u eegno, hormarkalaga gaaray kobocashaqaalaha Soomaaliya waa mid ilaa heer u dhigma heehaab lagu qiyaasay boqolkiiba 17.7%.

Celcelis ahaan, dumarka shaqeeya ayaa gaaraya boqolkiiba 31% marka la eego ragga oo gaaray a qiyaastii boqolkiiba 69%. Wadarta dadka shaqeeya ayaa gaaraya boqolkiiba 57% marka la eego tirada guud ee dadka, waana mid muujinaysa in uu sarreeyo heerka dadka biilasha shaqaalahaas ku tiirsan oo gaaraysa boqolkiiba 43%. Xaaladdani waa mid u baahan faragalinta dawladda, hay'adaha dalka ah iyo kuwa caalamiga ahiba in ay dadaal xooggan ku bixiyaan sidii wax looga qaban lahaa baahiyaha carruurta iyo waayeelka.


**Jaantuska 2.1. Dadka Shaqeeyaa Boqollayda % Ay Ka Ahaayeen Guud Ahaan Bulashada Muddadii u Dhexeysay (2004 – 2023)**




***Isha:*** *BangigaAdduunka (2024).*

Heerka haweenka shaqeeya ayaa ah mid aad u hoosaysa, iyada oo intii u dhexeysay sannaduihii (2004 – 2024)celcelis ahaan boqolkiiba 49% shaqaaluhu ay rag ahaayeen, halka ay dumarkuyihiin boqolkiiba 22%. Marka la eego heer qaranna, ka qaygalka shaqada haweenku waxaa uu gaaray boqolkiiba 35%. Sidookale waxaa xusid mudan, ka qaybgalka ragga ee shaqada ayaa boqolkiiba 0.30% hoos u dhacayaysannadkiiba, halka ka qaybgalka dumarkuuu kordhay 0.08% sannadkiiba. Sidaa awgeed, celceliska ka qaybgalka shaqada heer qaran waxaa uu hoos u dhacayay qaddar gaaraya boqolkiiba 0.17% sannadkiiba. Jaantuska soo socda ayaa muujinayaa dhinaca uu u dhaqaaqay ka qaybgalka labada jinsi ee shaqooyinka Soomaaliya muddo kaddib.

**Jaantusa 2.2: Heerka U-dhannaanta Shaqaalaha Soomaaliya 2004 - 2023)**




***Isha:*** *BangigaAdduunka (WB, 2024).*

## 2.2 Hindisayaal Ay Dawladdu Ku Abuurayso Fursado Shaqo

Dowladda Soomaaliya ayaa soo gabagabeysay Siyaasadda Shaqaaleynta Qaranka (2019) taas oo looga golleeyahay in lagu helo fursado shaqooo waara. Siyaasaddani waxaa ay diiraddasaaraysaa saddex arrimood oo mudnaan leh: xoojinta ganacsiga gaarka loo leeyahay, shaqo abuurka iyada oo laga xoojinayo hormarinta ganacsiyada raad-qaadka, kuwa yaryar iyo ganacsiyada dhexe,lana tayaynayo maamulka suuqyada. Dawladdu iyada oo si wax-ku-oolnimo leh ula kaashanaysa ganacsiyada gaarkaloo leeyahay, waxaysamayn kartaa degaanabuuraya fursado shaqo.Tani waa mid lamahuraan ah, marka la eego in boqolkiiba 60% shacabku yihiin, da'yar cimrigoodu 25-tan sano ka hooseeyo (Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada Soomaaliya; MoLSA, 2019).


Sannadkii 2019-kiiayaa lagu dhawaaqay Hindisaha Shaqaalaysiinta Dhallinyarada Soomaaliyeed, oo qayb ka ah ‘Hindisaha Hormarinta Dhallinyarada Qaranka’ oo ah barnaamij muhiim ah oo loogu talagalay xoojinta shaqa-abuurro iyo sookabashada dhaqaale ee dhallinyarada Soomaaliyeed. Hindisahani waxaa uu garwaaqsanayaa kaalinta adag ee ay dhallinyaradu ka qaadanayaan dhismaha qaranka,wuxuuna xoojinayaa sidii jiilka korayaloo dareensiin lahaa in ay iyagu dalka leeyihiin. Hindisahani wuxuu la jaanqaadayaa, qorshaha qaranka ee ka hortagga iyo la dagaallanka xagjirka, iyada oo xoogga la saarayo sidii bulshada iyo dhallinyaradaba loogu barbaarin lahaa in ay caqabadaha jira u adkaystaan.

Intaa waxaa dheer, barnaamijkani waxaa uu diiradda saarayaa sidii loo xoojin lahaa in ay dhalinyaradu qayb ka ahaadaan golaha fagaaraha go’aanqaadashada iyo sidii loo horumarin lahaa wadajirka bulshada. Soomaaliya waxay doonaysaa in ay ka faa’iidaysato hibadda awoodeed iyo hal-abuurka dhallinyaradeeda, taas oo ka qaybgelinaysa shaqooyinka qaranka lagu dhisayo; si dhaqaalaha dalka horay loogu dhaqaajiyo loona xasiliyo.

## 2.3 Falanqaynta Heerka Shaqa la'aanta (Lab & Dheddig)

Marka la eego heer qaran,qiyaastii shan meeloodmeel ka mid dadku waa baagamuuddo. Heerkan shaqa la’aantu ah mid welwelkiisa leh, gaarayana in ka badan 4-5 heerkashaqa la’aanta dabiiciga ah; ayaa saamayn taban ku yeelanayadhaqaalaha dalka iyo baraaraha bulshada. Marka la eego dhinaca jinsiga (rag iyo dumar), shaqa-la’aantu waxa ay u saamaysay si aan isku mid ahayn,iyadoo ay boqolkiiba 25% dumarka shaqayn karaa baagamuunddo yihiin, halka ay ragga baagamuunddada ahi gaarayaan boqolkiiba 17%. Waxaa xusid mudan in ay jiraan caqabado dhinaca bulshada ka jira oo dumarka shaqada ka horjoogsada, sida caadooyinka iyo dhaqanka bulshada.


**Jaantuska 2.3: Heerka Shaqa la’aanta Soomaaliya (2004 – 2023)**




***Isha:*** *BangigaAdduunka (WB, 2024).*

Waxaa cajiib ah, tirada dadka baagamuuddada ahi in ay kordhayso celcelis le'eg heerka kororka koboca bulshada oo ah boqolkiiba (3.1%). Sidaa aawadeed, celceliska baagamuuddadu ilaa heer, wuxuu u muuqdaa mid sugan oo baroosinka aastay. Waxaa si isdabajoog ah u kordhaysay tirada dadka shaqala'aanta ah, kuwaas oo ka soo dhaqaaqay 1.04 milyan sannadkii2003-kii, oo noqday 1.5 milyan sannadkii 2013; iyo 1.7 milyan sannadkii 2023. Jaantuska soo socdaa waxaa uu inna bidhaaminayaa muuqaal la arki karo oo lagu qiyaasayo tirada dadka shaqa-la'aantuah ee Soomaaliya ku nool labaatankii sano ee la soo dhaafay.

**Jaantusa 2.4: Tirada Shaqa la'aanta Soomaaliya, 2004 – 2023**




***Isha:*** *BangigaAdduunka (WB, 2024).*

## 2.4 Saamaynta Shaqa la'aantuKu Leedahay Kobaca Guud ee Dakhliga Gudaha (GDP)

Si loo tijaabiyomala'awaalka (Arthur Okun) ee sheegaya: in shaqa la'aantuay si taban u saamayso koboca dhaqaalaha; waxaa la cuskaday falanqaynta hoobadka fudud (simple regression analysis), iyada oo la adeegsanayo xogaha muddo labaatan sano ah (2004 – 2023).

Natiijadu waxa ay daaha ka qaadaysaain shaqa la'aantuSoomaaliya ka jirta ay saamaynweyn ku leedahay kobaca dhaqaalaha. Si gaar ah haddii loo dhigo, mar kasta oo heerka shaqa-la'aantu korodho boqolkiiba 1% waxa uu keenayaa hoos-u-dhac gaaraya boqolkiiba 11% oo ku yimaadda dhaqaalaha dalka. Intaa waxaa dheer, xiriirka ka dhexeeya shaqa-la'aanta iyo kobaca dhaqaalaha oo ah (-0.58),taas oo muujinaysa in uu jiro xiriirtaban oo xoogganoo labadaas ka dhexeeya. Taa beddelkeeda, kobaca dhaqaaluhu dhimistashaqa-la'aantuwaxa uu ku leeyahay saamaynxaddidan ama aad u yar, maadaama kororka koboca dhaqaale ee gaaraya boqolkiiba 1% uu hoos u dhigo boqolkiiba 0.03% oo ah heerka shaqa-la'aanta. Natiijadan oo lagu laray natiijooyinkii cutubkii hore, waxa ay tilmaamayaan koboca dhaqaale ee Soomaaliya in aan si waxtar leh loogu adeegsan daryeelka bulshada ama xallinta nuglaanta jirta.

## 2.5 Shaqa La'aanta Soomaaliya: Iimaha Bulshada & Isbeddelka Cimilada oo Isku Sidkan

Qaybtani waxay baaraysaa aqoon-la'aanta dadka waaweyn (qaangaarka ah), dhibaatooyinka abaaraha iyo shaqa-la'aantii hore saamaynta ay ku leeyihiinbaagamuuddada Soomaaliya ka jirtay intii u dhexeysay 2003 ilaa 2023. Waxaa la adeegsaday muunadda xog-uruurinta fudud ee loo yaqaanno "ARMA"iyo qiyaasta suuragalnimada ugu badan; si loo falanqeeyo xiriirka arrimahan ka dhexeeya.

Natiijooyinku waxa ay muujinayaan:

- Xiriir ka dhexeeya aqoon la'aanta dadka waaweyn (qaangaarka ah) iyo shaqa-la'aanta. Marka ay aqoon-la'aantu korodho ilaa heer gaaraya boqolkiiba 1% waxaa kor u kacaya heerka shaqa-la'aanta ilaa qaddar gaaraya, boqolkiiba 0.46%. Waxaa xusidmudan, in dadka wax akhriya waxna qora ee Soomaaliya celceliskoodu gaarayo ku dhowaad boqolkiiba 40% marka la eego labaatankii sano ee la soo dhaafay.
- Dhibaatooyinka abaaruhu in aykeenaan shaqa la'aantu—in ay siweyn u sii korodho. Xiriir togan oo ka dhexeeyashaqa-la'aantii hore oo leh caddaymotirakoob oo lagu samayn karo shaqa-la'aanta hadda jirta.
- Doorsoomayaasha madaxa bannaanee qaab-qiyaaseedka ahi in ay sharxayaan ku dhawaad in uu jiro kala duwanaansho u dhexeeya shaqa la'aanta oo gaaraysa boqolkiiba 73%.
- Qaab-qiyaaseedka la qiyaasay(estimated model) tirakoob ahaan waa mid xooggan.

Gunaanadkii, muunadda xog-uruuurinta fudud ee loo yaqaan "ARMA" waxay caddaynaysaa aqoon-la'aanta dadka waaweyn, dhibaatooyinka cimilida la xiriira,shaqa-la'aanta dheeraata, dhammaantood in ay xiriir weyn la leeyihiin baagamuuddada haatan dalkaka jirta. Waxaasuuragal ah natiijooyinkani in siyaasad-dajiyayaasha iyo saamileyda gacan ka siiyaansidii loo samaynlahaa xeelado lagu xallinayo dhibaatada aqoon-la'aanta dadka waaweyn iyo yaraynta dhibaatooyinka cimilada, taas oo ugu dambayntii, keeni karta in la yareeyo shaqa-la'aanta Soomaaliya ka jirta.

## 2.6 Siyaasadaha Dhiirrigelinta U-dhannaanta Shaqada & Dhimistashaqa la'aanta Dalka

Si wax looga qabto caqabadaha ku xeeran shaqaalaysiinta iyo baagamuuddada Soomaaliya, waxaa habboon in la fuliyo siyaasadaha soo socdo si loo xoojiyoshaqaalaysiinta shaqaalaha, gaar ahaan,dhallinyarada rag iyo dumarba,taasoo ay weheliyaan dadaallo lagu dhimayoheerka shaqa-la'aanta guud:

**Dadka oo la baro xirfado ku habboon shaqooyinka, si ay u noqdaan dad mudan in la shaqaalaysiiyo. Tan waxaa ka mid ah:**

- Hindisayaal talabixin iyo tusaalayn ah.
- Tababarro lagu baranayoxirfado gaar ah.
- Fursadaha waxbarasho ee daboolaya baahiyaha dhallinyarada (rag iyo haween).

**Taageeridda Ganacsiga:**
Maadaama oo ay shaqooyinka gaarkaahi ay yihiin kuwo ay ka shaqeeyaan in ka badan saddex meelod laba meelood oo ka mid ah shaqaalaha Soomaaliya, in ganacsiyada gaarka ah la taageeraa waa arrin aad muhiim u ah; si looga miradhaliyo koboca dhaqaale, iyada oo loo marayo:

- Fududaynta maalgelinta ha ahaato; maalgelin deeqeed ama maalgelinta loogu talagalay ganacsiyada yaryar ee dhallinyarada iyo dumarka.
- Iskaashiyo lala sameeyoganacsiyada gudaha ee gaarkaah.
- Dhisidda shabakado iyo xarumo bulsho oo ay xirfadlayaasha hal-abuurka lihi ku wadaagaan khayraadka, aqoonta iyo fursadaha Soomaaliya ka jira.
- Galaangal lala yeesho hay'adaha gobolka iyo kuwa caalamiga ah sida: Bangiga Hormarinta Afrika (AfDB), IGAD, Bangiga Adduunka iyo Hay'adda Lacagta Adduunka (IMF).

**Hormarinta Shaqaalaynta Dumarka:**
Si wax looga qabto heerka shaqa-la'aanta sarreeya, ee aan loo sinnaynmarka la eego ragga iyo dumarka; siyaasadaha shaqaalaysiinta mustaqbalka waxaa looga baahan yahay in ay hoos u dhugato gabdhaha shaqa raadiska ah. mid ka mid ah xeeladaha macquulka ah ayaa ah in la diyaariyo shaqo meelo durugsanlaga soo qaban karo (remotework), laguna dabbaqoqaybaha kala duwan; si loo abuuro fursado debecsan oo si sahlan looga faa'iidaysan karo, gaar ahaan dumarka.

In la damaanad qaado shaqaalaysiinta muwaaddiniinta dalka u dhashay marka la eego mashaariicda dibadda laga maalgeliyo: Si hormarinta dhaqaalaha ee gudaha iyo faa'iidooyinka maalgashiga shisheeye kor loogu qaado, waxaa lagama-maarmaan ah in la hubiyo in mashaariicda ay maalgeliyaan maalgashadayaasha shisheeye ay mudnaanta siiyaan shaqaalaysiinta muwaaddiniinta dalka u dhashay. Tan waxaa lagu gaari karaa:

- Meelmarinta xeerar maalgashadayaasha ku qasbaysa mudnaanta shaqaalayasiinta muwaadiniinta.
- Diyaarinta tababarro iyo barnaamijyo lagu tayaynayo shaqaalaha qaranka si kor loogu qaado xirfadahooda iyo tartankooda.

- In maalgashadayaasha shisheeye lagu dhiirrigeliyo in ay la shuraakoobaan, ganacsatada gudaha; si kor loogu qaado isdhaafisga aqoonta iyo tikniloojiyadda.
- Samaynta salxogeedyo—meelo lagu kaydiyo xogta (database) shaqaalaha qaranka; si loo fududeeyo iswaafajinta shaqaalaha gudaha iyo maalgashadayaasha shisheeye.
- Soojiidashada maalgashadayaasha, sida in cashuurta laga cafiyo ama geshi kale la siiyo, siiba maalgadayaasha shisheeye ee mudnaanta siinaysa shaqaalaysiinta muwaaddiniinta.
- Xoojinta shuruucda iyo qawaaniinta shaqada; si loo ilaaliyo xuquuqda shaqaalaha qaranka loogana hortago in lagu tacaddiyo.

**Dejinta Qorshaha Shaqaalaha ee Mustaqbalka Fog:**
Si wax looga qabto dululaatiga u dhexeysa natiijooyinka waxbarashada iyo baahidasuuqa ka jirta; Soomaaliya waxaa looga fadhiyaain ay dejiso qorshe guda ballaaran oo xaaladda shaqaalaha lagu kormaareeyo. Qorshahani waa in uu:

- Iswaafajinayo waxbarashada iyo barnaamijyada tababbarka iyo hormarinta dhaqaalaha dalka.
- Odoroso baahiyaha suuqaiyo xirfadaha loo baahan yahay.
- Xoojiyo iskaashi dhex mara xarumahawaxbarashada, ganacsatada iyo dadka warshadaha leh.
- Diyaariyo fursado lagu helayo tababarro xirfadeed, kuwo shaqo iyo aqoonkororsi ah.

**Taabbagelinta Isudheellitirka Kobcinta Dhaqaalaha Gobollada:**
Si loo xoojiyo kobcincaddaalad ah loona abuuro fursadoshaqo, kuwo horumarineed, kuwo bulsho iyo kuow dhaqaalaba, waxaa muhiimad weyn leh in kobcinta gobollada loo maro hab isudheellitiran oo aan dhinac ka rarnayn. Tanna waxaa ka mid ah:

- Gobollada dalka oo loo qaybiyo shaqooyinka dawladda iyo adeegyada ay bixisaba.
- Dhiirigelinta in la maalgashado dhulkadihin iyo gobollada horumarkoodu hooseeyo.
- In fursado shaqoiyo kuwa dhaqaale laga sameeyo degaannadadadku yar yahay.

**Hormarinta Warshadaynta Dalagyada Beeraha:**
Maadaama oo ay Soomaaliya tahay dal dhaqaalihiisu beeraha ku tiirsanyahay, waxaa muhiim ah in beeraha la xoojiyo; si dalka looga hirgaliyo fursado shaqo oo kaladuwan.

**Galaangalaka Suuqayada Dibadda:**
In la fududeeyo gaaridda iyo galaangalaka suuqyada gobolka iyo kuwa dibadda, iyadoo loo marayo heshiisyo rasmi ah oo la galo. Waxaa suuragalah in ay si weyn u xoojisofursadaha ay helayaan ganacsatada Soomaaliyeed, waxayna horseedaysaa in shirkadaha dalku ay bullaalaan.

**Meelmarinta Go'aan-qaadasho Cilmiyaysan:**
Si loo sheego go'aannada siyaasadeed ee caddaymaha cilmiyaysan ku dhisan,loona hagaajiyo ka faa'iidaysiga awoodda dadka, Soomaaliya waxaa la gudboon arrimaha hoose:

- Samaynta tirokoob dadweyneoo joogto ah (tusaale, 10-kii sanaba mar).
- Samaynta xog-ururin muddaysan oo lagu ogaanayo xaaladdasuuqyada shaqada (tusaale, saddexdii ama shantii sanaba hal mar).
- Casriyaynta iyo hagaajinta habka xog-ururinta si loo hubiyo saxnimada iyo habboonaanta xogta.

**Ka faa'iidaysiga Lacagaha Xawaaladaha:**
Si loo dardargeliyo hormarinta lacagaha qurbajoogta ee xawaaladaha; Soomaaliya waxa ay samayn kartaa:

- In qurbajoogta lagu jiheeyo sidii ay u maalgashan lahaayeen mashaariicaha waxsoosaarka leh.
- In la fuliyohindisayaal qurbajoogta ku dhiirrigelinaya in ay dalka maalgashadaan.

# CUTUBKA SADDEXAAD

# MAALGASHIGA GUDAHA IYO DIBADDA




Isha: REUTERS

# CUTUBKA SADDEXAAD

## MAALGASHIGA GUDAHA IYO DIBADDA

### 3.1 Milicsiga Xeerarka Maalgashiga

Maalgashigu waa isbeddel lagu sameeyo raasamaalka kaydsan, waxaa uuna kaalin mug leh ka qaataa xaqiijinta koboca dhaqaalaha, abuurista fursado shaqo iyo xaqiijinta ujeeddooyinka lagu doonayo horumar waara. Xaqiijinta arrintani waxay u baahan tahay dadaallo xooggan oo isku dhafan oo ay dhinacyo badani ku lug leeyihiin, isuguna jira: dawladda, ganacsatada, deeqbixiyayaasha, hay'adaha maaliyadda heer gobol iyo heer caalami, aqoonyahannada, maalgashadayaasha shisheeye iyo dhinacyada kale ee ay khusayso. Sida laga soo xigtay Ururka Qaramada Midoobay ee Ganacsiga & Hormarinta (UNCTAD, 2020), Sharciga Maalgashiga Dibadda ee Soomaaliya (2015) waxaa uu soo koobay hababka maalgashiga shisheeye sida hoos ku xusan:

**Maalgelinta Shisheeye:**

Tani waxay ku imaan kartaa qaababkahoose:

- Lacagaha la xawili karo uu xaddidi doono Bankiga Dhexe ee Soomaaliya; lacagtaas oo si sharciga waafaqsan Soomaaliya loogu diri karo.
- Qalabka iyo agabka dayactirka, waxyaabaha culus ee la rakibayo(sida warshadaha) iyo wax kasta oo soo gelaya agabkawaxsoosaarka loo soo dejin karo si waafaqsanxeerka soodejinta ee hadda jira.
- Lahaanshaha fikraddaoo si sax ah Soomaaliya looga diiwangeliyo, waana mid lamahuraan ah si loo gudagalo hawlaha shaqo ee hoos imanaya siwaafaqsan maalgashiga la ansixiyay.
- Tirada lacagaha qalaad ee lagu bixiyay daraasadaha iyo dukumentiyada farsamo ee loo diyaariyay waxyaabaha la xiriira maalgashiga shisheeye ee la ansixiyay.
- Faa'iidooyinka dib loo isticmaalay (maalgelin ahaan) ee laga helaymaalgashiga shisheeye ee loo ansixiyay si sharciga waafqasan.

**Maalgahi La Shaaciyay:**

Tan waxaa loo asteeyay si loo dhiso ama loo waasiciyo ururro ganacsi oo Soomaaliya ka diiwaan gashan.

- Khariidadda maalgashigu waxay mudnaan siinaysaamaalgashiga shisheeye ee aaggagaas lagu samaynayo, halkaas oo:
- Laga heli karo dad iyo khayraad dabiici ah oo hab waxsoosaar leh looga faa'iidaysan karo.
- Lagu soogelinkaro tiknoloojiyad cusub oo kuhabboon duruufaha dalkaka jira.
  Lagu abuuri karo faa'iido ama kaydad cusub oo laga samaynayo lacagaha qalaad, marka wax la dhoofiyo ama wax la isdhaafsado ama laga helo adeegyada la bixinayo.
- Ka qaybqaadan kartaa koboc waara; hormarinta bulshada iyo hormarinta dhaqaalaha oo isu dheellitiran gobol ahaan.

**Qodobbada soo socda ayaa muujinaya dadaallada dhawaan la sameeyay ee ku saabsan maalgashiga Soomaaliya:**

- Bishii Nofembar 2022-kii, Dowladda Soomaaliya ayaa qabatay shirweynihii ugu horreeyay ee lagu gorfaynayay maalgashiga caalamiga ah, lagu soo bandhigayay fursadaha maalgashi ee jira, laguna daraasaynayay dhinacyada la maalgashan karo iyo guud ahaan jawiga maalgashi iyo ganacsi ee Soomaaliya ka jira.
- Samaynta Xafiiska Hormarinta Maalgashiga Soomaaliya oo hoos yimaadda Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga & Hormarinta Dhaqaalaha, kaas oo u taagan hay'adsharci ah oo kor u qaadaysa maalgashiga shisheeye, dibna u soo celinaysa sumcadda Soomaaliya, fududaynaya hirgelinta iyo mayalka maalgashiga iyo in si joogto ah loogu ololeeyo siyaasadaha maalgashiga ee la turxaanbixiyay.

Si loo fududeeyo ganacsiga, Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha ayaa meel marisay dhinacyo muhiim ah oo ka mid ah qorshahawleedka hormarinta dhaqaalaha. Qorshahan waxaa ka mid ah samaynta iyo meelmarinta sharciyada la xiriira shatiyayada iyo astaamaha ganacsiga, ilaalinta xuquuqaha lahaanshaha, xeerarka shirkadaha iyo dukaannada ganacsiga lagu diiwaangelinayo. Maadaama oo la hirgeliyay Xafiiska Qaranka ee Halbeegyada Caalamiga(Standards), adeegyada iyo waxsoosaarka muhiimkaahi waxa ay bilaabi doonaan in ay qaataan halbeegyada caalamiga iyo kuwa qaranka u degganba. Fulinta qorshaha maalgashiga shisheeye (NIPS) wuxuu u baahan doonaa, dadaallo xooggan oo la taaban karo; si loo horumariyo dhinacyada muhiimka ah ee soo socda: Xukuumadda Soomaaliya oo wakiil ka ah Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Hormarinta Dhaqaalaha (MoPIED), ayaa sannadkii 2017-kii daah-furtay Istaraatiijiyadda Dhiirigelinta Maalgashiga Qaranka (NIPS) oo la fulin doono muddo shan sano ah.

Qorshaha Maalgashiga Qaranka (NIPS) waxaaudub dhexaad u ah hawlo badan oo loogu tala galay in lagu abuuro jawi wanaagsan oo lagu dardargelinayo maalgashiga shisheeye iyo kuwa gudahaba. Mabaadi'da aasaasiga ah ee lagu dejiyay istiraatijiyadda qaranka ee la xiriira hab- maamuuska maalgashiga iyo hababka iskaashiga iyo iskudubbaridku waa sidan soo socota: takoor la'aan, dhawrista xuquuqda lahaanshaha, wax-kaqabashada cabashada maalgashadayaasha, fududaynta xeerar dhiirri gelinaya maalgashiga qaran ee Soomaaliya, wadahadal dhex mara dawladda iyo ganacsatada, macaamil qarannimo ku dhisan, maalgashi shisheeye oo toos ah, maalgashiga qurbajoogta, fududaynta hawlaha ganacsiga iyada oo loo marayo hab danabaysan, barashada dhaqaalaha si loo xoojiyoraasamaal dad ah (Human Capital), fududaynta habraacyada ganacsiga, iyo meelmarinta halbeegyada ku habboon bulshada iyo deegaanka.

Hay’adaha masuulka ka ah fulinta iyo qaab-dhismeedka istaraatiijiyadda maalagashiga qaranka (NIPS) waxaa soo hoos gelaya Xafiiska Hormarinta Maalgashiga (SOMINVEST) oo taageero ka helaya Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga & Hormarinta Dhaqaalaha (MoPIED), iyo Guddiga Maalgashiga Shisheeye. Xafiiska raysal wasaaraha ayaa masuul ka ah kormeerka Qorshaha Maalgashiga Qaranka (NIPS). Marka la eego qaabka guud ee loo marayo qorsha maalgashiga qaranka (NIPS), dawladduwaxa ay dardargelinaysaa maalgashiga iyada oo hagaajinaysa nidaam lagu wanaajinayo deegaanka maalgashiga, kana shaqaynaysa sidii loo xoojin lahaa maalgashiga dalka, iyada oo loo marayo dhisidda tilmaamo togan oo la isku hallayn karo, sida hagaajinta sumcadda Soomaaliya iyo sawirka ay dadka dibadduka haystaan, beegsashada qaybaha mudaanta gaarka leh ee ay tahay in la maalgashado. Waxaa la dhammaystiray go'aannada dib-u-habeeynta, kuwaas oo lagu dhisay arrimaha soo socda:

**Qaabayn Caddaymo Maangal ah Ku Dhisan-** Soomaaliya waxay mareysaa heer ay xoguhuay yihiin kuwo la heli karo, waana mid caddaynaysa in uu jiro horumar aad u wanaagsan. Istaraatiijiyadani waxa ay cuskatay caddaymo jira waxa ayna horseedday in diiradda la saaro sidii meeshalooga saari lahaa caqabadaha aasaasiga ah ee ku gudban balaadhinta raasamaalka gaarkaloo leeyahay. Waxaala qiimeeyay xogtagaarka ah ee ku saabsanqaybaha kala duwan ee dhaqaalaha; si loo go'aamiyo istaraatiijiyadda maalgashi ee ugu wanaagsan.

**Dib-u-habayn Joogta ah:** Dawladda waxaa ka go'an in ay samayso dib-u-habayno badan oo socda, kuwaas oo ay ku jiraan: Barnaamijka kormeerka hawlwadeennada Sanduuqa Lacagta Dunida (SMP), Maamulka Guud ee Maaliyadda (PFM), dib-u-habaynta maamulka dadweynaha (PAR), dakhliururinta, maamulka khasnadda, cashuuraha gudaha ee daaha, iyo maaraynta lacagta kaashka ah, gaadhidda nidaamka deyn cafinta ee hoos yimaadda waddamada saboolka ah ee deymuhu la degeen (HIPC), hagaajinta tirakoobka, iyo kor-u-qaadista jawiga ganacsiga, siiba qaybaha muhiimka ah ee waxsoosaarka leh.

**Qeexidda Mudnaanta Maalgelinta-** Qorshaha Maalgashiga Qaran (NIPS) waxa uu diiradda saarayaa in laga jebiyo dabarrada ugu badan ee hor taagan ballaadhinta maalgashiga gaarka ah. Iyada oo la sameeyay wadatashiyo baaxad leh oo ay qayb ka yihiin dhammaan dhinacyada ay khusayso heer federaal iyo heer maamul goboleedba, waxaa laqeexay horimo cad-cad (clear set) oo leh mudnaanta maalgelinta.

Baarlamaanka Federaalka ayaa sanadkii 2015-kii ansixiyay Sharciga Maalgashiga Shisheeye (FIL); si loo nidaamiyo dhammaan maalgashiyada shisheeye ee Soomaaliya. Sharcigani waxa uu xoojinayaa ilaalinta maalgashiga shisheeye, ujeedkiisuna waa in uu keeno waxyaabo dhiirrigelinaya maalgashadayaasha shisheeye, sida faa'iido dhinaca cashuuraha ah iyo dammaanadqaad in aan hantidooda lagalawareegi doonin. Sida oo kale,waxa uu dammaanad qaadayaa in maalgashaduhu wixi isqabqabsi ah ee yimaaddaku xallin karo garnaqsi heer caalami ah (international arbitration).

## 3.2 Iftiiminta Fursadaha Maalgashiga & Caqabadaha Jira

### 3.2.1. Fursadaha Maalgashi ee Jira:

Soomaaliya waxa ay leedahay deegaanno kala duwan, dhul ku habboon beeraha ama in la beero, khayraad dabiici ah oo laga faa'iidaysan, iyo xeeb aad u dheer, kuwaas oo maalgashadayaasha gudahaiyo kuwa caalamiga ahba siinaya fursadomaalgashi oo aad u ballaadhan oo dhinacyo kala duwan ah, sida hoos ku cad:

- **Waxsoosaarka Beeraha:** Waxaa kamid ah waxsoosaarka cuntada, dalagyada la dhoofiyo, xoolaha nool (geela, lo'da, adhiga) iyo kaluumaysiga.
- **Warshadaynta:** Waxaa suuragal ah in waxsoosaarka beeruhu noqdaan kuwo la warshadayn karo, sida: samaynta sokorta, sancaynta dunta dharka, samaynta saliidda cuntada, samaynta yaanyashiidka, qasacadaynta kalluunka, iyo qaar kale.
- **Dalxiiska:** Xeebta Soomaaliya ee aadka u dheer ayaa ah fursad maalgashi oo ay ka faa'iidaysan karaan maalgashadayaasha Soomaaliyeed iyo kuwa shisheeye, iyaga oo ka samayn kara huteello waaweyn iyo dhul lagu dalxiiso.
- **Isgaarsiinta & Tignoolajiyada (ICT):** Nidaamka lacagaha elektarooniga ah (e- money) ee ay Soomaaliya isticmaasho ayaa abuuraya fursado maalgashi oo dhincayadaas la xiriira (hormarinta lacagaha danabaysan), mareegaha iyo nidaamyada macluumaadka casriga ah (IT), hagaajinta kumbuyuutarrada iyo moobillada, tababarrada iyo barashada xirfadaha, badqabka Inernetka (cyber security), iyo qaar kale. Soomaaliya ayaa hormoodka ka ah Afrika dhanka lacagaha mobillada lagu isticmaalo, taas oo inta badan lagu kala iibsado Doollarka Mareykanka, iyada oo balaayiin doollar lagu sarifto sannadkii.
- **Ganacsiga:** Ganacsiga beeraha, oo lagu daray xeebaha iyo dekedaha, ayaa abuuraya fursado aad u sarreeya oo lagu hawlgelin karo ganacsi gudaha iyo dibadda u kala goosha.
- **Waxbarashada:** Qaybo badan oo shaqaalaha Soomaaliya ah ayaan helin waxbarasho rasmi ah. Tani waxa ay muujinaysaa in ay jirto fursad lagu maalgashan karo dhinaca waxbarashada gaarka ah; si loo daboolo baahida aqooneed ee carruurta Qurbajoogta Soomaaliyeediyo ajaanibta dalka joogaa u baahan yihiin.Tani waxaa weheliyamaalgelinta xarumaha kobcinta aqoonta dadka iyo tababarka xirfadaha.

### 3.2.2. Caqabada Maalgashiga Hor Taagan:

Inkasta oo Soomaaliya ay ka jiraan fursado maalgashi oo rajo leh, haddana waxaa jira caqabado dhowr ah oo hor taagan maalgashadayaasha, ayna kamid yihiin.

- **Xasilloonidarrada iyo Qalaalasaha hubaysan:** Kooxaha xagjirka ah ayaa weli sii wada xasillooni darro iyo iskahorimaadyo hubaysan.
- **Kaabayaasha dhaqaale oo liita:** Waddooyinka, buundooyinka, iyo kaabayaasha kale ee dayacan ayaa caqabad ku ah hormarka dalka.
- **Maalgelin ciriiri ah:** Maalgelinta cidhiidhka ah iyo duruufola xiriira heliddamaaliyad ku filan oo habboon ayaa ah caqabadaha ugu waaweyn ee maalgashiga ku gudban.
- **Xirxirnaanta iyo awood-sheegashada:** Waxaa soo hoosgelaya habraacyada iskadaba wareegga ah (illa meerayso), ayna u sii dheertahay wixii oo aan daah-furnayn iyo isla xisaabtan oo aan jirin.
- **Caqabadaha deegaanka:** Abaaraha, xaalufka, iyo arrimaha kale ee deegaanka ayaa si xun u saameeya dhaqdhaqaaqa dhaqaalaha.
- **Qiimadhaca lacagta:** Hoos-u-dhaca ku yimid qiimaha lacagta dalka marka lagu sarrifanayo lacagaha qalaad ayaa horseedaysa sicir barar sare.


  Kharashaadka hawlgelinta oo sarreeya: Tani waxa ay keentay in ay yaraadaan faa'iidada ka soo baxaysa ama ganacsatadu ka heli karaan haddiiba ay maalgelin sameeyaan.
- **Cashuurta oo badan:** Cashuuraha laga qaado faa'iidada, mushahraadka, iyo ganacsiyada dibadda, ayaa muhiimad weyn u leh dakhliga dawladda, balse haddan waa caqabad maalgashiga hor taagan.

## 3.3 Maalgelinta Gudaha: Qiimaynta Heerka Maalgelinta

Heerka maalgashiga gudahaee Soomaaliya ayaa laba jibaarmay intii u dhexeysay2004 iyo 2023, kaas oo kordhay 12.3% ilaa 25.3%. Samaynta raasamaalka guud ee sugan ayaa gaaray marka loo eego boqollayda dakhliga guud ee dalka boqolkiiba 15% intii u dhexeysay (2004 – 2023). Iyada oo la adeegsanayo kala duwanaanta tusaalaha koowaad ee lagu dhisay falanqaynta hoobadka (regression analysis); natiijooyinkuwaxaay tilmaameen in istaraatiijiyadda qaranka ee xayaysiinta maalgashiga ee la meelmariyay 2017-kii, ay kaalin mug leh ka qaadatay hagaajinta heerka maalgashiga gudaha, kaas oo kordhay ku dhawaad boqolkiiba 36% marka loo eego celceliska xilliga istaraatiijiyadda kahor. Farqigu waa mid muhiim ah oo gaaraya ilaa heer 5%.

Sida oo kale, naatiijadu wa xay muujisay in qiyaastii boqolkiiba 67% isbeddelka wanaagsan ee heerka maalgashiga gudahaah ay sabab u tahayqaadashada istaraatiijiyaddan. Jaantuska soo socda waxa uu muujinayaa isbeddellada uu sameeyay raasamaalka sugan, marka la eego boqollayda uu kaga jiro dakhliga guud ee dawladda (GDP) muddo kaddib.

**Jaantuska 3.1. Raasamaalka Guud ee Sugan (Boqollayda uu Ka Yahay Dakhliga Guud ee Gudaha) Intii u Dhexeysay 2004 – 2023**




***Isha:*** *BankigaAdduunka (2024)*

## 3.4 Maalgelinta Tooska ah ee Shisheeye (FDI): Falanqaynta Qulqulka Saafiga ah

Celcelis ahaan qulqulka saafiga ah ee maalgashiga tooska ah ee shisheeye (FDI) , marka la eego boqollayda uu kaga jiro dakhliga guud ee dawladda (GDP) intii u dhexeysay muddada (2004- 2023)waxa ay ahayd boqolkiiba 3.8%,heehaab gaaraya boqolkiiba 47%. Dakhliga saafiga ah ee ka soo baxayay maalgelinta shisheeye ee tooska ahi waxa uu ka soo wareegay heer taban sanadkii 2004-kii waxana uu gaaray heer togan sanadkii 2005-kii, iyada oo uu korodhay dakhliga saafiga ah ka hor inta aanu hoos u dhicin 2008 xilligaas oo dhaqaalaha adduunka dhibaato weyni ku habsatay. Dakhliga saafigaah ayaa dib u soo kabtay sannadkii 2009-kii iyo 2010-kii,kaddiba mar kale hoos u dhacay sannadihii 2011-kii iyo 2012-kii-, taas oo ay ugu wacnayd weerraradii argagixisada ee lala beegsaday xaruntaganacsiga dunida. DakhligaMaalgashiga Shisheeye ee tooska ayaa ee saafiga ah ayaa si weyn kor ugu kacay laga soo bilaabo 2015-kii, waxaana xoojinayay xeerka maalgashiga shisheeye ee Soomaaliya iyo dhiirrigelino kale oo ku laran; taas oo keentay in heerka qulqulkadakhliga saafiga ah ee maalgashigaasi gaaro boqolkiiba 5.2% marka la eego boqollayda dakhliga guud ee dawladda intii u dhexeysay (2015 – 2023).

Natiijooyinkani waxa ay muujinayaan in dhacdooyinka caalamiga ah iyo kuwa deegaanka ay saameeyaan qulqulka saafigaah ee laga helo maalgashiga shisheeye ee dalka.Waxaa xusid mudan, abaarihii is dabajoogay ee dhacay afartii sano ee ugu dambeeyay in aanaywax saamayn ah ku yeelan maalgashiga shisheeye ee tooska ah ee Soomaaliya; sababta oo ah, inta badan maalgashiyadaasi waxa ay xoogga saarayeen kaabayaasha asaasiga ah (infrastructure). Waxaa lagu qiyaasaydhexdhexaad ahaan, heerkaqulqulka dakhliga saafigaah ee maalgashigaasi shisheeye ee tooska ah in uu gaaray boqolkiiba 4% marka la eeggo boqollayda dakhliga guud ee dawladda intii u dhexeysay (2004 – 2023).Jaantuska soo socdaawaxa uu muujinayaa horumarrada qulqulka maalgashiga shisheeye ee tooska ah—Soomaaliya muddo labaatan sano ah.

## 3.5 Kaalinta Maalgashiga Gudaha & Maalgashiga Shisheeye ay Ku Leeyihiin Dhiirrigelinta Kobaca Dhaqaalaha iyo Abuuridda Fursadaha Shaqada

Iyada oo laga duulayo falanqaynta hoobadka badan (multiple regression), loona adeegsanayo xogaha la helayo muddada u dhexeysa (2004-2023), waxaa la ogaaday in maalgashiga tooska ah ee gudaha iyo dibadda uu boqolkiiba 78% ka yahay isbeddelka heerka kobaca dhaqaalaha Soomaaliya. Heerka kobaca dhaqaaluhu waxa uu si aad ah uga jawaabaaisbeddelada maalgashiga shisheeye marka loo eego maalgashiga gudaha dalka.

Si gaar ah haddii loo eego, waxaa la arkayaa in maalgashiga shisheeye marka uu kordho heer gaaraya boqolkiiba 1% marka la eeggo boqollayda dakhliga guud ee dawladda, in uu keenayo korodh gaaraya boqolkiiba 0.83% oo ku yimaadda celceliska koboca dhaqaalaha; halka maalgashiga guduhu marka uu kordho boqolkiiba 1% uu koboca dhaqaalaha u keenayo korodh gaaraya 0.32.

Darajada kajawaabidda koboca dhaqaale ee isbeddellada heerka maalgashagia guduhu waa mid muujinaysa caddayn tirakoob oo gaadhaysa 5%, halka kajawaabidda koboca dhaqaale ee isbeddellada heerka maalgashagia dibiddu ay muujinayso caddayn tirakoob oo gaadhaysa 1%, (Heerka kalsoonidu waa 99%). Iskuxirnaanta fudud ee ka dhexeysa heerka maalgashiga gudaha iyo koboca dhaqaaluhu waxa ay gaaraysaa (0.58), halka iskuxirnaanta fudud ee ka dhexeysa heerka maalgashiga dibadda iyo koboca dhaqaaluhu ay gaarayso (0.90).

Natiijooyinkani waxa ay xaqiijinayaan in maalgashiga shisheeye uu ahaa horseedka koowaad ee dhaqaajinayay kobaca dhaqaalaha Soomaaliya labaatankii sano ee la soo dhaafay, gaar ahaan, maalgashiga shisheeye ee lagu dhisay kaabayaasha dhaaqlaha, dhismayaasha, hormarinta dekedaha, garoonnada diyaaradaha, iyo dalxiiska. Marka la eego saamaynta maalgashigu ku leeyahay shaqada iyo dhimista guud ahaan heerka shaqa la'aanta, natiijooyinku waxa ay muujinayaa in maalgashiyada shisheeye aanay door muuqdaku lahayn shaqaalaynta. Gaar ahaan, korodhka heerka maalgashiga tooska ah ee shisheeye marka uu gaaro boqolkiiba 1% waxa uu keenayaa in shaqa la’aantu hoos u dhacdo heer gaaraya boqolkiiba 0.03%, si kastaba ha ahaatee, qiyaastan isku-dhafka ahi maaha mid tirakoob laga qaadan karo.

Dhinaca kale, maalgashiga qaranku waxa uu si weyn uga qayb qaatay dhimista shaqo la’aanta (qiyaastii isku-dhafka ahayd waxa ay ahayd mid leh caddayntirakoob oo lagu qiimeeyay (0.0162).

Taas macneheedu waxa weeye in kasta oo ay kordheen maalgashiga Soomaaliya labaatankii sano ee la soo dhaafay;haddana maalgashiyadaasi shaqaalaha qaranka uma abuurinfursado shaqo oo la taaban karo. Keliya waxa ay xooggasaareen in ay ka faa'iidaystaan shaqaalihii hore u joogay ama waxa ay keensadeen shaqaale cusub oo shishiiye ah.

Si loo xaqiijiyo faa'iidada ugu badan ee laga helayo maal-gashiga shisheeye, waa in diiradda la saaraa dib-u-maalgelinta, gaar ahaan qaybaha wax-soo-saarka leh, iyada oo la shaqaaleysiinayo tiro badan oo shaqaalaha qaranka ah. Tani waxa ay gacan ka geysan doontaa dhimista heerarka shaqa-la'aanta waxa ayna kor u qaadaysaa kobaca dhaqaalaha. Dhinacakale, siyaasaddu waa in ay ka shaqeysaa sidii meesha looga saari lahaa dhammaan caqabadaha hor taagan maal-gashiga qaranka, taas oo sahlaysa maalgashigu in uu uu kaalin mug leh ka qaato dardar-gelinta kobaca dhaqaalaha iyo abuurista fursado shaqo.

Tan ka sii muhiimsan ayaa ah in faa'iidada laga helayo maalgashiyada qaranka iyo kuwa shisheeye ay ka faa'iidaystaan dadka saboolka ah iyo dadka jilicsan ee bulshada kamidka ah. Maalgashadayaashu waa in qayb weyn oo faa'iidada raasamaalka ah ay u qoondeeyaan masuuliyadda daryeelka bulshada ka saaran.

## 3.6 Talooyin Istiraatijiyadeed oo Hormarinta Maalgashiga Soomaaliya Khuseeya

Xoojinta maalgashaiga Soomaaliya waxa uu u baahan yahay in uu ku dhisnaado tiirar adag iyo arrimo xoojiya oo ay kamid yihiin:

**In la helo xasilooni iyo nabad waartaoo dalka oo dhan ah:**

- Dhisidda dawlad adag oo xasilloon.
- Xoojinta amniga iyo xasiloonida.
- Xallinta khilaafaadka iyo xoojinta dib-u-heshiisiin qaran.
- Hormarinta dhaqaalaha iyo bulshada.
- Xoojinta maamulka,hufnaanta, iyo isla xisaabtanka.

**Maamul Wax ku ool ah Ayaa ah Aasaaska Hormarka:**
Maamul wanaaggu waxa uu kaalin weyn ka qaataa xoojinta maalgashiga, iyada oo la hagaajinayo deegaanka maalgashiga lagu samaynayo, xoojinta kalsoonida hay'adaha dawladda lagu qabo, iyo kor-u-qaadista iskaashiga caalamiga ah.

**Abuurista Deegaan Ganacsiga Soo Dhoweynaya:**
Samaynta jawi ganacsi oo wanaagsan ayaa muhiim u ah soojiidashada maalgashadayaasha. Tani waxa ay u baahan tahay in la fududeeyo xeerarka, meeshana laga saaro caqabadaha deegaanka, lana xoojiyo qaab-dhismeedka sharciyada maalgashiga, iyo in la xoojiyo daahfurnaanta iyo habraacyada loo marayo xafiisyada xukuumadda. Dawladda Soomaaliya iyada oo kaashanaysa dejinta mabaadi' cadcad oo hagaya hawlaha ganacsiga iyo bixinta adeegyo debecsan; waxa ay kasban kartaa kalsoonida maalgashadayaasha.

**Hormarinta Fursado Maalgashi oo loo siman yahay:**
Xaqiijinta in si cadaalad ah loo helo fursadaha maalgashi, lagana heli karo dalka oo dhan waxa ay kor u qaadi kartaamaalgashiga gudaha dalka, soo jiidashada maalgashadayaasha shisheeye, yaraynta khatarta suuqa, dardargelinta horumar ballaadhan oo loo dhan yahay, iyo xoojinta xasilloonida siyaasadeed iyadaoo la dhisayo kalsoonida ay dadku dawladda ku qabi karaan.

**Xoojinta Iskaashiga & Wadashaqaynta Ha'ydaha Dawladda & Hay'adaha Gaarka ah:**
Dhiirigelinta iskaashiga ka dhexeeya dawladdaiyo ganacsiga gaarkaloo leeyahay waxa ay dardargelin kartaa helidda ilaha lamahuraanka u ah hawlgelinta mashaariicda waaweyn. Iskaashiga labadan dhinacwaxa ay gacan ka geysankaraysaa xoojinta maalgashiga gaarka ah, iyada oo la qaybsandoono khataraha la xiriira hormarinta kaabayaasha dhaqaalaha iyo bixinta adeegyada loo baahan yahay.

**Diyaarinta Waxyaabo Dhiirrigeliya Maalgashiga**
Bixinta waxyaabo dhiirrigelin leh, sida dhimista cashuuraha, deeqaha, kaalmada ama caawimaaddu waa arrimosoo jiidanaya maalgashadayaasha gudaha iyo kuwa shisheeyaba. Dawladuhu waa in ay diyaariyaan waxyaabahaas soo jiidashada leh; si loo dhiirri geliyo maalgashiga dhinacyada mudnaanta leh ee la jaanqaadaya ujeeddooyinka hormarinta qaranka.

**Kordhinta Fursadaha Maaligelin Lagu helayo:**
Hagaajinta fursadaha lagu helayo maalgelinta, iyada oo lala kaashanayo bankiyada gudaha ama ha'ydaha caalamiga ah ee lacagaha bixiya; ayaa fududayn karta in maalgashi la sameeyo, iyada oo shirkadaha koraya la siinayo raasamaal ay ku shaqaystaan, lana ballaadhiyo ganacsiga.

**Qaadidda Tallaabooyin Guuleystay ee Ay Umadaha Kale Soo Tijaabiyeen:**
Soomaaliya waxa ay si weyn uga faa'iidaysan kartaa waaya-aragnimada guusha leh ee ay sameeyeen dalal ay ka mid yihiin Kuuriyada Koonfureed iyo Mallaysia, kuwaas oo kaydadkoodii ku shaqeeyay mashaariic badanna ku maal geliyay.

# CUTUBKA AFRAAD

## QIIMEYNTA SIYAASADDA LACAGTA IYO MAALIYADDA



# CUTUBKA AFRAAD

## QIIMEYNTA SIYAASADDA LACAGTAIYO MAALIYADDA

### 4.1 Qaab-dhismeedka Siyaasadda Lacagta iyo Maaliyadda ee Soomaaliya

Siyaasadaha dhaqaalaha ee dal kastawaxaa kamid ah siyaasadaha lacagtaiyo maaliyadda. Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa si buuxda uga masuul ah diyaarinta iyo fulinta siyaasadda lacagta iyo maaliyadda. BankigaDhexe ee Soomaaliya waxaa la asaasaysannadkii 1960-kii, balseshaqadiisu waxa ay joogsatay markii uu dhacaydagaalkii sokeeye 1991-kii.Mar kale 2009-kiiayaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliya dib loo hawl geliyay si loo xaqiijiyo ujeeddooyinka laga leeyahay siyaasadda lacagta oo isugu jira ujeeddooyinka waqtiga dhexe iyo waqtiga fog, kuwaas oo ay kamid yihiin:

- Xasilinta sicirka suuqa.
- Dejinta iyo hirgelinta siyaasadaha lacagta iyo sarifkalacagaha.
- Ilaalinta iyo kor-u-qaadista qiimahalacagta dalka.
- Habaynta nidaamka bangiyada iyo amaahda.
- Ilaalinta xasilloonida maaliyadeed.
- Maaraynta kaydka Jamhuuriyadda dibaddau yaal.
- Is-waafajinta iyo isku-dubbaridka siyaasadda maaliyadeed ee dawladda.

Waxaa jira caqabado badan oo hor tgaan in Soomaaliya si wanaagsan looga hir geliyo siyaasadda lacagta iyo maaliyadda. Caqabadahaas waxaa kamid ah baahida jirta dhaqaale ahaan iyo maaddi ahaanba, kalsooni darrada lagu qabo lacagtii dalka, iyo doollaraynta xididaysatay ee xitaa ganacsiyadii aadka u yaraa gashay (sida shaaha iyo baalashka). Sida oo kale, lacagta Shilin Soomaaliga ah ee faraha badan ee ay shirkadaha gaarka loo leeyahay soo daabacaan, ayaa sii hurinaya sicirka guud oo keenay sicirbararka iyo qiimadhac weyn oo ku yimaadda Shilinka Soomaaliga.

Bangiga Hormarinta Afrika (AfDB, 2024) ayaa ku dooday in dhaqaalaha Soomaaliya uu yahay mid si weyn ugu tiirsan Doollarka tan iyo markiiguddiga lacagaha qarankuuu soo saaray lacagtii ugu dambaysey ee ahayd Shilin Soomaali sannadkii 1990-kii, kahor intii uuna qarxin dagaalladii sokeeye. Hay’adda Lacagta (IMF) ayaa sheegtay in boqolkiiba 90% dadku ay wax ku kala iibsadaan Doollarka Mareykanka, oo ay barbar socoto xoogaa yar oo Shilin Soomaaliga wax lagu kala gato. Lacagaha shilinkaSoomaaliga ah ee aadka u duugoobay iyo kuwa faalso ah ayaa inta badan magaalooyinka loo isticmaalaa iibka waxyaabaha qiima ahaan aadka u yar, waxaase aad looga adeegsadaa baadiyiha, gaar ahaan reerguuraaga.

Haddaba, iyada oo dalka uu ku faafay adeegsiga Doollarka Maraykanka iyo lacagtii dalka oo duug iyo faalsonoqotay, Soomaaliya waxa ay u baahan tahaysiyaasad lacageed oo cad. Bankiga Dhexe ee Soomaaliya, isaga oo isu diyaarinaya fulinta siyaasadda lacagta iyo habaynta sarifka, waxa uu ka shaqaynayaa sidii uu xoojinlaha awooddiisa maamul iyo kormeerba. Ilaa hadda waxaa socda barnaamij lagu hagaajinayo lacagta dalka oo la soo bilaabay 2021-kii, balse fulintiisii dib- u-dhac ku yimid.Tan waxaa garab socota, qorshaha ay dawladdu waddo oo ah in lacagtii hore ee qadiimka ahayd iyo doollarkaba lagu beddelo lacag cusub marka la gaaro sannadka 2026-kii. Ujeeddooyinka siyaasadda maaliyadeed ee Soomaaliya waxa ay la mid yihiin kuwa dalalka kale, iyada oo diiradda la saarayo sidii loo gaadhi lahaa kobac dhaqaale oo xasilloon. Ujeeddooyinka ugu muhiimsan ee laga leeyahay waxaa kamid ah:

- Xoojinta koboc dhaqaale oo waara, iyada oo la xoojinayo maalgashiga iyo abuurista fursado shaqo.
- Ilaalinta awoodda wax iibsi ee muwaaddiniinta iyada oo la ilaalinayo sicir hooseeya oo fadhiya.
- Xaqiijinta shaqaalaysiin buuxda iyada oo lalakaashanayo diyaarinta deegaan ku habboon abuurista fursado shaqo iyo kobcinta dhaqaalaha.
- Maaraynta iyo miisaamidda lacagahasuuqa lagu fasaxayosi loo damaanad qaado xasilloonida sarifka iyo kayd ku filan oo lacagaha qalaad ah (isu miisaamidda lacagaha).

Si loo gaaro ujeeddooyinkaas iyaga ah, Dowladda Soomaaliya waxa ay adeegsanaysaa siyaasado maaliyadeed oo kala duwan, ayna kamid yihiin kharashaadka dowladdu bixinayso, canshuuraha iyo iskaashiga dowladda iyo ganacsatada; si loo maal geliyo adeegyada guud ee bulshada iyo mashaariicda lagu dhisayokaabayaasha dhaqaalaha. Sida laga soo xigtay Wasaaradda Maaliyadda Soomaaliya (MoF, 2022), hirgelinta siyaasadda maaliyadeed ee Soomaaliya waxaa ku hor gudban caqabado waaweyn oo ay ka mid yihiin:

**Iskudubarridka Dakhliga:** Dowladda Soomaaliya waxa ay u baahan tahay in ay wax ka beddesho hannaanka ay u marayso sooxereynta dakhliga iyo in ay kordhiso canshuur-uruurinta; si loo yareeyo kutiirsanaanta kaalmada dibadda.

**Fedaraalaynta Maaliyadda:** Dalku waxa uu qaatay nidaamka federaalka, kaas oo u baahan isbedel baaxad leh lagu sameeyoqaab-dhismeedka siyaasadda maaliyadda, taas oo ay ku jirto wadaaggakhayraadka ee ka dhexeeya dawladdadhexe iyo maamullada xubnaha ka ah.

**Doollaraynta:** Dhaqaalaha Soomaaliya waxa uu si weyn ugu tiirsan yahay doollarka, waana mid xaddidaysa kartida iyo habsami-u-socodka siyaasadda lacagta iyo habaynta siyaadadda dhaqaalaha.

- **Xasiloonidarrada:** Xaaladda ammaanee dalka oo aad u jilicsan iyo xasilloonidarrada jirta ayaa caqabado waaweyn ku ah hirgelinta siyaasadda maaliyadda iyo hormarinta dhaqaalaha.
- **Tayaxumo:** Sida xun ee loo fulinayo mashaariicda ay deeqbixiyayaashu maalgelinayaan iyo fuuqbaxa ku dhacaya maaraynta mashaariicdaas ayaa caqabad weyn ku ah shaqagudashada siyaasadda maaliyadda.
- **Musuqmaasuq & Daahfurnaan La'aan:** Kuwani waa caqabadaha ugu waaweyn ee dawladdu la daalaadhacayso.

## 4.2 Qiimaynta Waxtarnimada Siyaasadda Lacagta ee Soomaaliya

Waxaa xusid mudan in aanay jirin xogo cusub (updated data) oo ku saabsan qulqulka lacagta Soomaaliya ee xilliyoisku xiga ah. Sidaa darteed,warbixintani waxa ay ku tiirsanayd xogo taxane ah oo Bankiga Adduunkuhore u soo saaray, iyada oo la barbardhigay isbeddelka waqtiga, xogtan ayaa laga diyaariyay muddada ay falanqayntani daboolayso. Waxaa jira tiro farsamooyin ah (tilmaan iyo muunadayn dhaqaale) oo lagu baaro waxtarka siyaasadda lacagta. Hababka dhaqaalaha lagu qiyaaso waxaa kamid ah diraasaynta xiriirka sababeed ee ka dhexeeya kobaca dhaqaalaha iyo kaashka dowladdu haysato iyada oo la adeegsanayo cabirka loo yaqaan (Granger test).


Siyaasadda lacagta ayaa la sheegaa in ay tahay mid wax-ku-ool ah, keliya haddii uu jiro xiriir hal dhinac ah oo u dhexeeya kaashka dowladda iyo kobaca dhaqaalaha. Marka la eego xaaladda Soomaaliya, waxaa la tijaabiyay xiriirka sababeed ee u dhexeeya heerka kaashku ka yahay waxsoosaarka guud ee dawladda oo la barbardhigay kobocaha dhaqaalaha. Natiijoooyinku waxa aymuujiyeen in saamigakaashku ka yahaywaxsoosaarka guud ee gudaha uu yahay mid muujinaya tirakoob gaaraya5%, marka la eego kicintakoboca dhaqaalaha, kaladuwanaansho laba mar ah kadib.Waxaa xusid mudan in kaashkaSoomaaliya haysato uu kordhayay celcelis gaaraya 4.7% in muddo ah, halka waxsoosaarka guud ee dalka ee haatan uu kobcayo celcelis gaaraya boqolkiiba 6% intii u dhexeysay (2004– 2024). Tani waxa ay ka dhigantahay in lacagtadawladdu haysato marka la eego waxsoosaarka dalka ay yaraanaysay celcelis gaaraya boqolkiiba 1.3% xilliyadaas la soo sheegay.

## 4.3 Maaliyadda Guud: Xilliyadii Kobcinta Miisaaniyadda Dawladda

Dakhliga dawladda ayaa si tartiib-tartiib ah u kordhayaykana soo bilaabmay$69 milyan sannadkii 2013-kii ilaa $183 milyan sannadka 2018-kii, ka dibna waxa uu noqday $329 milyan sannadka 2023, iyada oo celceliska kobaca iskudhafka ah uu ahaa boqolkiiba 15% muddadii u dhexeysay (2013-2023). Dakhliga cashuuraha ka soo xeroodamudadaas aynu soo sheegnay waxa uu kordhay qiyaastii 3.5 jeer, halka dakhliga aan cashuurta ahayn uu kordhay ilaa 25.5 jeer.

Korodhkan baaxadda weyn waxaa sababay dakhliga aan cashuuraha ahayn markii hore waxa uu ahaa mid aad u hooseeya,balse xilliyadii dambeayaa ay dawladdu bilawday in ay kobcisooo wax ka qabato. Jaantuska soo socdaa waxa uu muujinayaa isbeddellada ku dhacay cashuuraha iyo dakhliyada aan canshuurta ahayn11-kii sano ee la soo dhaafay, kuwaasoo waafaqsan xogta la heli karo.


**Jaantuska 4.1. Dakhliga Cashuurta ah & Dakhliga Aan Canshuurta Ahayn, 2013 - 2023 ($USD Milyan)**




***Isha:*** *Wasaaradda Maaliyadda Soomaaliya*

Dakhliga guud ee Soomaaliya waxa uu ugu horraynba ku tiirsan yahay cashuuraha noocyadeeda kala duwan. In kasta oo saamiga dakhliyada aan cashuurta ahayn uu si tartiib-tartiib ah u kordhay, kana soo bilaabmay boqolkiiba 5.8%sannadkii 2013-kii ilaa boqolkiiba 31%sannadkii 2023-kii; haddana dakhliga cashuuruhu waxa uu ahaa qiyaastii saddex-meelood oo kamid ah afar meelood wadarta guud ee dakhligadawladda muddadii u dhexeysay (2013-2023), halka dakhliyada kale ay qaybtoodu ahayd ku dhowaad rubuc ama afar meelood hal meel. Jaantuska hoose waxa uu muujinayaa celceliska dakhliga cashuuraha iyo dakhliga aan cashuuraha ahayn kaalinta ay ku biiriyaan waxsoosaarka guud ee dawladda.

**Jaantuska 4.2. Celceliska Saamiga Dakhliga Cashuurta & Dakhliyada Aan Cashuurta Ahayn Ku Daraan Dakhliga Guud ee Dalka (2013 – 2023)**




***Isha:*** *Wasaaradda Maaliyadda Soomaaliya*

Kharashaadka dowladda Soomaaliya ayaa si aad ah u kordhay tobankii sano ee la soo dhaafay, taasina waxa ay ka dhalatay korodhka mushaaraadka ay dowladdu bixinaysay, iyo saamayntii cudurka COVID-19.Marka la eego tirakoobyada, celceliska heerka kobaca sannadlaha ah ee kharashka dawladdu gashay waxa uu ahaa boqolkiiba 18.5% intii u dhexeysay 2013-kii iyo 2023-kii, taas oo ka kacday $117.4milyan 2013-kii ilaa $720.3 milyan2023. Si kastabaha ahaatee, kharashka hormarinta lagu bixiyo ayaa qayb yar ka noqonayawadarta kharashka dawladda kaas oo in muddo ah, celcelis ahaan gaaray boqolkiiba 14.5%, halka kharashka hadda jira (kharashaadka hawlgalka) uu celcelis ahaan yahay boqolkiiba 85.5%.

Kharashaadka dawladda ayaa hoos u dhacay sannadkii 2016, waana mid ka dhalatay hoos-udhac ku yimid dakhliga dowladda uu uu sababay isbeddelka cimiladu. Sidaas si lamid ah, sannadkii 2021-kii ayaa dakhliguhoos u dhacay; sababtuna waxa ay ahaydkharashaad badan oo uu galaaftay cudurkii COVID-19. Si kastabaha ahaatee, abaartiidabada dheeraatay ee dhacday intii u dhexeysa 2020-kii ilaa 2023-kii ma ay keenin hoos-u-dhac ku yimaadda kharashaadka dawladda, dowladduna waxa ay ka shaqeysay kordhinta dakhliga guud, iyada oo ballaadhisay abuurista ila dakhli oo aan canshuur ahayn.

Ugu dambeyntii, hoos-u-dhaca kharashka lagu bixiyay hormarinta, kaas oo kor u dhaafay kor-u- kaca kharashaadka hadda socda, ayaa horseeday hoos-udhaca kharashka guud ee dawladdu gelayso sannadka 2023, inkasta oo dakhliga guud uu kordhay boqolkiiba 25% marka loo eego sannadkii hore.

Shaxdan soo socota ayaa soo bandhigaysa isbed-beddallada uu sameeyaykharashaadka dawladdu marka la eego sannadihii taxnaa ee la soo dhaafay.


**Shaxda 4.1. Kharashaadka Ay Gashay Dawladda Soomaaliya (Milya US$),2013 – 2023)**

| Sannadaha | Kharashaadka Hawlgalka | Kharashka Hormarinta | Wadarta Kharashaadka |
|---|---|---|---|
| 2013 | 117.4 | 0 | 117.4 |
| 2014 | 150.9 | 0.2 | 151.1 |
| 2015 | 184.5 | 14.5 | 199 |
| 2016 | 160 | 11 | 171 |
| 2017 | 228 | 17.6 | 245.6 |
| 2018 | 250 | 18.5 | 268.5 |
| 2019 | 298 | 17.7 | 315.7 |
| 2020 | 354 | 131.3 | 485.3 |
| 2021 | 355 | 118.9 | 473.9 |
| 2022 | 445 | 286.4 | 731.4 |
| 2023 | 468 | 252.3 | 720.3 |

***Isha:** Wasaaradda Maaliyadda Soomaaliya (2024)*

Miisaaniyadda dawladdu mar kasta waxa ay ahayd mid dhiman oo aan isbixin karin 11-kii sano ee la soo dhaafay (eeg jaantuska soo socda), tanina waxa ay keentay in ay korodhay kutiirsanaanta kaalmada dibadda. Waxaa la filayaa in gaabiska miisaaniyaddu uu sii socdo sannadaha soo socda,ilaa inta celceliska heerka kobaca dakhligaguud boqolkiiba (15%) uu ka yar yahay celceliska heerka kobaca kharashaadka guud oo dhan (18.5%). Celceliska dakhliga marka loo eego boqollayda uu ka yahay waxsoosaarka guud waxa uu gaaray boqolkiiba 2% intii u dhexaysay (2013 – 2023); halka celceliska kharashka dawladdu gelaysay marka loo eego boqollayda uu ka yahay waxsoosaarka guud uu ahaa boqolkiiba 3.8% isla muddadaas. Arrintani waxa ay u baahan tahay in ilaha dakhliga guud la kala duwo oo noocyo badan laga dhigo, iyada oo laga shaqaynayo sidii loo yarayn lahaa kharashaadka ay dowladdu gelayso, loona leexiyo dhinaca horumarin dhab ah oo dalka laga sameeyo.

**Jaantuska 4.3. Wadarta Dakhliga & Kharashaadka Soomaaliya boqollayda Ay Ka Tahay Waxsoosaarka Guud ee Gudaha (2023 – 2023)**




***Isha:** Wasaaradda Maaliyadda Soomaaliya (2024)*

Natiijooyinka ku jira warbixintan waxa ay dabac socdaan cilmi-baadhis hore. Tusaale ahaan,Volz et al (2020)ayaa ku dooday in dakhligagudaha ee Soomaaliya uu yahay kan ugu hooseeyaAfrika, gaar ahaan dhaqaalaha BarigaAfrika, ayna weheliso faa'iido cashuureed waxsoosaarka guud ka noqonaysa boqolkiiba 3%. Tani waa mid si aad iyo aad ah uga duwancelceliska Afrika oo gaaraya boqolkiiba 15%. Sida oo kale,Wasaaradda Maaliyadda ayaa tilmaantay sannadkii(2023) in kasta ooay jiraan dib-u-habaynta weyn ee ay dowladdu fulisaylaga soo bilaabo2013-kii si loo xoojiyo dakhliga; haddana waa mid aan ku filnayn in ay daboosho kharashaadka dowladda ee soo noqnoqda. Kharashaadka hawlgelinta DFS ayaa aad kor ugu kacay. Korodhkakharashaadka ayaa ka sare maray dakhliga gudaha ka soo xeroonayay, waxaana loo aanayn karaa korodhka mushaharaadka oo shan jibbaarmay tobankii sano ee la soo dhaafay. Iskudheelitir la'aantan u dhexeysa kharashaadka badan ee dowladdugelayso iyo dakhligagudaha oo aan ku filnayn;ayaa dowladda ku khasabtay in ay si weyn ugu tiirsanaato deeqahadibadda si ay hawlaheeda ugu maal geliso.

Marka la eego sida ay sheegtay Wasaaradda Maaliyaddu (2022), xaaladda maaliyadeed ee Dowladda Soomaaliya sannadobadan ayaa ay ahayd mid aad jiliscsan, dakhliga iyo kharashaadka dowladduna celcelis aan badnayn ayaa ay kordheen marka loo eego boqollayda ay ka yihiin waxsoosaarka gudaha tan iyo sannadkii 2018-kii, waana mid ka turjumaysa dadaallada ay dowladdu ku bixinayso sidii ay u hagaajinlahayd maaraynta maaliyadda iyo maamulkeeda guud. Sikastaba ha ahaatee,saamayntii isku markaahayd ee ka dhalatay cudurkiiCOVID-19, ayax raxan ahaa, iyo cimilo qallafsan oo dhacday ayaa gacan ka geystay hoos-u-dhac weyn oo dakhliga dowladda ku yimid.

## 4.4 Kartida Waxtarka Siyaasadda Maaliyadeed: kajawaabidda Kobaca Dhaqaale ee Isbeddellada Ku Imanaya Kharashaadka Dawladda

Kharashaadka dowladda ayaa lagu tiriyaa aalad go'aamisa siyaasadda maaliyadda, taas oo dhiirrigelin karta kobacadhaqaalaha, gaar ahaan,dhaqaalaha dowladaha soo koraya. Si kastaba ha ahaatee, kharashka dawladda si uu saamaynweyn ugu yeeshokobaca dhaqaalaha, waxaa muhiim ah in shuruudo cayiman la helo, kuwaas oo ay kamid yihiin:

- Qayb ku filan oo kamid ah kharashaadka dowladda waa in loo qoondeeyo mashaariicdan horumarineed, sida hormarinta kaabayaasha dhaqaalaha, waxbarashada, iyo caafimaadka.
- In khayraadka si hufan loo adeegsado, si loo yareeyobeeldaraynta iyo musuqa.

  Ilaalinta deegaan dhaqaale oo xasilloon, ayna ku jiraan hoos-u-dhigista sicirbararka iyo bar-go'a miisaaniyadda ee joogtada ah.
- Dhiirrigelinta kaqaybgalka ganacsatada iyo maalagashigooda, si ay kharashaadku isu kabaan.

Marka la eego Soomaaliya, waxaa la eegayaa xiriirka ka dhexeeya kharashaadka dowladda iyo kobaca dhaqaalaha, iyada oo diiradda la saarayo jawaabcelinta kobaca dhaqaalaha ee ku aaddan isbeddelka kharashka dowladda. Iyada oo lagu salaynayo falanqaynta doorsoomaha (regression analysis), waxaa la ogaaday qadarka kharashaadak dowladdu kaga jiro waxsoosaarka guud ee dalka uu yahay mid muhiim ah oo gaarayailaa boqolkiiba 1% oo kobocadhaqaale ee Soomaaliya dhiirri gelinaysa intii u dhexaysay 2013 – 2023.

Si kastabaha ahaatee, jawaabcelinta koboca dhaqaalaha ee isbeddelka kharashaadka dowladdu ma debecsanayn (inelastic). Gaar ahaan, kobaca dhaqaaluhu waxa uu kordhay keliya boqolkiiba 0.27% marka kharashka dawladdu uu kordho boqolkiiba 1%. Tani waxa ay muujinaysaa kharashaadka dawladda bixinayso in aan si hufan looga faa'iidaysan; si loo dhaqaajiyo kobaca dhaqaalaha. Sababta ugu weyn ee keenaysa jawaabcelinta aan debecsanayn ayaa ah in kharashaadka ku baxaya socodsiinta hawlaha dowladdu ay ka sara mareen kharashaadkii lagu bixin lahaa kobcinta dhaqaalaha. Si kale haddii loo dhigo, qayb weyn oo kamid ah kharashaadka ay dawladdu bixiso waxa ay ku baxaan socodsiinta hawlaha taagan, sida mushaharka iyo kharashaadka maamulka, halkii la gelin lahaa mashaariic horumarineed oo keeni kara koboc dhaqaale.

Isku soo wada duuboo, iyada oo kharashaadka dowladda uu saameyn weyn ku leeyahay kobaca dhaqaalaha dalka, jawaabcelinta aan debecsanayn waxa ay tilmaamaysaa in ay jirtobaahi loo qabo in khayraad waxgal ah loo gaar yeelo ama loo qoondeeyo in lagu bixiyo hormarinta, si koboca dhaqaalaha hore loogu dhaqaajiyo.

## 4.5 Saamaynta Kaashka Dowladda & Deymuhu Ku Leeyihiin Sicirbararka

Qaybtani waxa ay diiradda saaraysaa dhibaatada sicirbararka Soomaaliya, taas oo saamayn weyn ku leh dhaqaalaha guud. Hoos-u-dhaca awoodda wax-iibsiga, gaar ahaan, dadka dakhligoodu yaryahaya, ayaa keenaysa korodhka heerka saboolnimada iyo baahida. Celceliska heerka sicirbbararku muddadii u dhexeysay (2013-2023) waxa uu ahaa ku dhowaadboqolkiiba 8%, marka la eego xogta lagu soo bandhigay shaxdansoo socota. Ceceliska sicirbararka Soomaaliya waa mid ku astaysan baaxaaddeg aad u weyn oo heerka kalatagsanaantiisu (coefficient of variation) ay gaarayso boqolkiiba 93%.

Iyada oo la adeegsanayo falanqaynta dhaqaalaha, waxaa la baadhay saamaynta hawlgudashada siyaasadda lacagta iyo maaliyadda Soomaaliya ay ku leedahay heerka sicirbararka oo lagu saleeyay isbeddelka uu ku yeelanayo waxsoosaarka guud ee gudaha (GDP). Natiijadu waxa ay muujisay in isbeddelka lacagta suuqa lagu sii deynayoiyo hoos-u-dhaca miisaaniyaddu ay ka mid yihiin sababaha ugu waaweyn ee sicir-bararka Soomaaliya dhalinaya, taas caddaynaysa ilaa boqolkiiba 54% isbeddellada heerka sicirbararka. Labada doorsoomeba (variables) waxaa ay leeyihiin caddaymomuhiim ah (significant) oo gaaraya boqolkiiba 1%, markala eego saamaynta ay ku leeyihiin sicirbararka. Mar kasta oo kaashka la soo fasaxayouu kor u kaco ilaa heer gaaraya boqolkiiba 1% waxa uu keenayaa sicirbarar heerkiisu gaarayo boqolkiiba 12%; halka gaabis heerkiisu gaarayoboqolkiiba 1% oo miisaaniyadda ku yimaadda uu keenayo xoogaakor-ukac ku yimaadda sicirbararka oo dhan boqolkiiba 1.4%.

Tani waxa ay ka dhigan tahay in sicirbararka uu si adag uga jawaabayo tayaxumada waxqabadka siyaasadda maaraynta lacagta marka la barbardhigo siyaasadda maaliyadeed. Waxaa xusid mudan, in dad badan oo arrimaha dhaqaalaha ka faallooda ay aaminsan yihiinin aanay Soomaaliya ka jirin siyaasadlacageed oo dhab ah, taasna waxaaba laga garan karaa heerka doollarkudalka ka joogo.Dhinaca kale, lacagahafaalsada ah ee dalka sida xun ugu faafay ayaa ah dhibaato weyn oo saamaysay dhaqaalaha Soomaaliya. Dhowr arrimood oo kale ayaa iyaguna sabab u ah sicir bararkasare ee Soomaaliya. Tan ugu weyn ayaa ah awoodda waxsoosaarka gudaha oo aad u yar, gaar ahaan, waxsoosaarka beeraha sida cuntada asaasiga ah. Tani waxa ay keenaysaain lagu tiirsanaado badeecadaha dibaddalaga keeno, taas oo iyaduna sii hurinaysa baahida loo qabo lacagahaqalaad oo lafteeduah mid sii kordhisa cadaadiska sicirbararka. Intaa waxaa dheer,arrimo kale oo ay kamid yihiin xasilloonidarrada, musuqmaasuqa, isbeddelka cimilada, ayna u sii dheer tahay sicirbararka caalamiga ah. dhammaantood waxa ay kaalin mug leh ka ciyaara kor-u-kaca heerka sicirbararka Soomaaliya.

## 4.6 Siyaasadaha Hormarinta Siyaasadaha Lacagta & Maaliyadda Soomaaliya

In la helo siyaasad dhammaystiran oo wax-ku-ool ah ayaa muhiim u ah xaqiijinta dhaqaale xasilloon, xoojinta hormarinta daka, iyo hagaajinta heerka nololeed ee muwaaddiniinta. Si kor loogu qaado siyaasadaha lacagta iyo maaliyadda, waxaa lamahuraan ah in la qaato hab dhammaystiran oo wax ka qabanaya baahiyaha degdegga ah iyo kuwa waqtiga dheerba.

- **Tixgelinta Siyaasadda Maaliyadda:** Dhaqaalaha Soomaaliya waxa uu si weyn ugu tiirsan yahay lacagta DollarkaMareykanka, taasina waa mid ka dhalatayqiimadhaca ba'an ee ku habsadaylacagta Shilin Soomaaliga. Tani waxa ay siyaasadda maaliyadda Soomaaliya ka dhigaysaa aaladdaugu weyn ee lagu jaangooyodhaqaalaha dalka. Wasaaradda Maaliyadda Federaalka ayaa arrintan door muhiim ah ka qaadanaysa. Hormarinta waxqabadka siyaasadda maaliyadda waxaa kamid ah xoojintamaamulka maaliyadda.

- **Tayaynta Wasaaradda Maaliyadda-** Waa lamahuraan in la hubiyo in Wasaaradda Maaliyaddu ay yeelato awood iyo ilo ku filan oo ay si hannaan leh ugu maareeyso siyaasadaha maaliyadeed. Tan waxaa kamid ah in shaqaalaha la maalgeliyo ama kartidooda la dhiso, iyada oo loo marayo tababarro xoogga saaraya falanqaynta dhaqaalaha, maaraynta maaliyadda guud, iyo lafagurka xogaha (data analytics).

- **Kaduulista falanqayn maaliyadeed oo xooggan-** In la fuliyo qaab-dhismeed maaliyeed oo dhammaystiran ayaa kuwa siyaasadaha dejinaya u suura gelinaya in ay diyaariyaan tilmaamo jihaynaya shaqagudashada maaliyadda, sida heerka cashuuruhu ka noqonayaan waxsoosaarka guud ee gudaha dalka. Falanqayntani waxa ay hagi kartaa hababka go'aan qaadashada waxa ayna wanaajin kartaa hufnaanta maamulka maaliyadda.

- **Kor-u-qaadista Sooxeraynta Dakhliga-** Dowladdu waa in ay wax ka qabato dhibaatada hoos- udhaca dakhliga, iyada oo u maraysa xoojinta nidaamyada cashuuraha, iyo ballaarinta salka cashuuraha (tax base). Waxa kale oo muhiim ah hagaajinta u hoggaansanka cashuuraha si loo kordhiga dakhliga, loona yareeyo kutiirsanaanta kaalmada dibadda.

- **Hormarinta Qaab-dhismeedka Khatarta Maaliyadeed-** Samaynta qaab-dhismeed xooggan oo dhinaca khatarta maaliyadeed ah ayaa xoojinaya awoodda iyo adkaysiga lagu wajahayo jugaha dhaqaalaha, iyada oo kuwa siyaasadaha dhaqaala jaangooya u oggolaanaysa in ay qeexaan khataraha la filan karo isla jeerkaasna ay dhibaatadooda ay yareeyaan. Dhibaatooyinka ay tahay in maanka lagu hayo waxaa kamid ah: isbed-beddellada dakhliga, culayska kharashaadka baxaya, kutiirsanaanta maalgelinta dibadda, iyo qaadashada tallaabooyin hordhac ah; si loo dammaanad qaado deegaan dhaqaale oo aad u xasilloon.

- **Dhisidda Kalsoonida-** Siyaasad-dejiyayaashu waxa ay kobcin karaan kalsoonida dadweynaha iyaga oo soo saaraya warbixinno farsamo oo joogto ah kuwaas oo ka warramaya dhammaan heerarka ay marayso hirgelinta siyaasadda maaliyadeed. Sida oo kale, waa in ay xaqiijiyaan islajaanqaadka siyaasadaha maaliyadeed, qaab-dhismeedka guud ee dhaqaalaha, iyo yoolalka horumarineed; si loo ilaaliyo kalsoonida dadka ay khusayso loona muujiyo kutaagnaanta daahfurnaanta iyo maamul wanaagga.

**Saamaynta Siyaasadda Lacagta**

- **Soocelinta Lacagtii Qaranka-** In si tartiib tartiib ah dib loogu soo celiyo lacagta shilinka Soomaaliga waxay gacan ka geysankartaa xasilinta dhaqaalaha iyadoo la dhimayoku tiirsanaanta lacagaha qalaad.Si hawshan guul looga gaaro,waa in si taxadar leh howshan loo maareeyo iyada oo lala kaashanayo taageerada hay'adaha maaliyadda ee caalamiga ah sida (IMF) iyo (World Bank).

- **Xoojinta HannaanMaaliyadeed oo Loo Dhanyahay-** Xoojinta helitaanka fursadaha lagu helayo adeegyada maaliyadeed oo dhammaan qaybaha bulshadu heli karaan, ayaa laga yaabaa in uu ka qayb qaato koboc dhaqaale oo xasilloon. Hindisayaasha loogu tala galay in lagu hormariyo hay'adaha maaliyadda ee yaryar iyo bangiyada dhijitaalka ah ayaa fududayn kara ka qaybqaadashada dhaqaalaha rasmiga ah.

- **Xoojinta Awoodda Bangiga Dhexe-** Bangiga dhexe waa in uu kor u qaadaa awooddiisa haayadeed; si uu u fuliyo siyaasad lacageed oo wax-ku-ool ah, taas oo kaabaysa qorshayaasha maaliyadeed ee dalka. Tan waxa kamid ah samaynta qaab-dhismeed beegsanaya latacaalidda sicirbararka iyo maaraynta faa'iidada dulsaarka.

- **Kobcinta Maamulka Maaliyadda-** Hagaajinta maamulka hay'adaha maaliyaddu waa arrin aad iyo aad muhiim u ah; si loo xoojiyoabuurista deegaan kobacadhaqaalaha la jaanqaadi kara. Waa in la qaado tallaabooyin lagu wanaajinayo hufnaanta macaamilka maaliyadeed iyo xoojinta qaab- dhismeedka kahortagga lacag-dhiqista (AML).

La socodka Khataraha Dibadda-Qiimaynta joogtadaah ee lagu sameeyo khatarahadibadda, sida: isbeddelka sicirkabadeecadaha asaasiga ah iyo welwelkaamniga gobolka laga qabo ayaa qayb ka qaadata dib-u-habayn hordhac ah oo lagu sameeyo siyaasadda lacagta, yaas oo fursad u siinaysa in si qumman looga jawaabo xilliyada ku habboon.

# CUTUBKA SHANAAD

# SUGNAANTA CUNTADA: FALANQAYNTA XAALADDA & KAJAWAABIDDA ISBEDDELKA CIMILADA



# CUTUBKA SHANAAD

## SUGNAANTA CUNTADA: FALANQAYNTA XAALADDA IYO KAJAWAABIDDA ISBEDDELKA CIMILADA

### 5.1 Saami-doceedka Cuntadu Kaga jirto Waxsoosaarka Beeraha

Beeruhu waxa ay kaalin muhiim ah ka ciyaaraan dhaqaalaha Soomaaliya, iyaga oo udub- dhexaadka u ah, waxa ayna si weyn uga qayb qaataan waxsoosaarka dhaqaalaha dalka, waxa ayna keenaan fursado shaqo iyo dakhli, dhoofkoodana waxaa ka soo xaroota faa'iido badan. Beeraha waxaa ku nool in badan oo kamid ah Soomaalida, iyada oo qoysasaan la koobi karin oo gobollada dalka oo dhan ku nooli ay xoolahaku tiirsan yihiin.Soomaaliya waxaa ka jira beeralayhaysta dhul beereed yaryaroo ay iyagu leeyihiin oo ay beertaan. Beeralayda caynkaas ahi waxa ay maareeyaan ku dhowaad afar meelood saddex kamid ah dhulbeereedka dalka. Taa beddelkeeda, beeralayda waaweyn waxa ay maamulaan rubuc kamid ah dhelbeereedka dalka.

Beeruhu waa il shaqo oo muhiimah, waxaana ku tiirsan inta badan xoogsatada oo ka shaqaysta waxsoosaarka hore ee beeraha.Juquraafi ahaan, waxsoosaarka beeruhu waxa uu ku urursanyahay gobollada koonfureed, halkaas oo ah dhul barwaaqo carrsasan ah, waraabka jiinka webiyada ayaana abuuraya duruufo waxbeeristaa ku wanaagsan. Waxsoosaarka beeralayda ee ugu muhiimsan waxaa kamid ah: mirahaadag, digirta noocyadeeda, iniinta saliidda laga sameeyo iyo khudaarta waa weyn (cambaha, mooska, babayga iwm).

Soomaaliya waxa ay leedahay khayraad aad u badan, taas oo keenaysa fursad weyn oo lagu samayn karo koboc iyo isbeddel dhaqaale oo degdeg ah. Kafaa'iidaysiga kheyraadkan ayaa saamayn weyn ku yeelan kara nolosha ShacabkaSoomaaliyeed, waana mid keeni karta barwaaqo iyo mustaqbal dhaqaale oo ifaya. Khayraadkaas waxaa kamid ah 8.9 milyan hiktaar oo dhul beereed ah, (boqolkiiba 25% waxsoosaarka dhulkan waxaa lagu beeraa roobka iyo waraabin qaddiimi ah), in ka badan 50 milyan oo xoolo ah iyo ilaa 1.8 milyan oo tan oo kalluun sannadkii la dhoofin karo. Soomaaliya waxa ay leedahay laba webi oo waaweyn oo kala ah; Jubba iyo Shabeelle oo dhererkoodu yahay 2,300 km, waxa ayna leedahay xeebta ugu dheer dhul weynaha Afrika oo dhan 3,333 km. Arrimahan dabiiciga ah ayaa soo bandhigaya fursado aan tiro lahayn oo lagu kobcin karo dhinacyo badan, gaar ahaan, dhinaca beeraha (Midowga Afrika, 2022).

Celcelis ahaan, waxsoosaarka Masaggada iyo Gelleyda gudaha dalka (qiyaastii 166,000 MT iyo 139,000 MT), ayaa daboolabaahida isticmaalka gudaha,taas oo Soomaaliya ka dhigaysa in ay iskufilnaasho ka gaaraydalagyada galleyda iyo Masaggada. Inta badan beeruhuwaxa ay ku tiirsan yihiin roobabka, noocyada roobabka da'aana waxa ay keenaan kaladuwanaansho weyn oo u dhexeeya waxsoosaarka sannadaha. Gobolladaa Koonfureed (Shabeellada Hoose, Gedo, Jubbada Hoose, Baay, Bakool, iyo Hiiraan) waa dhulka ugu waxsoosaarka badan Soomaaliya. Gobollada woqooyiga iyo kuwa dhexe ma lahan waxsoosaar baahida gudaha dabooli kara, marka laga reebo meelo yar oo Hargeysa ku hareeraysan. Waxsoosaarka gudaha ee bariiska iyo qamadiga ayaa ah mid aad u yar, taas oo Soomaaliya ku khasabta in ay si weyn ugu tiirsanaato suuqyada caalamiga ah si ay u daboosho baahida gudaha ee badeecadahaas muhiimka ah loo qabo. Si baahidaas loo daboolo, Soomaaliya waxa ay sannad walba soo dhoofisaa tira badan oo bariis iyo bur ah. Celceliska sannadlaha ah ee waddanku soo dejiyo waa ku dhowaad 201,000 mitirtan oo bariis ah iyo 208,000 metrir tan oo bur bur ah.

Waxaa xusid mudan, soodejinta daqiiqda in ay si joogto ah u kordhaysay tan iyo 2008, halka isbeddellada soodejinta bariisku ay isbed-beddelayeen sannadihii la soo dhaafay. Soomaaliya waxaa ku yaal afar dekedood oo waaweyn: Berbera iyo Boosaaso oo waqooyi ah, iyo Muqdisho iyo Kismaayo oo ku yaalla koonfurta oo awooddoodu kala duwan tahay. Si hoose marka loogu fiirsado, waxaa jira kaladuwanaansho dhinca dookha gobolladaah marka la eego cunto waddaniga Soomaaliya. Gobollada woqooyiiyo kuwa dhexe waxaa ka jira jacayl xooggan oo dhanka bariiska ah, kaas oo ah cunnada ugu badan ee laga isticmaalo deegaannadan. Taas beddelkeeda, gobollada Koonfureed waxaa u badan cunista cambuulada iyo Masaggada. Intaa waxaa dheer, isticmaalka qamandigu waxa uu inta badan ku badan yahay magaalooyinka, siiba qoysaska hodanka ah, taas oo muujinaysa kaladuwanaanshaha dhaqan-dhaqaale iyo dookhyada cuntada (Famine Early Warning Systems Network, 2017).

Beeraha Soomaaliya ayaa kaalin mug leh ka qaata saamaynta dhinacyo kala duwan, waana qaybta ugu weyn ee Waxsoosaarka dalka qaaraan ku darsata. Waxa ay kaalin xooggan ku leeyihiin abuurista dakhli, fursadoshaqo iyo sugnaantacuntada (food security) waxaana laga helaa lacago adag. Beeruhu waxa ay soo saaraan dalagyokala nooc ah oo ay kamid yihiin:miraha adag, digirta noocyadeeda, iniintasaliidda laga sameeyoiyo khudaarta waa weyn (cambaha, mooska, babayga iwm). Waxsoosaarka beeraha ayaa loo qaybiyaa saddex qaybood oo waaweyn: dalagga, xoolaha, iyo kalluumaysiga. Qaybahaas marka la eego, xoolaha ayaa calanka u sida iyaga ayaana asaas u ahdhaqaajinta dhaqaalaha dalka,waxa ayna abuuraanfursado shaqo, waa la cunaa,dibaddana waa loo dhoofiyaa.

Taariikh ahaan, dhoofka xooluhu waxa uu ahaa qodob muhiim u ah kobaca dhaqaalaha Soomaaliya, taas oo muujinaysa kaalinta mugga leh ee xooluhu ku leeyihiin horumarinta dhaqaalaha dalka. Beeruhu waxa ay fursado shaqo iyo ilo dhaqaaleba u yihiin Dadka Soomaaliyeed ee ku nool dhulbeereedka. Kalluumaysiga ayaa isagunaah isha dhaqaaleiyo cunto ee ay ku tiirsan yihiin bulshooyinka xeebaha ku nool. Waxsoosaarka beeraha ayaa la sheegaa in uu hoos u dhacay sannadkii 2022, waxaana sabab u ah masiibooyin is biirsaday oo ay kamid yihiin isbeddelka cimilada, fatahaado, iyo abaaro. Arrimahani waxa ay keeneen in la waayay shan xilli roobaad oo xiriirsan, waxaana kordhay kharashaadka waxbeerista (CBS, 2022).

Waxsoosaarka beeraha ayaa ilaa hadda hooseeya, waxaana ugu wacan adeegsiga farsamooyin qadiim ah sida, kaladheeraynta dalagyada, jeexjeexa dhulka, iyo iskadabasugga beerista dalagyada. Intaa waxaadheer, hoos-u-dhaca Waxsoosaarka beeraha waxaa loo aanayn karaain aan la helin maalgelin ku filan, iyo iyada oo si xad dhaaf ah loogu tiirsan yahay biyaha roobka, welibana ay jiraan abaaro soo noqnoqday, kaabayaasha waraabka oo duugoobay, jidadkaoo aad u liita amaba aan jirin, iyo muranno dhinaca lahaanshaha dhulka ah. Sida oo kale, nabadgelyaxumada guud, gaar ahaan gobollada koonfureed ee dalka,oo Waxsoosaarka dalaggauu yahay dhaqdhaqaaqa ugu weyn ee dhaqaalaha, ayaa ah caqabad aad u weyn (AfDB, 2017).

## 5.2 Iskufilnaanashaha Cunnada Asaasigaah (wadar iyo keli): Milisiga iyo Abbaarta

Qaybtani waxa ay dib u eegis ku samaynaysaa heerka iskufilnaanshiyaha Soomaaliya ee cuntada galka leh (Gelleyda, Masaggada, Qamandida iyo Bariiska). Iskufilnaantu waxa ay ku tiirsan tahay heerarka waxsoosaarka oo la barbar dhigay isticmaalka. Falanqayntu waxa ay ka bilaaban doontaa dulmar ku saabsan cuntadasuuqa soo gelaysa,waxaana raaci doona dalabka cuntada,taas oo keeni karta in la caddeeyo heerka iskufilnaanshaha. Waxsoosaarka dalagga Soomaaliya waxa uu wajahayaa caqabado dhowr ah, taas oo keentay in waxsoosaarka dalagguu isbed-beddelo sannadihii la soo dhaafay. Celcelis ahaan waxsoosaarka gallaydu waxa uu ahaa 103.6 kun oo mitirtan labaatankii sano ee u dambeeyay, taas oo hoos uga dhacday 202-kun oo mitirtan sannadkii 2004-tii ilaa 119-kun oo mitirtan sannadkii2013-kii mar kalana2023-ka gaaray 75-kun mitirtan. Waxsoosaarka Gelleyda ee ugu hooseeyawaxa uu ahaa 2019-kii (57-kunmitirtan), halka waxsoosaarka ugu sarreeya uu ahaa 2004-tii(202 kun mitirtan). Isbeddelka heerka jihadaGallaydu waa mid taban oo muujinaya caddaymo tiarkoob oo gaaray sa boqolkiiba 1% iyo celcelis koboc iskudhafan oo gaaraya (-4.2).

Waxsoosaarka Masaggadu ayaa aad u xasilloon marka loo eego galleyda, laakiin waxsoosaarkiisu waa uu sii yaraanayaa. Masaggada soo go'aya ayaa hoos u dhacay 100-kun oo mitirtan sannadkii 2023-kiihalka uu ka ahaa 145-kunoo mitirtan sannadkii2004-kii iyo 113-kun oo mitirtan 2013-kii. Celceliska heerka hoos-u-dhaca ayaa ah ilaa boqolkiiba 1% labaatankii sano ee la soo dhaafay, laakiin wakhtiga la qiyaasayo isbedbedelku maaha tirakoob muhiim ah (saamayn weyn ma laha).

Waxsoosaarka bariiska ayaa u muuqda in uu sugan yahay, ku dhowaad 1 kun metrik tan sannadkii, marka laga reebo 2009, kaas oo heerka waxsoosaarku gaaray 2-kun metriktan. Sida oo kale,sarreenka ayaa ah mid suganoo ah ilaa hal (1-kun)metrik tan sannadkii. Waxaa xusid mudan in xogta waxsoosaarka sarreenka aan la heli karin muddada taxanaha ah oo dhan, sidaas darteed, waxaa la isticmaalay ilo kala duwan oo tilmaamaya in waxsoosaarka sannadlaha ahi uu ku dhow yahay 1-kun metrik tan.Xogta dalagyada kale ayaa laga helay Wasaaradda Beeraha ee Maraykanka. Wadarta waxsoosaarka dalagga ayaa hoos u dhacayacelcelis ahaan boqolkiiba 2.7% labaatankii sano ee la soo dhaafay, halkaas oo wadarta waxsoosaarku uu hoos u dhacay 177-kun oo mitirtan sannadkii 2023-kii marka la barbar dhigo 349 kun oo mitirtan iyo 234-kun oo metrik ton sannadihii 2004-kii iyo 2013-kii, sida ay u kala horreeyaan. Celcelis ahaan waxasoosaarka dalagga cuntada ee Soomaaliya labaatankii sano ee la soo dhaafay waxa uu ahaa 221.3-kun mitirtan oo doorsoomaha (variation) isbeddelkiisa lagu qiyaasay boqolkiiba 25.4%. Jadwalka soo socdaa waxa uu muujinayaa Waxsoosaarka cuntada waddaniga ee Soomaaliya muddadii taxanaha ahayd.

**Shaxda 5.1. Waxsoosaarka Cunto ee Soomaaliya (000 Mitirtan) 2004 –2023**

| Sannadaha | Galley | Masaggo | Qamadi | Bariis | Wadar |
|---|---|---|---|---|---|
| 2004 | 202 | 145 | 1 | 1 | 349 |
| 2005 | 200 | 140 | 1 | 1 | 342 |
| 2006 | 97 | 145 | 1 | 1 | 244 |
| 2007 | 99 | 80 | 1 | 1 | 181 |
| 2008 | 100 | 75 | 1 | 1 | 177 |
| 2009 | 107 | 84 | 1 | 1 | 194 |
| 2010 | 120 | 115 | 1 | 1 | 237 |
| 2011 | 114 | 142 | 1 | 1 | 258 |
| 2012 | 96 | 184 | 1 | 1 | 282 |
| 2013 | 119 | 113 | 1 | 1 | 234 |
| 2014 | 111 | 132 | 1 | 1 | 245 |
| 2015 | 107 | 130 | 1 | 1 | 239 |
| 2016 | 63 | 77 | 1 | 1 | 142 |
| 2017 | 77 | 95 | 1 | 1 | 174 |
| 2018 | 102 | 132 | 1 | 1 | 263 |
| 2019 | 57 | 125 | 1 | 1 | 184 |
| 2020 | 75 | 100 | 1 | 1 | 177 |
| 2021 | 75 | 100 | 1 | 1 | 177 |
| 2022 | 75 | 100 | 1 | 1 | 177 |
| 2023 | 75 | 100 | 1 | 1 | 177 |


***Isha:** Wasaaradda Beeraha ee Maraykanka (2024)*

Wadarta isticmaalka cunta waddaniga ee Soomaaliya ayaa sii kordheysa muddo kadib, iyada oo celceliska kobaca iskudhafka ah uu yahay boqolkiiba 7.4% muddadii u dhexeysay (2004-2023). Wadarta isticmaalka ayaa kordhay min 527-kun mitirtansannadkii 2004 ilaa 1632 kun oo mitirtan sannadka 2023-kii, taas oo ka gudubtay 653 kun mitirtan sannadkii 2013-kii. Celceliska wadarta guud ee isticmaalka cunto waddaniga muddadaa la soo sheegay waxa ay ahayd 902.3-kun metrik tan, iyada oo isugaynta kala duwanaanshiyaha lagu qiyaasay boqolkiiba 47.1%. Wadarta guud ee isticmaalka heerka ugu hooseeya ayaa la diiwaan geliyay 2006-dii (435 kun mitirtan), halka wadarta guud ee isticmaalka heerka ugu sarreeya uu ahaa 2023-kii (1632-kun metritan).

Isticmaalka cuntada miraha ayaa si muuqata kor ugu kacday tobankii sano ee la soo dhaafay, iyada oo lagu tiirsanaa cuntada la soo dejiyo, halka waxsoosaarka guud cuntada dalka laga soo saarayay ay hoos u dhacaysay. Isticmaalka qamandida iyo bariiska ayaa sii kordhaya muddo kadib, iyadaoo celcelis ahaan heerarka kobacauu gaaray boqolkiiba 20.8% iyo boqolkiiba 10.2% labaatankii sano ee la soo dhaafay,halka isticmaalka galleydaiyo Masaggadu ay hoos u dhacayaan ilaa heer boqolkiiba 4.6% iyo 0.05, siday u kala horreeyaan. Waxaa xusid mudan in heerka kobaca isticmaalka Masaggada uu yahaymidka keliya ee aan xisaabahaan muhiimad weyn kalahayn marka la eego heerarkakobaca la xisaabiyay ee cunta waddaniga. Celceliska isticmaalka qamadiga iyo bariiska labaatankii sano ee la soo dhaafay waxa uu ahaa 315.1 kun mitirtan iyo 307.7 kun metrik tan, sida ay u kala horreeyaan, halka celceliska isticmaalka galleyda iyo Masaggadu uu ahaa 115.6-kun mitirtaniyo 163.9-kun mitirtan, sida ay u kala horreeyaan.

Waxaa xusid mudan,in diraasada lagu sameeyay noocyadaisticmaalka cuntada ay muujinayso isgedgeddi weyn. Isticmaalka qamandiga ayaa si weyn isu gedgeddinayay, iyada oo kalatagsanaantiisu (coefficient of variation) gaarayso ilaa boqolkiiba 85.6%. Taa bedelkeeda, isticmaalka Masaggada ayaa muujinaya iskudhowaanshaha ugu badan, iyada oo isku-dhafka kalatagsanaantiisu tahay boqolkiiba 20.6%. Natiijooyinku waxa ay muujinayaan isbeddel ku yimid qaababka isticmaalka cuntada ee Soomaaliya, waana arrin muujinaysa kor-ukaca maciishadda iyo dadka reer magaaloobaya oo sii kordhaya. Isbeddelka ku yimid isticmaalka cunta waddaniga ayaa keenaysa fursado lagu horumarinayo beeraha laguna kobcinayo suuqa. Fahanka isbeddelladan ayaa muhiim u ah siyaasad-dejiyeyaasha iyo daneeyayaasha doonaya in ay kor u qaadaan amniga cuntada iyo horumarinta waxbeerashada Soomaaliya ee waara. Jadwalka hoose waxa uu muujinayaa isticmaalka cunto waddaniga Soomaaliya muddo kadib.


**Jaantuska 5.1. Isticmaalka Cuntada Soomaaliya (000 Mitirtan)2004 - 2023**




***Isha:** Wasaaradda Beeraha ee Maraykanka (2024)*

Heerka iskufilnaanshaha cuntada Soomaaliya ayaa si aad ah hoos ugu dhacay 66% 2004-kii ilaa boqolkiiba 36% 2013-kiikadibna waxa uu noqday boqolkiiba 11% 2023-kii, iyadoocelcelis ahaan uu hoos u dhacay boqolkiiba 10% intii lagu jiray (2004-2023). Hoos-u-dhacani waxa uu muujinayaa korodh weyn oo ku yimid kutiirsanaanta dibadda si loo daboolo dalabka gudaha ka jira loona dammaanadqaado sugnaanta cuntada(food security). Kutiirsanaanta sii kordhaysa ee cuntasoodejinta lagu daboolayo hoos-u-dhaca waxsoosaarka gudaha dalka ayaa wiiqaysa madaxbannaanida cunto ee Soomaaliya, siina kordhinaysa u-nuglaanshaha isbeddellada suuqyada adduunka. Intaa waxaa dheer, awood-darrada dalka ka haysatain uu la soo baxo cunto ku filan oo baahida gudaha ka daboolo,ayaa ah halis weyn oo dhinaca cuntadaah, gaar ahaan, waxa ay halis ku tahay dadka nugul, sida reerguuraga iyo barakacayaasha gudaha. Dhinaca kale, kutiirsanaanta sii korodhaysa ee badeecadaha la soo dejiyo ayaa culays saaraysa dhaqaalaha Soomaaliya, maadaama dalku lacag adag oo badan ku bixiyo soodejinta cuntada daruuriga ah. Celcelis ahaan saamiga iskufilnaanta galleydaiyo Masaggada ayaa ahaa boqolkiiba 90.4% iyo boqolkiiba 71.8%, sida ay u kala horreeyaan, halka iskufilnaanta qamandiga iyo bariiska lagu qiyaasay boqolkiiba 1.6% iyo boqolkiiba 0.5%, sida ay u kala horreeyaan, muddadiiu dhexeysay 2004-2023. Shaxdan soo socotaa waxa ay muujinaysaa isbeddellada iskufilnaansho ee dalagyada cuntada Soomaaliya.

**Jaantuska 5.2. Iskufilnashaha Cunto ee Soomaaliya 2004 - 2023**





***Isha:** Wasaaradda Beeraha ee Maraykanka (2024)*

Isbarbardhigga celceliska heerka iskufilnaanshaha cuntada tobankii sano ee ugu horreeyay (2004-2013) iyo celceliska heerka iskufilnaanta tobankasano ee xigay (20142023) waxa ay muujinaysaa arrimahan soo socda:

- Waxaa kordhayheerka iskufilnaashaha Gelleydaoo gaaray 5.7. celceliska dhexe ayaa ahaa boqolkiiba 88% tobankii sano ee hore, ilaa boqolkiiba 93% tobankii sano ee dambe.
- Iskufilnaanshaha Masaggada ayaa celcelis ahaan boqolkiiba 79% hoos uga dhacay, una degay celcelis ahaan 65%, iyada oo heerka hoos-u-dhacuna ahaa ilaa boqolkiiba 18%.
- Iskufilnaanshaha sarreenka ayaa celcelis ahaan boqolkiiba 2.9% hoos uga dhacay, una degay celcelis ahaan boqolkiiba 0.2%, iyada oo heerka hoos-u-dhacuna ahaa ilaa boqolkiiba 93%.
- Iskufilnaanta bariiska ayaa hoos uga dhacday celcelis ahaan boqolkiiba 0.8% tobankii sano ee hore, ilaa boqolkiiba 0.2% celcelis ahaan tobankii sano ee xigay (heerka hoos-u-dhaca ayaa gaaraya boqolkiiba 75%).
- Hoos-u-dhaca celceliska iskufilnaanshaha Masaggada, sarreenka, iyo bariiska ayaa keenay hoos-u-dhac weyn oo ku yimid guud ahaan cuntada, kaas oo ka soo degay boqolkiiba 47% tobankii sano ee hore, ilaa boqolkiiba 16% tobankii sano ee xigay (waxaa jira hoos- u-dhac gaaraya 2/3).

**Jaantuska 5.3. Abbaarta (Jihada) Iskufilnaanshaha Cunto ee Soomaaliya Marka La Is Barbardhigo 2004 – 2013 iyo 2014 - 2023**




***Source:*** *Based on Data Collected from the USDA (2024)*


## 5.3 Falanqaynta Waxsoosaarka Dalag ee Ugu Muhiimsan

Qaybtani waxa ay dul istaagidoontaa waxsoosaarka dalag ee Soomaaliya intii u dhexeysay (2004- 2023). Waxsoosaarka galleyda ayaa u dhexeeyay (0.415-1.097) metrik tan hiktarkii, halka Waxsoosaarka Masaggadu uu u dhexeeyay (0.220-0.564) mitirtan hiktarkiiba. Waxsoosaarka sarreenka ayaa ahaa mid sugan oo aan isbeddelin hal mitirtan halkiihiktar. Labaatankii sano ee la soo dhaafay, waxsoosaarka bariiska ayaa ahaa mid sugan, hal mitirtan halkii hiktar, marka laga reebo 2009-kii, xilligaas oo waxsoosaarka hiktarkii uu labanlaabmay oo noqday ;labo mitirtan.

Celceliska waxsoosaarka dalagga muhiimka ah ee Soomaaliya calaa hiktar waxa uu ahaa sidan soo socota: Gallay (0.638 mitirtan), hadhuudh (0.388 mitirtan), bariiska (1.05 mitirtan), iyo sarreen (1 mitirtan). Wadarta guud ee waxsoosaarka cuntadaayaa celcelis ahaan lagu sheegay0.474 mitirtan hiktarkiiba. Kalataksanaanta waxsoosaar ee calaa hiktarayaa kala duwanaamarka la eego dalagyada, iyada oo ahayd boqolkiiba 21% Gelleyda, ilaa boqolkiiba 25% Masaggada (maize). Kalatagsanaanta waxsoosaarka guud ee cunta waddaniga ayaa gaaraysa boqolkiiba 19%.

Waxaa isa soo tarayawaxsoosaarka Gelleyda, Masaggada, iyo guud ahaan cunto waddaniga ee halkii higtar lagu beerayo xilli kadib dalka Soomaaliya, balse isbeddelkaasi maaha mid ku tiirsan farsamo casri ah ama qaabkii waxbeerista oo la hagaajiyay. Taa beddelkeeda, waxa keliya ee loo aanayn karaa hoos-udhaca weyn ee ku yimid dhulkii la beerayay marka la barbardhigo waxsoosaarka, waana mid muujinaysa in uu jiro waxa lagu magcaabo soo kogidda maasaxadii la beeray (horizontal contraction). Jaantuska soo socda ayaa muujinaya horumarka wax soo saarka badarka Soomaaliya.

**Jaantuska 5.4. Wax-soo-saarka Cunto ee Soomaaliya (2004-2023)**




***Isha:*** *Wasaaradda Beeraha ee Maraykanka (2024)*


## 5.4 Saamiga Qofka Kaga Soo Beegmaysa Cuntada & Isticmaalkeeda

Waxsoosaarka guud ee cunto waddaniga oo loo qaybiyo tirada dadka waxa uu inna siinayaa saamiga halkii qof ku soo aadaysa. Celcelisa ku soo aadaya calaa qof waxa uu gaaray aa 17.2kg intii u dhexeysa 2004 – 2023, waxa uuna u dhexeeyaa 9.94kg ilaa 34.5kg. Taas bedelkeeda, celceliska isticmaalka cuntada qofkiiba waxa uu ahaa 63.3kg isla muddadaas, kaas oo u dhexeeyay 40.33kg ilaa 89.95kg. Isbarbardhigga xoguhu waxa ay muujinayaa in saamiga waxsoosaarka ee calaa qof ku soo aadayaa uu aad isku gedgeddinayo, ayna la jirto heerka kalatagsanaanta oo gaaraya boqolkiiba 41%, halka isticmaalka cuntada calaa qof ay tahay mid aad xasilloon, kalatagsanaanteeduna gaaray boqolkiiba 30%. Intaa waxaa dheer, xoguhu waxa ay muujinayaan in waxsoosaarka calaa qof ku soo aadayaa uu hoos u dhacayo muddo kadib, celceliska koboca sannadlahana uu ahaa boqolkiiba 5.7%, halkaas oo waxsoosaarka guud ee cuntadu ay sii yaraanaysay inkasta oo dadkuna ay sii badanayeen. Taas beddelkeeda, isticmaalka cuntada calaa qof ayaa kordhay celcelis ahaan boqolkiiba 4.4% sannadkii, taas oo ay keentay kor-u-kaca guud ee isticmaalka cuntada oo ka badan kobaca dadweynaha. Waxaa xusid mudan in abbaarta labada tuseba ay muujinayaan caddaymo tirakoob oo gaaraya 1%.

Natiijooyinkan ayaa tilmaamaya in Soomaaliya ay soo wajahayso cuntayari aad u weyn, oo hadda lagula tacaalayo ama lagu daboolayo cuntooyinka dibadda laga keeno. Farqigu waa uu sii socon doonaa haddii aan la hirgelin istaraatijiyad heer qaran ah oo dhammaystiran si kor loogu qaado waxsoosaarka cunto waddaniga iyada oo loo marayo kobcinta waxa la beerayo iyo dhulka la beerayaba (sal iyo baar).

Jadwalka soo socda waxa uu dulmarayaa sooyaalka jihada waxsoosaarka iyo isticmaalka cunta waddaniga ee calaa qof ku soo beegmaysa.

**Jaantuska 5.5. NasiibkaAma Saamiga Calaa Qof Ku Soo Aadaya Cuntada (Helista & Isticmaalka) Kg Ahaan (2004 – 2023)**




***Isha:*** *BankigaAdduunka (2024)*

## 5.5 Falanqaynta Tusmada Waxsoosaarka Xoolaha

Waxaa muhiim ah in aynu ifinno muhiimadda xoolaha nool ee Soomaaliya, iyada oo la eegayo kaalinta weyn ee ay ka qaataan dhaqaalaha dalka. Xoolaha nool ayaa laf-dhabar u ah nolosha iyo dhaqaalaha Soomaaliya, iyaga oo boqolkiiba 40% ka ah waxsoosaarka guud ee dalka, ayna ku tiirsan yihiinin ka badan boqolkiiba 60% dadka Soomaaliyeed. Waxaa xusid mudan, in Sacuudigu yahay suuqa koowaad ee loo dhoofiyo xoolaha nool ee Soomaalida, gaar ahaan adhiga iyo geela, iyada oo loo diro ku dhowaadboqolkiiba 75%, gaar ahaan xilligaXajka. (Famine EarlyWarning Systems Network, 2017).

Xoolaha nooli waxa ay kaalin mug leh ka ciyaaraan dhaqaalaha Soomaaliya, iyaga oo la dhoofiyo, la cuno, lagana shaqaysto. Waxaa xusid mudan, in xoolaha nooli ay kamid ahaayeen qaybaha farakutiriska ah ee aan waxyeello ka soo gaardhin dagaalladii sokeeye. Inta badan xoolaha la dhoofiyo waxaa laga raraa dekedahaBoosaaso iyo Berbera,waxaana jira tiro aan badnaynoo laga raro dekedaha Muqdisho iyo Kismaayo. (CBS, 2022).

Soomaaliya waxaa ku nool xoolo aad u badan,waxaana lagu qiyaasaain ay gaaray aan ilaa 50 milyan oo neef, iyada oo qiimaha dhoofkaxoolahana lagu sheegay 500 milyan oo doolar oo lagasameeyay dhoofinta 5.3 milyan oo neef oo xoolo ah. Waxaa la filayaa in xoolaha nool ay yihiin waxa ugu weyn ee kobaca waxsoosaarka dalka wada, iyadaboqolkiiba 90% waxyaabaha dibadda loo dhoofiyo ay xoolaha yihiin,halka boqolkiiba 25% shaqaalaha Soomaaliyeedna ay xoolaha ka shaqeeyaan. Meesha ugu badan ee xoolaha Soomaaliya loo dhoofiyo waa Sacuudiga.


Dhoofinta xoolahaayaa kor u kacday ku dhawaad toban jibbaarintii u dhexeysay1980-kii iyo bartamihii 2010. Sidaa oo ay tahay, waxaa la arkay in dhoofinta waxyaabaha xoolaha laga helo oo aan la warshadayn ay yihiin boqolkiiba 76% marka la eego guud ahaan waxyaabihii dibadda loo dhoofiyay sannadkii 2022-kii, waana mid qiimaha xoolahasii xoojinaysa (AfDB,2024). Iyada oo lagu saleynayo xogtalaga soo ururiyayCBS (2022), waxaacad in dhoofka xooluhu uu kordhay ilaa 8% muddadii u dhexeysay (2018 – 2022), gaar ahaan, dakhliga laga helo dhoofinta xooluhu waxa uu kordhay $404 milyan 2018 ilaa $512 milyan 2019, waxaana uu hoos u dhacay $505 milyan sannadkii 2020 sababo la xiriira cudurka dilaaga ah ee COVID, halka 2021 iyo 2022 dakhliga xooluhu gaaray $523 milyan iyo $558 milyan, siday u kala horreeyaan.

Labaatankii sano ee la soo dhaafay, celceliska waxsoosaarka xooluhu waxa uu ahaa 102, iyada oo xaddiga gedgeddoonkuna uu ahaa yare degganilaa heer boqolkiiba 4.2%. Tusahani waa uu sii yaraanayaa muddo kadib celcelisgaaraya ilaa boqolkiiba 0.31%, waana mid aan muujinayn tirakoob aad u muhiim ah. Sida oo kale, natiijooyinka ayaa tilmaamay in abaarihii dhacay, gaar ahaan tobankiisano ee la soo dhaafay, ay sababeen hoos-u-dhac weyn oo ku yimid tusmada waxsoosaarka xoolaha qiyaastii boqolkiiba 4.3%. Abaarta keligeed ayaa muujinaysa boqolkiiba 50% isbeddel ku yimaadda tusaha waxsoosaarka xoolaha, sababta oo ah, waxa uu saamayn toos ah ku leeyahay daaqa ama baadka.

Natiijadan ayaa ah mid waafaqsan natiijooyinkii haayaadda Islamic Relief Organization soo saartay (2023), taas oo muujisay in mowjado abaareed oo ka dhacay Soomaaliya ay wiiqeen beerihii dalka oo ahaa isha dhaqaaleee ugu badan Soomaaliya. Kalabarqoysaska Soomaaliyeed waxa ay ku tiirsanyihiin haweenka oo shaqeeya, iyagunawaxa ay wajahayaan caqabado daranoo dalka ka jirta,ayna ku jiraan isbeddelka cimiladaiyo cunto yaraan.Beeraha iyo xoolahaayaa dad badan oo Soomaaliyeed quutul yowmkooda ka maareeyaan, sidaas darteed, roobyaraantii ugu dambaysay ayaa burburisay ishiikeli ahayd ee ay dadkaasiku noolaayeen. Haayadduwaxa ay soo jeedisay in la kordhiyo adkaysigabeeralayda iyaga oo si caqliyaysan beerahooda u maaraynaya, lana kaashanaya mashruuca (SARIA) oo ah mashruuc loogu tala galay waxkaqabashada caqabadaha abaaraha soo noqnoqda iyo cuntayarida Soomaaliya, iyada oo beeralayda la siinayo xoolo cimilada u adkaysan kara, lana fulinayo farsamooyinka waxbeerista caqliyaysan;

si looga ilaaliyo waxyeellada ka dhalanaysa isbeddelka cimilada. Shaxdan soo socotaa waxa ay muujinaysaa isbeddelka tusmada waxsoosaarka xoolaha ee Soomaaliya.

**Jaantuska 5.6. Tusaha Wax-soosaarka Xoolaha ee Soomaaliya (2004-2023)**




***Isha:*** *BankigaAdduunka (2024)*

## 5.6 Saamaynta Isbeddelka Cimiladu Ku Leeyahay Amniga Cuntada

Iyada oo adeegsanayo falanqaynta hoobadka laynka (linear regression analysis) iyo muunadda kaladuwanaanta; ayaa la diraaseeyay saamaynta cimiladu (abaaruhu) ku leeyihiin dhulbeereedka lagu beero cunto waddaniga iyo wadarta waxsoosaarka Soomaaliya intii u dhexeysay 2004–2023. Natiijadu waxa ay muujisay in abaarta ka jirta Soomaaliya ay keentay hoos-u-dhac ku yimid dhulkii cunto waddaniga laga beeran jiray saddex meelood meel, iyo hoos-u-dhac weyn oo ku yimid waxsoosaarka cuntada oo lagu qiyaasay ilaa boqolkiiba 23.4%. Isbeddelka cimiladu waxa uu fasirayaain ku dhowaad 65% dhulkiila beeri jiray isbeddel ku dhacay, iyo isbeddel ku dhacay waxsoosaarkii guud ee cuntada oo gaaraya boqolkiiba 69%. Tusaalayaasha la qiyaasay waxa ay muujinayaan awood tirakoob, taas oo muujinaysaa kalsoonida lagu qabi karo. Sidaadarteed, in la yareeyo dhibaatada arrimaha deegaanku waxa ay u baahan tahay siyaasad wax-ku-ool ah oo ka shaqaysa abuurista deegaan ku habboon waxsoosaarka beeraha guud ahaan, iyo waxsoosaarka cuntada gaar ahaan.

Dhinaca kale, natiijooyinkan ayaa waafaqsan diraasado dhowr ah oo muujinaya in abaarta Soomaaliya ka jirta ay sababtay hoos-u-dhac ku yimid beeraha iyo kor-u-kaca nabaadguurka, tan oo boqollaal kun oo qof oo ku tiirsanaa beerahaku khasabtay in ay barakacaan ama dalalka deriska ah magan galaan. Waxaasoo dhami waxa ay kordhiyaan saboolnimada oo xakamahagoosata, taas oo keenaysa in dadku awoodi waayaan in ay helaan cunto ku filan. Barnaamijka Deegaanka ee Qaramada Midoobay (UNEP, 2018) ayaa xusay in Soomaaliya ay ku soo noqnoqonayeen abaaro daba dheeraaday shan iyo labaatankii sano ee la soo dhaafay, kuwaas oo heerkii ugu sarreeyey gaaray sannadihii 2016-kii iyo 2017-kii markaas oo saddex xilliroobaad oo xiriir ah la waayay. Abaarahan ayaa sababay cuntayari, nafaqadarro, daacuun, iyo cudurro kale, taas oo keentay in dadku ay ka hayaamaan miyiga una hayaam magaalooyinka, waxaana sii kordhay ardayda dugsiyada ka hadhaysa.

## 5.7 Siyaasadaha Lagu Hagaajinayo Sugnaanta Cuntada Soomaaliya

Damaanadqaadka sidii loo heli lahaa cunto ku filan, nabdoon oo nafaqo leh ayaa ah mudnaanta koowaad marka la eego kobcinta asaasiga ah. Marka la eego Soomaaliya, cuntayarida ayaa weli ah caqabad aad u weyn, taas oo saamaynaysa nolol wanaagsan oo muwaaddiniin badani heli lahaayeen. Qaybtani waxa ay qeexaysaa siyaasadaha iyo xeeladaha ugu doorka roon ee lagu hagaajinayo amniga cuntada:

**Diyaarinta Qorshe-qaran oo Lagu Horumarinayo Beeraha**

Hirgelinta qorshe horumarineed oo heer qaran ah oo dhamaystiran ayaa ah mid muhiim ah. Qorshahani waa in uu diiradda saaraa kordhinta waxsoosaarka beeraha iyada oo loo marayo isticmaalka farsamooyin waara,kobcinta dalagyada la soo saarayo,iyo noocyaynta waxsoosaarka beeraha. Waxaa habboon in mudnaanta la siiyo maalgelinta beeraha oo ay weheliso cilmibaadhis iyo horumarin si loo beero noocyada dalag ee abaaraha iska caabbin kara, iyo farsamooyin hal- abuur leh.

**Xeeladaha Laqabsiga Cimilada**

Iyada oo la eegayo sida ay Soomaaliya ugu nugushahay saamaynta isbeddelka cimilada sida abaaraha iyo fatahaadaha, samaynta xeelado kor u qaadaya laqabsiga cimiladu waa qodob lama huraan ah. Tan waxaa kamdi ah fulinta nidaamka digniinta hordhacaah ee ka digaya xaaladaha cimilo ee cakiran, hagaajinta ilaha biyaha iyo nidaamka waraabka, iyo dhulka oo lagu sameeyo maalgelin waarta.

**Xoojinta Awoodda Waxbeerista Miyiga**

Hagaajinta kaabayaasha asaasiga ah ee beeraha ayaa ah arrin muhiim u ah xoojinta sidii lagu gaadhi lahaa suuqyada loona yarayn lahaa khasaaraha ku imanaya dalagyada soo go’ay. Maalgashigu waa in uu diiradda saaro dhismaha jidadka, goobaha kaydinta, waraabka, suuqyada oo ah kaabayaal fududaynaya in dalagyada laga soo raro tuulooyinka iyo dhulka miyigaah si fudud lagu keeno magaalooyinka waaweyn.

**Jaangoynta Qiime Caddaalad ah**

Waxaa habboon in hababka loo marayo qiimaha dalagyadu ay noqdaan kuwo isu dheellitiran marka la eego dadka dalagyada keenaya iyo kuwa iibsanaya. Dhinacanlaftiisa, waxaa habboonin la fuliyo siyaasado taageeraya beeralayda. Waxaa intaa dheer, in la taageero beerista cuntada la doonayo, gaar ahaan, in la taageero bulshada saboolka ah. Arrinkaasi waa mid aad muhiim u ah, si loo xoojiyo amniga cuntada ee dalka.

**Ilaalinta Xuquuqda Beeralayda**

Ilaalinta xuquuqda beeralayda ayaa lamahuraan u ah sidii ay ku heli lahaayeen deegaan ay guulo ka soo hoyn karaan. Tan waxaa kamid ah in la dammaanadqaado sidii ay dhul ku heli lahaayeen, sidii waxsoosaarkooda sicir caddaalad ah loogu goyn lahaa, iyo in sharcigu uu ka ilaaliyo in lagu tacaddiyo. In beeralayda la baro xuquuqdooda waxa ay ka caawin kartaa in ay dalbadaan sidii duruuftooda loo hagaajin lahaa loona taageeri lahaa.

**Xoojinta Hababka Kajawaabidda Degdegga ah**

Waxaa lamahuraan ah in la sameeyo habab awood leh oo loogu tala galay kajawaabidda xaaladaha degdegga ah; si wax looga qabto marka ay cuntayaraan ba'ani soo baxdo.Taas waxaa kamid ah in la sameeyo qorshayaal degdeg ah oo qeexaya sidii khayraadka la isugu dubarrida lahaa marka ay dhibaatooyinku dhacaan, iyo in la dammaanad qaado sidii dadka nuguli kaalmo u heli lahaayeen waqtiga ku habboon (intaan xeedho iyo fandhaal kala dhicin).

# CUTUBKA LIXAAD

# GANACSIGA DIBADDA & SARRIFKA LACAGAHA



# CUTUBKA LIXAAD

## GANACSIGADIBADDA & SARRIFKA LACAGAHA

### 6.1 Qaab-dhismeedka Ganacsiga & Heshiisyada Caalamiga ah ee Soomaaliya

Soomaliya waxa ay leedahay juqraafiyad nooceedu gaar yahay. Waxa ay leedahay xeebta ugu dheer Gobolka Geeska Afrika, laga bilaabo xeebaha ku teedsan Badda Cas ilaa Badweynta Hindiya, waana waxa ka dhigaya xarun aad muhiim ugu ah ganacsiga caalamiga ah. Sidaa oo ay tahay, haddana waxdhoofinta aan kala nooca ahayn ee dalku dibaddau dhoofiyo ayaa ah goljilicda ay dhibaatadu innaga haleeshay (weakness point). In ka badan boqolkiiba 80% dakhliga Soomaaliya ka soo gala dhoofinta wuxuu ka yimaaddaa; waxsoosaarka beeraha ee aan la warshadayn, ayna ugu horreeyaan xoolaha loo dhoofiyoKhaliijka iyo Sacuudiga, iniinaha saliidda laga sameeyo, iyo mooska. Kutiirsanaanta waxdhoofintan koobani waxa ay Soomaaliya ka dhigaysaa dal hoos jooga suuqyadacaalamiga ah ee aan qaabka ay noqon karaan la saadaali karin. Taas waxaa raaca, xoolahaloo dhoofiyo Bariga Dhexe, siiba Dalka Sucuudiga ayaa ah boqolkiiba 70% waxyaabaha dalku dibadda u dhoofiyo.

Qiimaha waxdhoofinta Soomaaliya ayaa waayadan dambe sii xumaatay, waxaana loo aanayn karaa xaaladda dhaqaalaha dunida oo sii adkaanaysa kadib dagaalkii Ruushka iyo Yukreyn ee dhacay 2022, oo lagu daray deegaanka gudaha ee laga shaqaynayo oo ah mid aad u liita. Dhibaatooyin kale ayaa jira, sida siyaasadda dhaqaalaha oo liidata iyo kutiirsanaanta dhoofinta xoolaha aan warshadaysnay oo ah qayb yar oo kamid ah waxsoosaarka hore ee dalku dhoofiyo, tiiyoo ay jirto hoos-u-dhac ku yimid sicirkabadeecadaha asaasiga ah. Arrimahan ayaa kaalin weyn ku lahaa in hoos-udhac heerkaas ahi suuragalo (AfDB, 2024).

Dhinaca soodejinta, Soomaaliya waxa ay si weyn ugu tiirsan tahay badeecadaha shisheeye si ay u daboosho baahiyaheeda isticmaalka gudaha. Kharaashaadka (bills) lagu bixiyo badeecadaha dibadda laga keenayo waa mid aad u weyn, waxaana ugu horreynba kow ka ah badeecadaha daruuriga ah, sida: cuntada, shidaalka, iyo badeecadaha warshadaysan. Badeecooyinka Soomaaliya la keeno inta badan waxaa laga keenaa Bariga Dhexe, Aasiya iyo Yurub, ayna weheliso iskaashi ganacsi oo muhiim ah oo ay Soomaaliya dalalka qaarkood la wadaagto, sida UAE, Shiinaha, iyo Turkiga.

Sida uu sheegay  CBS (2022), waxyaabaha ugu muhiimsan ee ay Soomaaliya dibadda u dhoofiso waa xoolaha nool,dalagyada saliidda laga sameeyo, iyo waxyaabaha kaymaha(dhirta) laga soo saaro (dhuxusha, xaabada iyo faleenka). Dalalka kala ah: UAE, Cumaan, Sacuudiga, Turkiga, Hindiya, iyo Shiinaha ayaa ah kuwa ugu badanee ay Soomaaliya la ganacsato. Marka la eego dalalka ay Soomaaliya wax u dhoofisay saddexdan ayaa ahaa kuwa ugu muhiimsan—UAE boqolkiiba 25%, Cummaan boqolkiiba 23% iyo Sucuudiga oo boqolkiiba 20%. Markase loo fiirsado dalalka ay Soomaaliya wax kala soo degtay kuwa ugu saamigabadan ayaa ahaa: Shiinaha boqolkiiba 17%, Hindiya boqolkiiba 15%, iyoTurkiga oo boqolkiiba 6% ah. Qaybaha ugu badan ee la soo dejiyay sannadkii 2022 waxa ay ahaayeen shidaalka, cunnada, qalabka dhismaha, baabuurta, agabka dayactirka gaadiidka (spare parts), dharka, iyo kabaha.

Soomaaliya waxa ay xubinka tahay ururroganacsi oo dhawrah—heer gobol iyo heer caalamiba leh, waxa ayna dalalkaqaarkood la leedahayheshiisyo ganacsi oo laba geesoodah. Kuwan hoose waa qaar kamid ah heshiisyada ganacsi ee muhiimka ah ee ay Soomaaliya qaybta ka tahay:

**Heshiisyo Dhinacyo Badan Leh:**

- Ururka Ganacsiga Adduunka (WTO): Soomaaliya waxa ay xubin ka ahayd Ururka (WTO) tan iyo sannadkii 2012.
- Suuqa Ganacsiga Xorta ah ee Qaaradda Afrika(AfCFTA): Soomaaliya waxa ay saxiixday Suuqa (AfCFTA) kaas oo ujeedkiisu yahay in la abuuro hal suuq oo badeecadaha iyo adeegyada Afrikaoo dhan la keeno. Shaqadasuuqan hoos timaaddawaxa ay si rasmi ah u bilaabatay Jannaayo 1, 2021.
- Suuqa Guud ee Bariga & Koonfurta Afrika (COMESA): Soomaaliya waxa ay ku biirtay Aagga Ganacsiga ee (Preferential Trade (PTA) 1981, kadibna waxa ay xubin ka noqotay ganacsiga Suuqa Guud ee Bariga iyo Koonfurta Afrika (COMESA) sannadkii 2018, gaar ahaan 19, 07, 2018.

**Heshiisyo Labada Dhinac ah:**

- Heshiiska Ganacsiga Xorta ah ee Turkiga iyo Soomaaliya: Soomaaliya iyo Turkiga ayaa kala saxiixday heshiis ganacsi oo xor ah sannadkii 2019, kaas oo ujeedkiisu ahaa in labada dal ay kordhiyaan ganacsiga iyo maalgashiga dhexdooda ah.
- Heshiiskii Iskaashiga Dhaqaalaha iyo Ganacsigaee Shiinaha iyo Soomaaliya: Soomaaliya iyo Shiinaha ayaa kala saxiixday heshiis iskaashi dhaqaale iyo ganacsi sannadkii 2018, kaas oo ujeedkiisu ahaa kordhinta ganacsi iyo maalgashi labada dal dhex mara.

**Heshiisyo Heer Gobol ah:**


- Heshiiska BulshadaBariga Afrika (EAC):Laga bilaabo Maarso4, 2024, Soomaaliya waxa ay noqotay dowladdii8aad ee ku soo biirtaheshiiska (EAC), kaas oo ujeeddadiisu tahay in lagu hormariyo isdhexgalka dhaqaalaha iyo iskaashiga dowladaha xubnaha ka ah.
- Heshiiska Urur-Goboleedka IGAD: Soomaaliya waxa ay kamidahayd dowladihii asaasay Ururka (IGAD), kaas oo bilowgii hore 1986, loo bixiyay Urur-goboleedka Ku shaqada Leh Abaaraha iyo Horumarinta (IGADD),balse mar dambe1996 loo beddelayUrurka (IGAD).

## 6.2 Isu-dheellitirnaanta Ganacsiga: Falanqaynta Xaaladaha Ganacsiga & Saamiga Waxsoosaarka Guud ee Gudaha (GDP)

Ganacsiga dibadda waxaalagu tiriyaa mid kamid ah tiirararka asaasigau ah dhaqaale kasta oo jira. Qeybtan warbixinta kamid ah ayaa diiradda saari doonta falanqaynta tilmaamayaasha ganacsiga dibadda ee Soomaaliya muddadii u dhexeysay (2013-2023), intii xogteeda la heli karay. Natiijooyinka falanqaynta xogta ee lagu muujiyey jaantuska soo socda waxa ay tilmaamayaan in dakhliga laga helay waxyaabihii dibadda loo dhoofiyay uu u dhexeeyay $942.6 milyan sannadkii 2013 ilaa $2089.5 milyan sannadkii 2023, celceliska dakhliga ka soo xarooday waxdhoofinta muddadaas aan soo sheegnay waxa lagu qiyaasay ku dhowaad $1272.1 milyan, ayna weheliso qiyaasta kalataksanaanta oo gaaraysa boqolkiiba 29%. Faa'iidada laga helo waxyaabaha dibadda loo dhoofiyo ayaa kordhaysay koboc dhexdhexaad ah oo celcelis ahaan gaaraya boqolkiiba 7.3% (qiimaha qiyaasta isbedbeddelka suuragalka ahi waa 0.000).

Waxyaabaha ay Soomaaliya soo dejiso ayaa si joogto ah u sii kordhayay celcelis koboc oo gaaraya boqolkiiba 9% intii u dhexeysay (2013-2023), iyada oo biilkasoodejinta uu kordhay $8956.6 milyan sannadkii 2023 halka uu ka ahaa $3560.9 milyan sanadkii 2013. Celceliska qiimaha dhexdhexaadka waxyaabaha la soo dejiyo ayaa gaaray $5483.2 milyan, ayna weheliso qiyaasta gedgeddoonka oo gaaraysa boqolkiiba 32% Tani waxa ay ka dhigan tahay in biilka soodejinta ee Soomaaliya uu aad isu gedgeddinayo marka loo eego dakhliga ka soo xeroodawaxa dibadda loo dhoofiyo. Badeecadaha ay Soomaaliya dibadda kala soo degto ayaa si aad ah u kordhay tan iyo 2020 sababo la xiriira cudurkaCOVID-19 iyo abaarois xigxigay oo dalka soo wajahay. Waxaa xusid mudan in inta badan waxyaabaha ay Soomaaliya la soo degtoay ahaayeen cuntooyin iyo badeecado daruuriah oo warshadeysan oo aan laga maarmikarin, halka waxyaabaha dibadda loo dhoofiyayna ay ahaayeen kuwo dakhligoodu hooseeyo.


**Jaantuska 6.1. Wax-dhoofinta & Soodejinta Soomaaliya (Milya US$), 2013 - 2023**




***Isha:*** *Bangiga Adduunka (2014)*

Isu-dheellitirka ganacsiga Soomaaliya ayaa ku jiray gaabis joogto ah 11-kii sano ee la soo dhaafay (2013-2023), halkaas oo celcelis ahaan gaabiska calaa sannad uu ahaa $4.2 bilyan iyo kalataksanaan dhexdhexaad ah oo gaaraysa 34%. Waxaa xusid mudan, in gaabiska ganacsigu xilliyadaas mar iyo ka badanbalaballaabmay, halkaas oo uu kordhayqiyaastii 2.6 mar, isaga oo ka kacay $2.6 bilyan sannadkii 2013, gaarayna $6.9 bilyan sannadkii 2023. Haddii aan la qaadin tallaabooyin lagu horumarinayo waxdhoofinta oo lagu soo beddelinbadeecadaha la soo dejinayo, hoos-u-dhaca ganacsiga ayaa la filayaa in uu sii jiro, taas oo ay dabada ka riixayso kobaca degdegga ah ee waxsoodejinta oo ka horreeya waxdhoofinta. Jaantuska soo socdaa waxa uu muujinayaa isbeddelka hoos-u-dhac ee ku yimid ganacsiga Soomaaliya muddo kadib.

**Jaantuska 6.2. Isu-dheellitirnaanta Ganacsiga Soomaaliya (Milyan US$), 2013 - 2023**




***Isha:*** *Bangiga Adduunka (2014)*

In la fahmo miisaanka gancsiga ceceliska boqolley ee uu ka yahay waxsoosaarka guud ee dalka waa arrin aad muhiim u ah. Intii u dhexaysay 2013-2023, celceliska saamiga waxdhoofinta Soomaaliya waxa uu ahaa boqolkiiba 15% oo kamid ah waxsoosaarka guud ee dalka, halka celceliska saamiga waxsoodejintu ahaa boqolkiiba 63%. Tani waxa ay ka turjumaysaa celcelis ahaan hoos-u-dhac ganacsi oo u dhigma ku dhowaad boqolkiiba 48%. Waxaa walaac weyn muujinaya in gaabiskaganacsigu sannadkii 2020 uu ka sara maray kalabar dakhliga dalka ee ka soo baxayay shaqooyinka socda. (eeg jadwalka 6.1). Natiijooyinkani waxa ay hoosta ka xariiqayaan jilicsanaanta dhaqaalaha Soomaaliya, taas oo muujineysa sida uu ugu nugul yahay dhibaatooyinka deegaanka.

**Shaxda 6. 1 Isu-dheellitirka Xaaladda Ganacsiga Soomaaliya oo ah Boqollayda uu Ka Yahay Waxsoosaarka Guud ee Gudaha, 2013 - 2023**

| Sannadaha | Saamiga wax-Dhoofita ee Dakhliga Guud ee Gudaha | Saamiga Wax-Soodajina ee Dakhliga Guud ee Gudaha | Miisaaniyadda Guud Boqollaayda Ay Ka Tahay Dakhliga Gudaha ) |
|---|---|---|---|
| 2013 | 16.15 | 61.02 | 44.87 |
| 2014 | **16.79** | **59.72** | **42.93** |
| 2015 | 14.86 | 57.08 | 42.22 |
| 2016 | **14.44** | **56.75** | **42.31** |
| 2017 | 12.05 | 56.03 | 43.98 |
| 2018 | **13.52** | **61.87** | **48.36** |
| 2019 | 12.01 | 57.57 | 45.56 |
| 2020 | **12.80** | **63.21** | **50.41** |
| 2021 | 15.57 | 66.51 | 50.94 |
| 2022 | **17.31** | **78.53** | **61.21** |
| 2023 | 17.89 | 76.69 | 58.79 |

***Source:*** *Based on Data Collected from the World Bank (2024)*

## 6.3 Furfurnaanta Ganacsiga & Xiriirka Sababeedee uu Ku Leeyahay Koboca Dhaqaalaha

Furfurnaanta ganacsiga waxaa lagu qiyaasaa iskudarka waxyaabaha la dhoofiyo iyo waxyaabaha la soo dejiyo boqollayda ay ka yihiin waxsoosaarka guud ee dalka, taas oo muujinaysa heerka iscelinta ganacsiga caalamiga ah. Furfurnaanta ganacsiga Soomaaliya ayaa gaaraybogolkiiba 77% sannadkii 2013, waxa ayna hoos u dhacday boqolkiiba 75% sannadkii 2018, waxaana sababay khalkhal ku yimid awooddii waxdhoofinta oo sababsatay abaarihii dhacay. Si kastaba ha ahaatee, shantii sano ee la soo dhaafaywaxaa kor u kacday furfurnaanta ganacsiga ilaa heer gaaraya boqolkiiba 95% sannadkii 2023, waxaana dabada ka riixayaykororka ku yimidwaxyaabihii la soo dejinayay; si loo daboolobaahiyihii ka dhashayCudurkii COVID19, waxnalooga qabto gaabiska ku yimid waxsoosaarkii gudaha oo ka dhashay abaaro badan oo is daba joogay.

Celcelis ahaan furfurnaanta ganacsiga Soomaaliya intii u dhaxaysay 2013-2023waxa ay ahayd ku dhawaad boqolkiiba 78%, oo ay weheliso kalataksanaan gaaraysa boqolkiiba (12%), taas oo muujinaysa kala duwanaanshaha ugu yar ee dhexdhexaadka ah. Falanqaynta hoobadka iyada oo la adeegsanayo afargeesyo yaryar oo caadi ah ayaa muujinaya jiho xilli oo togan oo muhiim ah (heerka tusmada 1%), uuna weheliyo koboc iskudhafan oo dhexdhexaad ah laguna qiyaasay2.2% muddadaas dhexdeeda. Shaxdan soo socotaa waxa ay muujinaysaa furfurnaanta ganacsiga Soomaaliya muddo kadib.

**Shaxda.6.2. Heerka Furfurnaanta Ganacsiga Soomaaliya**

| Sannadaha | Wadarta Ganacsigu Ka Yahay Boqollayda Waxsoosaarka Guud Dakhliga Gudaha |
|---|---|
| 2013 | 77.17 |
| 2014 | 76.51 |
| 2015 | 71.94 |
| 2016 | 71.19 |
| 2017 | 68.08 |
| 2018 | 75.39 |
| 2019 | 69.57 |
| 2020 | 76.01 |
| 2021 | 82.08 |
| 2022 | 95.84 |
| 2023 | 94.58 |

***Isha:** Bangiga Adduunka (2014)*

Waxaa baadhitaan lagu sameeyay xiriirka sababeed ee u dhexeeya furfurnaanta ganacsi iyo koboca dhaqaale ee Soomaaliya iyada oo la adeegsanayo (Grangercausality test). Natiijadu waxa ay muujisay in uu jiro xiriir hal dhinac ah oo ka dhexeeya koboca dhaqaalaha iyo furfurnaanta ganacsiga, taas oo laga dheegan karo farqiga saddexaad ee xogta (tijaabada (F) waa muhiim lagu qanci karo oo gaaraysa 5%). Furfurnaanta ganacsigadibaddu saamayn weyn kuma yeelankoboca dhaqaalaha intii u dhexeysay (2013-2023); sababta oo ah, inta uu isagu cunayay ayaa aad uga badnayd waxsoosaarkiisa. Waxaa xusid mudanin furfurnaanta ganacsigu ay kor u qaaddoheerka kobaca dhaqaale ee dalka marka uu kaabayo korodh dhammaystiran oo dhinac curiyayaasha waxsoosaarka ah (deegaanka, shaqaalaha, raasamaalka, iskudubarridka), iyo abuurista fursado shaqo. Tani waxaa lagu xaqiijin karaa xasillooni siyaasadeed, deegaan dhaqaale oo caafimaad qaba, iyo hurumarin joogtoah oo lagu sameeyo kaabayaasha dhaqaalaha iyo tiknoloojiyada dalka. Dhammaan arrimahani waa caqabado dhaqaalaha Soomaaliya hor taagan. Sidaa aawadeed, furfurnaanta ganacsiga Soomaaliya ka jiray muddadaas la soo sheegay saamayn weyn kuma lahayn koboca dhaqaale in kasta oo saamayntiisu ahayd mid togan.

Sida oo kale, natiijooyinka ayaa tilmaamay in iskuxirnaanta fudud ee u dhexeysa furfurnaanta ganacsiga iyo kobaca dhaqaalaha Soomaaliya ay ahayd 0.38. Haddaba Soomaaliya si ay faa'iido dhab ah uga gaadhofurfurnaanta ganacsiga waxaa la gudboonin ay yeelato habab lagu xoojinayo waxyaabaha la dhoofinayo, iyada oo mudnaanta la siinayo waxyaabaha lagu soo beddelanayo, loona marayo in diiradda la saaro badeecada raasamaalka ah.

## 6.4 Isbeddelka Sarrifka Lacagaha Soomaaliya

Qaybtan warbixintu waxa ay dul istaagaysaa isbeddellada ku yimid sarrifka lacagta—Shilin ka Soomaaliga iyo Doolarka Maraykanka laga bilaabo 2013 ilaa 2023. In kasta doollarku ku baahay macaamilka gudaha dalka, haddana falanqaynta sicirka sarifku waa arrin aad muhiim u ah; si dhaqaalaha loo fahmo. Waxaa la adeegsaday dhexdhexaadka sicirka sarrifka sannadkii, kaas oo laga xisaabiyay bardhexaad u dhexeysa sicirka gadista iyo gadashada xilliyo xiriirsan.

Xogta laga helay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa muujineysa korodh weyn oo ku yimid sarrifka lacagaha qalaad muddo kadib. Sarrifka Sh. Som/USD waxa uu ka kacay 19,283.8 sanandkii 2013-kii ilaa 23,954.2, sannadkii 2018, iyo 27,225.3 sannadkii 2023. Celcelis ahaan sarrifku waxa uu ahaa USD 23,891.3 Sh.Som.Sarrifka kordhaya waxa uu muujinayaa qiimadhac ku yimid tayadii lacagtadalka iyo sare-ukaca lacagaha qalaad. QiimahaShiin ka Soomaaliga ayaa hoos u dhacay ku dhowaad boqolkiiba 3.3% sannadkii intii mudadaas lagu jiray. Hoos-u-dhacan joogtada ahi waxa uu saamayn taban ku yeelan doonaa heerka nololeed ee muwaadiniinta, maadaama waxsoodejinta ay noqondoonto mid qaali ah sababtaoo ah lacagta dalka oo bilaa qiime noqotay. Intaa waxaa dheer, hoos-u-dhaca qiimaha lacagta dalku waxa ay keeni kartaa saboolnimada iyo sicirbararka oo xadhkaha goosata, taas aakhirkiina wiiqaysa xasilloonida dhaqaalaha dalka.

Haddaba, si loo yareeyo saamayntan, siyaasad-dejiyeyaashu waa in ay tixgeliyaan xeeladahalagu xasilinayo sarrifkalacagaha laguna horumarinayo kobaca dhaqaalaha. Tallaabooyinka suurtagalka ah waxaa kamid ah kaladuwidda waxdhoofinta, dhiirigelinta maalgashiga shisheeye, iyo hirgelinta siyaasadaha lacagta si loo maareeyo sicir-bararka.

Jadwalka soo socdaa waxa uu inna tusayaa xog faahfaahsan oo ku saabsan sicirka sarrifka ee Doollarka iyo Shi.Som.

**Shaxda.6.3. Celcelis Qiimaha Sarifka Shilin Soomaaligu Calaa Doollar Ahaa Sannadkii (Heerka Dhexe), 2013 - 2023**

| Sannadaha | Qiimaha Sarrifka |
|---|---|
| 2013 | 19283.80 |
| 2014 | 20229.97 |
| 2015 | 22254.24 |
| 2016 | 23061.78 |
| 2017 | 23097.99 |
| 2018 | 23954.18 |
| 2019 | 25064.63 |
| 2020 | 25761.17 |
| 2021 | 26039.01 |
| 2022 | 26832.52 |
| 2023 | 27225.31 |

***Source:*** *CBS (2024)*

## 6.5 Arrimaha Saamaynta Ku Leh Qiimadhaca Sarrifka Soomaaliya

Inkasta oo ay jiraan dhawr arrimood oo saamayn ku yeelan kara isbeddelka ku yimid sarrifka lacagta dalka, haddana warbixintu waxa ay diiradda saari doontaa gaabiska iskudheellitirnaanta ganacsiga iyo qulqulka maalgelinta shisheeye ee tooska ahi saamiga ay ka yihiin boqolloyda waxsoosaarka guud ee dalka. Waxaa taas keenaya xogaha muddo xiriir ah oo daboolaysa 11 sano oo keli ah laguma samayn karo falanqayn hoobad oo badan oo lagu kalsoonaan karo. Iyada oo la isticmaalayo habka afargeesyada yaryar ee caadiga ah ee ah qaabka lagu magcaabo (logarithmic model), ayaa la ogaaday in isbeddelka ku dhacay sicirka sarrifka Shiin Soomaaliga uu si weyn uga jawaabayo isudheellitirnaan la'aanta ganacsiga marka la barbardhigo maalgelinta shisheeshe ee tooska boqollayda ay ka tahay waxsoosaarka guud ee gudaha. Labadan doorsoome waxa ay muujinayaan in boqolkiiba 82% isbeddelladu ay ku dhacayaan sicirka sarrifka.

Hoos-u- dhaca dheellitirnaanta ganacsiga ayaa keena hoos-u-dhac ku yimaadda qiimaha lacagta dalka, halka maalgashiga shisheeye ee dalka soo gelayaa uu kor u qaadayo qiimaha lacagta qaranka. Si kale haddii loo dhigo, korodh gaaraya boqolkiiba 1% oo ah gaabis ku yimaadda dheellitirnaanta ganacsiga waxa uu keenayaa hoos-u-dhaca sarrifka lacagta oo gaaraya boqolkiiba 0.47%, halka boqolkiiba 1% dakhliga saafiga ah ee kororka laga helo maalgashiga shisheeye ee tooska ahi uu horseedayo kor-u-qaadista sicirka sarrifka lacagta dalka ilaa heer gaaraya boqolkiiba 0.26%.

Debecsanaanta gaabiska isudheellitirka ganacsigu waa mid muhiim ah oo muujinaya caddaymo tirakoob oo gaaraya boqolkiiba 1%, halka isugeynta qulqulka maalgashiga shisheeye ee saafiga ah ay tirakoob ahaan muhiim tahay boqolkiiba 10%.

## 6.6 Talasoojeedin Siyaasadeed oo Lagu Hagaajinayo Ganacsiga Soomaaliya

Kobaca dhaqaalaha iyo horumarka Soomaaliya waxa uu ku xiran yahay in uu qayb ka haado ganacsiga dibadda. Inkastaoo Soomaaliya ay ku taallogoob istaraatiiji ah ayna leedahaykheyraad dabiici ah, haddana ganacsiga Soomaaliya waxa uu wajahayaa caqabado badan. Talooyinka soo socdaa waxa ay daarran yihiin waxkaqabashada caqabadahaas; si ganacsiga Soomaaliya uu baalasha ula kala baxo.

**Xasilinta Qiimaha Sarrifka Si Ganacsi Xooggan Loo Helo**

- Hagidda Bangiga Dhexe: Bankiga Dhexe waa in uu dhaqan geliyo siyaasadaha lagu xasilinayo lacagta ShilinSoomaaliga ah markalagu sarrifayo lacagahaqalaad, ganacsigana laga ilaaliyo isbed-beddelka lacagaha.
- Maaraynta Kaydka LacagahaQalaad: In la dhiso kayd xooggan oo lacago qalaad ahi waxa ay keenaysaa in laga badbaado dhibaatooyinka dhaqaale ee dibadda ka imanaya, waxa uuna dhawrayaa sicirka sarrifka.

**Fududaynta Habraacyada Kastamyada Si Ganacsiga Loo Fududeeyo**

- Kastamyada oo laga dhigo kuwo fudud oo degdeg badan: Fududaynta habraacyada kastamyadu waxa ay yaraynayaan dib-u-dhaca iyo kharashaadka ka baxaya ganacsatada.
- Cashuur-dhimis loo sameeyo badeecadaha muhiimka ah ee dibadda loo dhoofinayo: Cashuurta oo laga yareeyo alaabada dibadda loo dhoofinayo waxa ay awood xooggan u siinaysaa in ay suuqyada iyo sayladaha caalamiga ah si hannaan leh ugu tartanto.
- Daryeelka Baahida Nolosha: Cashuurta oo laga daayo waxyaabaha dibadda laga soo dejinayo ee daruuriga u ah nolosha shacabka.
- Ladagaallama kadhuumashada cashuurta: Waa in la dhaqan geliyo tallaabooyin adag oo lagaga hor tegayo labaxsashada cashuurta iyo kadhuumashada kastamka, si loo ilaaliyo dhaqaalaha, loona xaqiijiyo ganacsi caddaalad ah.

**Kobcinta Ganacsiga Dibadda iyadoo loo marayo maalgelin sahlan**

- Hindisayaasha la soo jeediyay waxaa kamid ah:

Bankiyada ganacsiga oo lagu dhiirri geliyo in ay bixiyaan maalgelin la tartami karta ganacsiga dibadda.

- Bixinta kharashaad maalgelineed oo sahlan, sicir macquul ahna leh; si loo taageero ganacsatada wax dhoofisa iyo kuwa wax soo dejiya.

**Xoojinta Xiriirka Ganacsiga Caalamiga ah**

- Samaynta iskaashi ganacsioo xooggan: Waa in la sameeyo wadahadallo lagu hir gelinayo heshiisyo ganacsi oo dhammaan dhinacyada ku jira anfacaya.
- Fududaynta hawlaha ganacsiga: Yaraynta habraacyada iyo waraaqaha tiradabadan ee aan loobaahnayn si loo fududeeyo shaqada, ganacsigana looga dhigo mid si habsami badan u kala socda.
- Soojiidashada maalgashiga shisheeye: Soo bandhigidda waxyaabo lagu soo hiran karo, xoojinta iskaashi dhex mara shirkadaha gudaha iyo kuwa dibadda, iyo horumarinta aagag ganacsi oo xorta ah.
- Wadaagidda tignoolajiyada iyo khibradaha: Waa in waddamada kale lala kaashado sidii loo hagaajin lahaa kartida ganacsiga tartankana loogu sii jiri lahaa.
- Kobcinta aqoonta iyo xirfadaha ganacsiga: Waa in la iska kaashadodadaallada lagu helayo aqoonta iyo tababarrada; si kor loogu qaado awoodda ganacsatada iyo shirkadaha.

**Tiknoloojiyadda Casrigaah oo loo adeegsado ganacsi maangal ah**

Hinidsayaasha ugu muhiimsan:

- Diyaarinta nidaamyo ganacsioo casri ah.

Maalgelinta kaabayaasha tignoolajiyada si loo taageerohawlaha ganacsiga.

- Dhisidda xirfahda iyo awoodda shaqaalaha si tiknoloojiyada looga faa’iidaysto kafaa’iidaysi waxtar leh.

**Soobandhigidda sicir sarrif oo dhiirrigelin leh**

Hinidsayaasha ugu muhiimsan:

- Bixinta sicir ay ku tartamikaraan ganacsatada wax dhoofisa iyo kuwa wax soo dejiya.
- Halwgelinta hababka dabagalka iyo lasocodka si loo hubiyoin shaqadu si miradhal leh u fushay.

**Hirgelinta Xeelado Xoojinaya Badeecooyinka la dhoofiyo oo wax lagu soo beddesho**

Xeeladahani waa laga yaabaa in ay faa'iido weyn u yeeshaanhagaajinta dheellitirka ganacsigaiyo xasilinta sarrifka lacagtadalka. Talooyinka muhiimkaah ee dhinacaas khuseeya waxaakamid ah:

- Dhoofinta waxsoosaarka dalka ee faa’iidada keenaya: Waa in diiradda la saaro warshadaynta waxsoosaarka beeraha iyo xoolaha halkii laga dhoofin lahaa iyaga oo ceedhiin; si loo kordhiyo dakhliga waxdhoofinta laga helayo.
- Noocyaynta waxyaabaha la dhoofinayo iyo suuqyada loo dhoofinayo: Waxaa habboon tirada badeecadaha la dhoofinayo iyo sahminta suuqyocusub; si loo yareeyo kutiirsanaanta badeecado iyo suuqyo kooban.

- Raacidda halbeegyada caalamiga ah: Waa in la hubiyo waxyaabaha la dhoofinayo in ay waafaqsan yihiin halbeegyada caalamiga, haddii ay ahaan lahayd cabbaynta, galaynta, kaydinta/xifdinta, iyo bedqabkaba.
- Horumarinta warshado lagaga kaaftoomi karo waxyaabaha la soo dejinayo: Waa in laga shaqeeyo sidii loo dhiirrigelin lahaa in dalka laga soo saaro waxyaabaha hadda dibadda laga soo dejiyo, waana in la maalgeliyo kaabayaasha dhaqaalaha si warshadahaas loo taageero.
- Xoojinta isticmaalka waxsoosaarka gudaha: Waa in muwaaddiniinta lagu wacyi geliyaa muhiimaddaay leedahay in la isticmaalo alaabta gudaha dalka laga soo
- saaro si dhaqaalaha qaranka loo taageero.

**Abuurista Fursado Ganacsi oo Dibaddaah iyadoo loo marayo Dalxiiska**
Hinidisayaasha horumarineed ee lagu taliyay waxaa kamid ah:

- Horumarinta waaxda dalxiiska si loo soo jiito booqdayaasha shisheeye, loona kordhiyo dakhliga dhoofka.
- Horumarinta adeegyada dalxiiskaoo ah qayb muhiim ah ka ah horumarinta ganacsiga dibadda.

# CUTUBKA TODDOBAAD

## DEYMAHA DIBADDA & DULSAARKA



# CUTUBKA TODDOBAAD

## DEYMAHA DIBADDA & DULSAARKA

### 7.1. Sooyaalka Deymaha Dibadda ee Soomaaliya

Deymaha dibadda ayaa ah mid kamid ah ilaha ugu muhiimsan ee lagu maalgeliyo horumarinta dalalka soo koraya, halkaas ay u habboon tahay dowladahaasi in ay amaah qaataan si ay maareeyaan xaaladaha dhaqaale ee lamahuraanka u ah daboolidda gaabiska u dhexeeya maalgelinta iyo kaydka. Fashil ku yimaadda maaraynta iyo in si wax-ku-ool ahlooga faa'iidaysto deymaha dibadda, si loo xaqiijiyo horumarin miradhal leh waxa ay sababi kartaa in lagu dhaco dabinka deymaha, waana mid keenaysa caqabado dhaqaale oo badan, aakhirkiina u xuub siibanaysa heerar aan wax laga qaban karin iyo in ay dowladdaasi dhiiqo cagaha la gasho. Deymaha dibadda ee isbiirsada ayaa wadnaqabad ku ah dowladaha soo koroya, gaar ahaan Qaaradda Afrika, Soomaaliyana hadalkeedaba daa!

Dhibaatada deymaha dibadda ee Soomaaliya ayaa soo bilaabatay sannadihii 1970 iyo 1980, markaas oo ay dowladda Soomaaliya ay bilowday in ay deyn iyo amaah ka qaadato dalal iyo haayado caalami ah si ay ugu maalgeliso mashaariic horumarineed. Xilligaas Soomaaliya waxaa ka taagnayd dhibaatooyin dhaqaale iyo mid siyaasadeed oo ay kamid ahaayeen dagaallo sokeeye iyo xasilloonidarro siyaasadeed, taas oo keentay hoos-u-dhac dhaqaale oo ba'an, waxaana korodhay kutiirsanaanta deymaha laga qaadanayo dalalka shisheeye. Siddeetameeyadii, dowladda Soomaaliya waxa ay bilowday in ay deyn ka qaadato dalal iyo haayado caalami ah oo ay kamid yihiin Bankiga Adduunka (WB) iyo Sanduuqa Lacagta Adduunka (IMF).

Deymahan ayaa lagu maalgelinayey mashaariicda horumarinta iyo kaabayaasha dhaqaalaha ee ay kamid yihiin waddooyinka, buundooyinka, iyo dekedaha. Yeelkeede, dowladda Soomaaliya waa ay awoodi weydey in ay deynbaxdo; taasina waxa ay keentay in deymihii dibaddu ay ururaan, waana midda dhalisay dhibaatooyin dhaqaale iyo kuwo bulsheed oo tira badan, ayna ugu weyn yihiin saboolnimadii oo xadhkaha goosatay iyo kororka heerka shaqa la'aanta. 1991-kiina, dawladdii Soomaaliya oo deymaysan ayaa burburtay, taasinadalkii waxa ay u horseeday dagaal sokeeye iyo xasilloonidarro siyaasadeed. Dhibaatooyinkaasi waxa ay sababeen in dhaqaalaha Soomaaliya uu sii xumaado, isla markaana ay isa soo tarayaan deymaha dibadda, ilaa ay dawladdu gabi ahaanba awoodi wayday in ay iska bixiso.

Markii deymaha Soomaaliya lagu leeyahay ay noqdeen kuwo aan la maarayn karin, ayaa ay dowladdu wada hadal la bilowday deyn bixiyayaasha caalamiga ah kudhowaad toban sano ka hor, iyada oo naawilaysa bal in culayska deymaha laga yareeyo, loona helo waddo aan raf ahayn oo ay maaliyad ahaan ku soo kabato. Dooddii xigtay waxa ay si guud u sharraxday caqabadaha deymaha dibaddaee Soomaaliya, iyada oo lagu kaabayo aragtiyoxogeed iyo aragtiyo gorfayneed.


## 7.2 Falanqaynta Deymaha Dibadda ee Soomaaliya: Abbaarta, Qaababka iyo Waxyaabaha Baritaaraya

### 7.2.1. Abbaarta & Wadiiqooyinka Deymaha Dibadda:

Shaxdan soo socotaa waxa ay muujinaysaa wadarta guud ee deymaha dibadda ee Soomaaliya qabto laga soo bilaabo 2004 ilaa 2022, marka la eego Dollarka Maraykanka. Qaybtani waxa ay eegaysaa jihada, qaababka, iyo gedgeddoonka deymahadibadda Soomaaliya lagu leeyahay muddo kadib. Natiijooyinka muhiimka ahi waxa ay tilmaamayaan in deymaha dibadda ee Soomaaliya lagu leeyahay ay sii kordhayeen 19-kii sano ee la soo dhaafay, uuna weheliyo gedgeddoon heerka kalataksanaantu tahay boqolkiiba (29%).

Ururka deymahaSoomaaliya ayaa gaaraymeeshii ugu sarreysay oo ah $5.62bilyan sanadkii 2019 iyobarta ugu hooseysaee $2.67 bilyan sannadkii 2005. Intii u dhaxeysay 2004 iyo 2022, deymaha dibadda ayaa kordhay celcelis ahaan 3.2% sannadkiiba.

**Jaantuska 7.1. Wadarta Deymaha Dibadda ee Soomaaliya Hadda Qabto ($Bilyan) 2022-2024**




***Isha:*** *Bankiga Adduunka (2024)*

Hoos waxaa lagu sheegi doonaa falanqaynta xiilliyayn (sub-period) si loo keeno faahfaahin dheeraad ah.

**Xiilliyaynta Koowaad: 2004-2013**

- Deymaha dibadda ee dalka ayaa si tartiib-tartiib ah u korodhay muddadaas, iyada oo uu jiray xoogaa gedgeddoon ah boqolkiiba (3.4% heerka gedgeddoonka).
- Celceliska deymaha dibaddaee Soomaaliya qabto waxaa lagu qiyaasay $2.86 bilyan.

  Deymaha dibadda ayaa kordhay iyada oo celcelis ahaan kobaca kororka sanadlaha ah uu ahaa boqolkiiba 0.96%.
- Deymaha dibadda ayaa ahyaa mid xasilloon saddexdiisano ee muddadaasugu dambeysay.

**Xiilliyaynta Labaad: 2014-2022**

- Muddadan waxaa dhacay kor-u-kac weyn oo ku yimid deymihii dibadda, uuna weheliyo gedgeddoon kii hore ka badan boqolkiiba (30.2% heerka gedgeddoonka).
- Celceliska deymaha dibaddaSoomaaliya qabto waxaalagu qiyaasay $3.93 bilyan.
- Deymaha dibadda ayaa kordhay iyada oo celcelis ahaan kobaca kororka sanadlaha ah uu ahaa boqolkiiba 7.6%.
- Deymaha dibadda ayaa aad hoos ugu dhacday saddexdii sano ee ugu dambeysay muddadaas.

### 7.2.1.Waxyaabaha Ugu Muhiimsan ee Deymaha Dabada Baritaaraya

Dhowr arrimood ayaa si weyn uga qayb qaatay deymahadibadda ee Soomaaliya, waxaana kamid ah:

**Dagaallo Sokeeye & Xasilloonidarro Siyaasadeed:**
Soomaaliya waxa ay ku jirtay xaalad dawlad la'aan iyo colaado sokeeye ah muddo ku dhow soddon sano, mana jirin dowlad dhexe oo si qumman u shaqaysa, isla markaana isha ku haysa oo maaraysa deymaha dibadda ee laga qaatay dalalka iyo hay'daha shisheeye, taas oo Soomaaliya ka dhigtay in ay ku dhacdo oo dhex fadhiisato dabinka deymaha.

**Ku tiirsanaanta Kaalmada Shisheeye (Dawarsiga):**
Kaalmada Horumarineed ee rasmiga ah (ODA), oo loo yaqaan kaalmada shisheeye, waxaa looga jeedaa ama soo hoos gelayakheyraadka laga helo waddamada horumarayoo la siiyo waddamada soo koraya iyada oo loo marayo deymaha fudud. Soomaaliya waxaa ka dhacay sare-u-kac weyn oo ku yimid kaalmada shisheeye sannadihii la soo dhaafay, ilaa ay deeqaha dibaddu noqdeenba doorasho iyo il dhaqaale oo muhiim u ah dalka.

**Musuqmaasuqa & Ka Faa'iidaysiga (Leexsashada):**
Musuqmaasuqa baahsan, lunsashada iyo wax-iswaydarinta silloon ayaa si weyn uga qaybqaatay deymaha dibadda ee Soomaaliya lagu leeyahay ee sii biiraya. Deymaha dibadda ayaa si khaldan loo isticmaalay, laguna maalgeliyay mashaariic fadhiid ah oo aan shaqaynayn, halka hantidii dadweynahana la xaday, taas oo keentay dhiigbax ku dhacay khayraadkii bulshada oo aan loo aabba yeelin.

**Amaah Culus oo Dibadda Laga Qaatay:**
Deymaha dibadda ee Soomaaliya lagu leeyahay ayaa loo aanaynayaa amaahda badan ee ay ka qaadatay hay'daha maaliyadeed ee caalamiga ah, sida Bangiga Adduunka iyo Sanduuqa Lacagta Adduunka (IMF).Intaa waxaa dheer,Soomaaliya waxa ay deymo ka qaadatay laba dhinac oo kala duwan oo kala ah: dowladaha xubnaha ka ah Naadiga Paris (Mareykanka, Boqortooyada Ingiriiska, Ruushka, Faransiiska, Talyaaniga, Jabbaan, iyo Turkiga) iyo dowlado aan Naadiga Paris xubno ka ahayn (UAE, Sacuudi iyo Shiinaha).

**Abaaraha & Masiibooyinka Dabiicigaah:**
Soomaaliya ayaa kamid ah dalalka ay sida weyn u saameeyeen abaaraha iyo masiibooyinka dabiiciga ah ee Afrika ka dhaca. Masiibooyinkan dabiiciga ahi waxa ay horseedeen burbur ku yimid kaabayaasha dhaqaalaha, beerahana waxaa si xun u saameeyay abaaro sannado badan soo noqnoqday, taas oo keentay kharashaadkii baxayay oo kordhay. Dhibaatooyinkan darteed waxaa sii korodhay baahida loo qabo in deymo shisheeye la raadiyo.

**Maaliyadda Guud ee Dalka oo Si aan Habboonayn Loo Maareeyay:**
Waxaa aad uga sii dartay dhibaatada deymaha dibadda ee Soomaaliya lagu leeyahay iyada oo ay ugu wacan tahay si xun oo loo maareeyay, hoos-u-dhaca qiimihii lacagta dalka, doollarka xadhkaha goostay ee la adeegsanayo, iyo keydka kaashka lacagaha qalaad oo aad u yar; waana waxa keenay in xasilloonida maaliyadeed ee dalku ay wiiqanto.

**Dheelliga Miisaaniyadda oo Daba Dheeraaday:**
Miisaaniyadda guud ee dowladda Soomaaliya waxa ay waajahaysay gaabis joogto ah, iyada oo lagu fashilmay in la keeno dakhli guud oo lagu bixiyo baahiyaha miisaaniyadda dowladda, waana tan xukuumadda Soomaaliya ku khasabtay in ay si weyn ugu tiirsanaato deymaha dibadda si ay gaabiska miisaaniyadda ugu kabto.

Dulsaarka Deymaha Dibadda:
Dulsaarka ayaa ah waxa ugu weyn ee dabada ka riixaya deymaha is biirsaday ee Soomaaliya qoorta kaga maran, iyada oo qayb laxaad leh oo kamid ah miisaaniyada dalku ay u heellan tahay bixinta deymaha dibadda iyo dulsaarka saaranba.

## 7.3 Falanqaynta Dhibaatada Dulsaarka Deynta Soomaaliya

Dulsaarka deymaha Soomaaliya ayaa ah caqabad weyn oo saamaysay horumarka dalka, dhaqaalaha, iyo bulshada. Sannado badan oo dagaallo iyo xasilloonidarro siyaasadeed ay Soomaaliya ka aloosnaayeen ayaa waxa ku biiray deymo culus oo ay ku leeyihiin hay'daha lacagaha iyo maalgashadayaal shisheeye. Sababaha keenay dhibaatada dulsaarka deymaha Soomaaliya waxaa kamid ah:

- Deymo dibadda ah oo waaweyn:Soomaaliya waxaa ku ururay deymo dibadda ah oo kor u dhaafaya $5 bilyan oo doollar, taas oo culeys weyn ku ah ilaha dhaqaale ee dalka.
- Xasiloonidarrada siyaasadeed: Khilaafyada siyaasadeed ee dabada dheeraaday ee Soomaaliya iyo xasilloonidarrada ayaa saamayn xoogganku yeeshay dhaqaalaha. Waxa ay galaafteen adeegyadii dowladda, waxa ayna caqabad ku noqdeen awooddiilagu deyn bixi lahaa.
- Musuqmaasuq iyo maamulxumo: Musuqmaasuqa baahsan iyo maamulxumada ayaa uga sii daray caqabadihii deynbixinta Soomaaliya, horumarintii dhaqaalaha wiiqday, khayraadkiidalkana ka dhigtaymid aad uga fog taabbagelinta adeegyadii guud ee asaasiga ahaa.

Qaybtani waxa ay falanqaynaysaa dulsaarka deymaha dibadda ee ay Soomaaliya qabto iyada oo lagu saleynayo xogta soo socota

**Jadwalka.7.1. Dulsaarka Deymaha Dibadda Soomaaliya ee La Bixiyay 2004 - 2022(Qiimaha Hadda USD)**

| Sannadaha | Dulsaarka Daymaha Dibadda Doollar ahaan |
|---|---|
| 2004 | 450640.6 |
| 2005 | 721702.9 |
| 2006 | 857783 |
| 2007 | 740248.2 |
| 2008 | 1829627.8 |
| 2009 | 167530.7 |
| 2010 | 228973.7 |
| 2011 | 78367 |
| 2012 | 220472.9 |
| 2013 | 585698.1 |
| 2014 | 34951.5 |
| 2015 | 32179.9 |
| 2016 | 54212.3 |
| 2017 | 34668.5 |
| 2018 | 62305.3 |
| 2019 | 638337.7 |
| 2020 | 820909164.3 |
| 2021 | 17392936.6 |
| 2022 | 19554763.9 |

***Isha:*** *Bankiga Adduunka (2024)*

## Falanqaynta Guud: (2004-2022)

Wadarta guud ee dulsaarka deymahaSoomaaliya lagu leeyahaywaxaa ku dhacay gedgeddoon weyn intii u dhexeysay 2004 iyo 2022, iyada oo gedgeddoonkeedu gaaray boqolkiiba 413%. Dulsaarka deymaha ayaa heerkeedii ugu sarreysay gaaray $820 milyansannadkii 2020, halka deynbixintii ugu hooseysa ay ahayd $32,180 sannadkii 2015. Muddadii 19-ka sano ahayd, celceliska dulsaarka deymahaee sannadlaha ah waxa ay ahayd ku dhowaad $45.5 milyan. Xogaha ayaa muujinaysa in uu jiro isbeddel guud oo sii kordhaya marka la eego dulsaarka deynta sannadihii la soo dhaafay.

### Falanqayn-xilliyeedka (2004-2013)

Muddadaas dulsaarka deymaha dibaddu waxa ay muujinayaan jiho ilaa heer xasilloon, ayna weheliyaan xoogaa gedgeddoon ah. Dulsaarka deymaha ee ugu badan muddadan ayaa la diiwaan geliyay sannadkii 2008, taas oo qiimaheedu gaaray$1.83 milyan. Celceliska dulsaarka deymuhu waxa ay gaaray $588,104.49, ayna weheliso kalataksanaan gaaraysa 87%. Xogohu waxa ay tilmaamayaan culayska dulsaarka deynta dalku in ay ahayd mid la maarayn karayay intii muddadan lagu jiray, iyada oo aanay jirin wax la taaban karo oo kordhay ama hoos u dhacay.

### Falanqayn-xilliyeedka (2014-2022)

Muddadaas dulsaarka deymaha dibaddu waxa ay muujinayaan jiho ilaa heer xasilloon, ayna weheliyaan xoogaa gedgeddoon ah. Dulsaarka deymaha ee ugu badan muddadan ayaa la diiwaan geliyay sannadkii 2008, taas oo qiimaheedu gaaray$1.83 milyan. Celceliska dulsaarka deymuhu waxa ay gaaray $588,104.49, ayna weheliso kalataksanaan gaaraysa 87%. Xogohu waxa ay tilmaamayaan culayska dulsaarka deynta dalku in ay ahayd mid la maarayn karayay intii muddadan lagu jiray, iyada oo aanay jirin wax la taaban karo oo kordhay ama hoos u dhacay.

## 7.4 Dhibaatada Deymaha Isbiirsaday

Dhibaatada deymaha isbiirsaday waa marka deynqaatuhu, shirkad ama dawladkii uu yahayba, uu qaato deyn aad u badan oo ay ku adkaato ama ay macquul ahaan weydo in uu deyn baxo, xitaa haddii uu soo saaro lacag caddaan ah oo ku filan. Dhowr arrimood ayaa sababa dhibaatada deymaha xad-dhaafka ah oo ay kamid yihiin:

- Amaahda xad dhaafka ah: Qaadashada deyn badan inta badan waxaa raaca dulsaar aad u sarreeya, oo horseedi kara dhibaatada deymaha is biirsada.
- Hoos-u-dhaca qiimaha usuusha: usuusha loo isticmaalayo damaanadda deynta la qaatay haddii ay hoos u dhacaanwaxa ay adkaynaysaa in cidda deynta qaadatay ay deyn bixi kari weydo.
- Hoos-u-dhaca dhaqaalaha: Hoos-u-dhaca dhaqaalaha ayaa laga yaabaa in uu yareeyo qulqulka lacagaha kaashkaah, waana mid sii adkaynaysa in cidda deyntaqaadatay ay deyn bixi kari weydo.

Saamiga deymuhu ka yihiin waxsoosaarka guud ee dalku waa qiyaas la is barbar dhigayo deymaha ay dowlad uuni qabto iyo waxsoosaarkeeda guud ee dakhliga gudaha (GDP). Waa tuse muhim ah oo muujinaya xasilloonida dhaqaale ee waddan uun iyo awooddauu u leeyahay in uu dib u bixiyo deymaha lagu leeyahay.

Dowladaha ay deymuhusaami sare ka yihiin waxsoosaarka guud waxa ay wajahaan caqabado badan oo ay kamid yihiin hoos-u-dhac ku yimaadda koboca dhaqaalaha, kharashaadka deymaha oo kor u kaca, iyo hoos-u-dhac ku yimaadda heerkaaaminaadda deynqaadashada (si sahlan deyn kale kuma heli kartid).

Sida ka muuqata jaantuska soo socda, falanqaynta saamiga deyntu ka tahay waxsoosaarka guud ee dalka 19-kii sano ee la soo dhaafay waxa ay muujinaysaa arrimahan hoose:

Saamiga deytu ka ahayd waxsoosaarka guud ee dalka sannadihii tegey waa ay isgedgeddinaysay, waxaana wehelinayay jihooyin isbeddel oo muuqnayay:


- Jiho isbeddel oo hoos-u-dhac ah oo ahaa inta badan sannadihii tegey (2004-2008), (2012 - 2017), (2019 - 2022).
- Jiho isbeddel oo sii kordhaysa, (2008 - 2010), 2018).
- Saami aad u sarreeya oo boqolkiiba (100% ama ka badan),2009 – 2011.

Celceliska saamiga deyntu ka ahaa waxsoosaarka guud ee dalka (GDP) muddadii 19-sano ahayd waxa uu ahaa ku dhowaad boqolkiiba 60%.

Saamigii ugu sarreeyay ee deyntu ka ahayd waxsoosaarka guud ee dalka (GDP) waxa ay ahayd boqolkiiba 109.17% sannadkii 2010-kii, halka kan ugu hooseeyay uu ahaa boqolkiiba 34.34% sannadkii 2017.

4-Saamiga deyntuka ahayd waxsoosaarka guud ee dalka (GDP) ayaa hoos u dhacay celcelis ahaan boqolkiiba 3.9% muddadii u dhexeysay (2004-2022).

**Jaantuska.7.2. Saamiga Deymuhu Ka Yihiin Waxsoosaarka Gudaha (%) 2004 – 2022)**




***Isha:** Bankiga Adduunka (2014)*

Saamiga deyntuka tahay waxyaabaha dibadda u dhoofayaayaa ah tuse go'aaminaya awooddaay dowladdu u leedahay bixinta dulsaarka deymaha iyada oo adeegsanaysa faa'iidada ay ka hesho waxyaabaha ay dibadda u dhoofiso. Waxaa la falanqeeyay saamiga ay deyntu ka tahayd waxyaabaha ay Soomaaliya dibadda u dhoofiso intii u dhexeysay (2013 – 2022). Waxaa xilligan loo doortay iyada oo lagu salaynayo ilaa heerka xogta la heli karo.

Saamiga deyntu ka tahay waxyaabaha dibadda loo dhoofiyo waxa ay gaaraysaa 327.42, halka celcelis xisaabeedkuna gaarayo279.93. Kani waxa uu tilmaamayaa in qaybinta saamigadeyntu ka tahay waxyaabaha dibadda loo dhoofiyouu xoogaa dhankamidig u janjeedho. Saamiga deyntuka tahay waxyaabaha dibaddaloo dhoofiyo oo gaaraysa boqolkiiba 327.42% waxa ay ka dhigantahay in $1 kastaoo ay dowladdu ka faa'iidowaxyaabaha ay dhoofisoay ku soo aadayso $3.27oo deyn ah.

Si kale haddii loo dhigo, culayska deynta dalka ayaa qiyaastii 3.27 jeer ka badan dakhliga sannadlaha ah ee ka soo xerooda waxdhoofinta. Tani waxa ay muujinaysaa heer aad u sarreeya oo qaamowah, taas oo keeni kartacaqabado ku yimaaddaxasilloonida dhaqaale ee dalka iyo awoodda uu u leeyahay in uu iska bixiyodulsaarka deynta lagu leeyahay. Janjeedhka caadiga ah ee saamiga deyntu ka tahay waxdhoofinta ayaa gaaraya qiyaastii 99.75, taas oo muujinaysa kalataksanaan dhexdhexaad ah boqolkiiba (31%). Saamiga deymuhu ka yihiin waxdhoofinta waxa ay u dhexeeysaa 230.81 iyo 497.02 ugu yaraan iyo ugu badnaanqiime ahaan, sida ay u kala horreeyaan.

**Shaxda.7.2. Saamiga ay ka tahay dayntu boqollayda wax-dhoofinta (%), 2013 – 2022**

| Sannadaha | Saamiga ay ka tahay dayntu boqollayda wax-dhoofinta |
|---|---|
| 2013 | 311.79 |
| 2014 | 258.45 |
| 2015 | 266.93 |
| 2016 | 257.19 |
| 2017 | 284.97 |
| 2018 | 496.73 |
| 2019 | 497.02 |
| 2020 | 395.45 |
| 2021 | 274.88 |
| 2022 | 230.81 |

***Isha:*** *Bangiga Adduunka & Bangiga Dhexe ee Soomaaliya(2014)*

## 7.5 Xiriirka Ka Dhexeeya Deymaha Dibadda & Koboca Dhaqaalaha

Qaybtani waxa ay si tijaaboah u baadhaysaa saamaynta deymahaisbiirsaday, ee lagu cabbiro iyada oo la eegayosaamiga ay ka tahay waxsoosaarka guud (GDP), ay ku yeelankarto kobaca dhaqaalaha Soomaaliya, iyada oo loo eegayo (logarithm-ka waxsoosaarka guud ee dhabta ah. Falanqayntu waxa ay ku salaysan tahay xogo la ururiyayintii u dhexeysay 2004 ilaa 2022, oo ka kooban wadarta 19 fiiro. Falanqaytu waxa ay adeegsanaysaa muunadda loo yaqaanARMA (Auto Regressive Moving Average). Natiijooyinka ugu muhiimsan ee la helay waxaa ka mid ah: in heerka hoobad uu yahay mid muujinaya caddaymo tirakoob oo taban (qiimaha suurtagalka ah = 0.0376), waana mid muujinaysa in kor-u-kaca saamiga deymuhu ka yihiin waxsoosaarka guud ee gudaha ay xiriir la leedahay hoos-u-dhaca koboca dhaqaalaha.

Si gaar ah haddii loo eego, mar kasta oo saamiga deymuhu ka yihiin waxsoosaarka guud uu boqolkiiba 1% kordho waxa uu keenayaa hoos-u-dhac dhaqaale oo gaarayaboqolkiiba 0.06%. Moodalku waxa uu muujinayay isle'ekaan tayadeedu aad u sarrayso, ayna weheliso qiimaha labajibbaarka (R) (R-squared) oo gaaraya boqolkiiba 0.978%. Falanqayntani waxa ay soo bandhigaysaa caddaymo muujinaya kor-u-kaca saamiga deymuhu ka yihiin waxsoosaarka guud ee gudaha in uu cuuryaaminayo koboca dhaqaalaha, waana arrin xoojinaysa dhibaatada kororka deymaha Soomaaliya lagu leeyahay.

Sida oo kale, natiijadu waxa ay ku talinaysaa in siyaasiyiintu ay ka taxaddaraan deymaha biiraya, sababta oo ah waxa ay keeni kartaa cawaaqibxumo ragaadisa kobaca dhaqaalaha mustaqbalka fog. Heerka habboonaanta moodalka ee sarraysa (The model's high goodness of fit and significant) ayaa bixinaya kalsoonilagu qabi karo natiijooyinka soo baxay, waana mid falanqayntan ka dhigaysa mid si qiima leh uga qayb qaadanaysa doodda hadda socota ee ku saabsan saamaynta deymuhu ku leeyihiin koboca dhaqaalaha.

## 7.6 Fulinta Hindisaha Waddamada Saboolka ah ee Deymuhu La Degeen (HIPCs)

Tan iyo sannadkii 2016-kii, Soomaaliya waxa ay u xusul-duubaysay safardheer oo dib-u-habayn dhaqaale iyo maaliyadeed ah si ay wax uga beddesho deymaha dibadda, gaar ahaan, iyada oo loo marayo Hindisaha Waddamada Saboolka ah ee Deymuhu La Degeen (HIPCs). Xukuumadda Soomaaliya waxa ay caddaysay in ay ka go'antahay kamiradhalinta hindisahaas iyo in ay mudnaanta koowaad siiso. Waaxda MaareyntaDeymaha ee Wasaaradda Maaliyadda Soomaaliya ayaa kaalin muhiim ah ka ciyaarta maaraynta deymaha dibadda ee dalka lagu leeyahay. Waaxdani waxa ay masuul ka tahay ururinta, diiwaangelinta, maaraynta, iyo dhammaystirka deymaha dibadda. Sida oo kale, waaxdu waxa ay isu diyaarinaysaa soocelinta lamacaamilkaa hay'daha maaliyadeed ee caalamigaah. Dadaaladani waxa ay muujinayaan sida ay Soomaaliya ugu heellan tahay maaraynta deymaha dibadda lagaga leeyahay iyo hagaajinta xasilloonida dhaqaaleheeda (MoF, 2023).

Taariikhdu markiiay ahayd 13, 12, 2023,Soomaaliya waxa ay xaqiijisay guul taariikhi ah kadib markii ay gaaray heerkii looga baahnaa si ay uga faa'iidaysato Hindisaha Waddamada Saboolka ah ee deymuhu La Degeen (HIPCs), iyada oo noqotay waddankii 37-aad ee heerkan soo gaara. Guushan taariikhiga ahi waxa ay daba socotay kadib markii si guul ah loo fuliyay dib-u-habayn dhab ah oo ujeedkeedu ahaa dib-u-dhiska dhaqaalaha iyo hay'daha maaliyadeed ee Soomaaliya, ayana ku jirtay istiraatijiyad dhammaystiran oo lagu dhimayo saboolnimada, lagu tayaynayo maaraynta maaliyadda guud, laguna hagaajinayo dowladnimada, iyo khayraadka dalka oo si miradhal leh loo maareeyo.

Markii ay Soomaaliya xaqiijisay heerkii looga baahnaa si ay uga faa'iidaysato Hindisaha Waddamada Saboolka ah ee Deymuhu La Degeen (HIPCs), waxaa si weyn hoos ugu dhacay deymaha dibadda kana soo degay boqolkiiba 64% oo ay ka ahaayeenwaxsoosaarka guud ee gudaha sannadkii 2018, soona gaaray in ka yar boqolkiiba 6% dabayaaqada sannadkii 2023. Si kale haddii aynu u dhigno, deymaha guud ayaa hoos uga dhacday US $5.3 bilyan dhammaadka sannadkii 2018, una soo degey US $ 0.6 bilyan dhammaadka sannadkii 2023.

Cafinta deymahaSoomaaliya keliya ma ahan mid caadi ka dhigtay meeqaamkaSoomaaliya ay ku leedahay hay'daha maaliyadeed ee caalamiga ah, balse waxa ay sidoo kale u gogol xaadhay maalgelin cusub oo dibadda ka timaadda oo lagu taageerayo koboc dhaqaale oo baahsan, laguna yaraynayo saboolnimada.

Si kastaba ha ahaatee, Soomaaliya waxa ay wajaheysaa caqabado joogto ah kadib markii ay ku guulaysatay kafaa'iidaysiga Hindisaha Waddamada Saboolka ah ee Deymuhu La Degeen (HIPCs), caqabadahaasna waxaa kamid ah dakhliga gudaha oo yar, u nuglaanshaha turunturooyinka dibadda, iyo xasilloonidarro siyaasadeed (CBS, 2024). Sida uu qabo Bankiga Horumarinta Afrika—AfDB (2024), Soomaaliya in ay gaadho heerka loo qoondeeyay dowladaha deymuhu la degeen waxay u oggolaanaysaa in ay u qalanto in deymaha dhinacyada badan laga yareeyo.Tani waxa ay Soomaaliya u suuragelinaysaa in ay ka faa'iidaysato in laga cafiyo dhammaan qaansheegadkii laga doonayayin ay bixiso deymaha uu ka rabey Bangiga Horumarinta Afrika iyo Haayadda Horumarinta Caalamiga ah (IDA);iyo in ay ka faa'iidaysato caawimaadaha ku lammaan ee la siiyo dowladaha ka faa'iidaysta Hindisaha Waddamada Saboolka ah ee deymuhuLa Degeen (HIPCs), waana caawimaad ay bixiyaan Sanduuqa Lacagta Adduunka (IMF) iyo deyn- bixiyayaasha Naadiga Paris.

Banikiga Horumarinta Afrika (AfDB) ayaa keenay saamigiisii deyncafinta oo dhammaystiran kana mid ah qorshaha dowladaha deymaysan culayska deymaha lagaga yaraynayo, isaga oo dhammeeyay deymihiidib-dhacsanaa bishii 3aad, 2020, taas oo qiimaheeda lagu qiyaasay UA 88.15 milyan ($122.6 milyan), ayna ku jirto deymihii la rabey in la bixiyo ilaa 30-ka bisha 6aad, 2021. Bishii3aad, 2024, DFS waxa ay heshay dammaanad buuxda oo ay siiyeen deynbixiyayaasha laba geesoodka ah iyo dhammaan deynbixiyayaasha tirada badan oo ballan qaaday in 90% deymaha haddataagan laga yarayndoono. DFS waa in ay raacdaa siyaasadmaaliyadeed oo taxadar leh si ay u joogteyso joogtaynta habsami-usocodka deymaha, iyadoo la dedejinayo dejinta istaraatiijiyad cusub lagu abaabulayo sooxereynta dakhliga.

## 7.7 Yaraynta Deymaha Dibaddaee Isbiirsaday ee Mustaqbalka

Si looga fogaadoururka deymaha dibaddamustaqbalka, dowladda Soomaaliya waa in ay xeeladaha soo socda u dhug yeelataa:

**Giijinta Maaliyadda iyo Miisaaniyadda:**

- Hirgelinta habraacmiisaaniyadeed hufan oo la iskulaxisaabtami karo.
- Mudnaansiinta kharashaadka guud ee muhiimkaah.
- Dhimista kharashaadka ku baxaya shaqooyinka xukuumadda si loo hagaajiyo shaqada miisaaniyadda.
- Ladagaallanka musuqmaasuqa iyo si adag ookag'onaan ah cawda loogu jaro.
- Hubinta iswaafajinta howluhu sida ay u kala mudan yihiin marka la joogo horumarinta qaranka.

**Hagaajinta Abaabulka DakhligaGudaha:**

- Xoojinta maaraynta iyo ururinta cashuuraha.
- Balaadhinta aagagga canshuurtu ka soo baxaysohalkii la kordhinlahaa ama wax lagu dari lahaa.
- Hirgelinta habab dakhli-ururineed oo waxtar leh.

Yaraynta kutiirsanaanta kaalmadaiyo deeqaha shisheeye.

**Maareynta iyo Lasocoshada Deymaha:**

- Samaynta Qorshahawleed adag oolagu maaraynayo deymaha.
- Lasocoshada heerarka deymahaiyo sida ay u dhisantahay.
- Hubinta in deymahaloo adeegsaday si waxtar leh.
- Hirgelinta xeeladaha dib-u-bixinta deymaha (xeeladaha deynbaxa).
- Ilaalinta daah-furnaanta iyo islaxisaabtan maaraynta deymaha.

**Maalgelinta Kobaca Dhaqaalaha Gudaha:**

- Kobcinta jawi ganacsioo wanaagsan.
- Horumarinta ganacsiga gaarkaloo leeyahay.
- Maalgelinta kaabayaasha, waxbarashada, iyo daryeelka caafimaadka.
- Dhiirigelinta maalgashiga tooska ah ee shisheeye oo lagu saleeyayin laga wada faa'iidaysto.

**Xoojinta Hay’daha Dowladda & Maamulka:**

- Kobcinta awooda hay’dahau xil saaran maaraynta dhaqaalaha.

  Horumarinta maamul-wanaagga.
- Damaanadqaadka madax-bannaanida hay’daha dowladda, sida bangiga dhexe iyo hanti- dhowrka guud.

**Noocyaynta Dhaqaalaha:**

- Yaraynta kutiirsanaanta hal dhinac ama hal badeecadoo keli ah.
- Horumarinta kaladuwanaanshaha dhaqaalaha iyada oo loo marayo maalgashiga beeraha, waxsoosaarka warshadaha iyo adeegyada kale.
- Dhiirrigelinta ganacsiga iyo hal-abuurka.
- Hagaajinta tartanka waxdhoofinta dibadda.
- Noocyaynta salka waxdhoofinta (export base) si loo hagaajiyo awoodda iyo adkaysiga lagu wajahayo hantaaqooyinka dibadda.

**Raadinta Maalgelin Fudud:**

- Raadinta maalgelin fududoo laga helo hay’daha maaliyadda ee caalamiga ah.
- Gorgortan laga galo shuruudaha amaahda ee wanaagsan, sida in ay dulsaar yar leedahay iyo wakhtiyada lacagbixintuna ay dheer tahay.
- Buuxinta halbeegyada uqalmidda, sida heerka dakhliga iyo mudnaanta deynqaadashada.
- Hubinta uhoggaansanka shuruudaha hay’daha maalgelinta ama deeqbixiyayaasha.

**Dhiirrigelinta Shirkadaha gaarka loo leeyahay (PrivateSector) in ay ka qayb galaan maalgelinta dalka.**

- Xoojinta iskaashiga hay’daha dowladda (public sectors) iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee khuseeya dhinacyada muhiimka ah.
- Dhiirigelinta ganacsiga gaarka loo leeyahaysidii uu u maalgelin lahaa kaabayaasha dhaqaalaha iyo mashaariicda kale ee horumarineed.

# RAADRAACYO (REFERENCES)


**1. *African Development Bank Group (AfDB, 2024):*** Country Focus Report 2024, Driving Somalia's Transformation: The Reform of the Global Financial Architecture.

**2. *African Development Bank (AfDB, 2018):*** 2018 African Economic Outlook Country Note for Somalia.

**3. *African Development Bank/OECD/United Nations Development Programme (2017):*** "Somalia", in African Economic Outlook 2017: Entrepreneurship and Industrialisation, OECD Publishing, Paris.

**4. *African Development Bank (AfDB, 2017):*** Somalia Country Brief (2017-2020).

**5. *African Union (2022):*** Somalia Country Food and Agriculture Delivery Compact.

**6. *Central Bank of Somalia (CBS, 2024):*** Policy Brief on Somalia's Post-HIPCs Priorities: Economic Prospects and Debt Sustainability.

**7. *Central Bank of Somalia (CBS, 2022):*** Annual Report (2022).

**8. *Famine Early Warning Systems Network (2017):*** Somalia Supply and Market Outlook.

**9. *Islamic Relief (2023):*** Impact of Drought on Somalia's Agriculture.

**10. *National Economic Council of Somalia (2022):*** Access to Finance and Financial Inclusion in Somalia (May 2022).

**11. *Organization of Islamic Cooperation (OIC):*** Data on Somalia (2024)

**12. *Radboud University Global Surveys (2024):*** Vulnerability Index for Somalia.

**13. *Somalia Ministry of Finance (MoF, 2023):*** Financial Governance Report 2023. In Ministry of Finance - Somalia (Vol. 3, Issue 2).

**14. *Somalia Ministry of Finance (MoF, 2022):*** End-Year Budget Fiscal Performance Report.

**15. *Somalia Ministry of Finance (MoF, 2022):*** National Economic Council of Somalia, Access to Finance and Financial Inclusion in Somalia.

**16. *Somalia Ministry of Labour and Social Affairs (MoLSA, 2019):*** National Employment Policy.

**17. *Somalia Ministry of Planning, Investment and Economic Development (MoPIED, 2020):*** Somalia National Investment Strategy Development (2017).

**18. *Somalia National Bureau of Statistics:*** Somali Poverty Report 2023.

**19. *The United Nations Environment Programme (UNEP, 2018):*** Determination of Damage Caused by Drought in Somalia.

***20. The United States Department of Agriculture (USDA, 2024):*** Data on Food Crops in Somalia.

***21. United Nations Conference on Trade and Development (UNCTAD, 2020):*** UNCTAD Compendium of Investment Laws: Federal Republic of Somalia Foreign Investment Law (2015).

***22. Volz, U., Akhtar, S., Gallagher, K. P., Griffith-Jones, S., Haas, J., & Kraemer, M. (2020).*** Debt Relief for a Green and Inclusive Recovery: A Proposal. Center for Sustainable Finance, November.

***23. World Bank (2024):*** World Development Indicators (WDI). Data for Somalia.

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALAIA

**MINISTRY OF PLANNING, INVESTMENT AND ECONOMIC DEVELOPMENT**

***ECONOMIC DEVELOPMENT DEPARTMENT***

*www.mop.gov.so*
*info@mop.gov.so*

*Hussien Elabe Fahie Building,*
*Afgoi Road-KM5*
*Mogadishu - Somalia*